

QIIMAHA: ETB 6.10

ISBN: 978-99944-2-109-1

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada






# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## TILMAAME BARE

## FASALKA 6aad




Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## TILMAAME BARE
## FASALKA 6aad

**Qoraha Buuga:**

Deeq Axmed

**Tafatiraha:**

Axmed C/keriim

**Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada**

**Laxmi Publications**

## *Mahadnaq*

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka ,-J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska , Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya,Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa.Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No. ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay.Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare. Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare liyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobar iyo  kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka Dimuqraadiyada | 3 |
| Cutubka 2: | Saraynta Sharciga | 15 |
| Cutubka 3: | Sinaanta | 28 |
| Cutubka 4: | Cadaalada | 39 |
| Cutubka 5: | Dal Jacayl/Wadaninimo | 49 |
| Cutubka 6: | Masuuliyada | 57 |
| Cutubka 7: | Dhaqanka Shaqada | 62 |
| Cutubka 8: | Isku Filaansho | 69 |
| Cutubka 9: | Dhaqanka Kaydsiga | 74 |
| Cutubka 10: | Ka Qaybgalka Firfircoon Ee Bulshada | 80 |
| Cutubka 11: | Aqoon Raadsi | 85 |

# HORDHACA

Waxbarashadan muwaadinnimada iyo anshaxa ee fasalka 6aad si nidaamka baris-barashada sida ugu waxtarka badan loogu dhaqan galiyo buugan tilmaame bare ayaa la diyaariyey iyada oo arrimo asaasi u ahna lagu saleeyey. Buugan tilmaame bare waxaa loogu talagalay islamarkaana la aminsan yahay qodobada ku xusan buuga ardeyga maadaa muwaadinimada iyo anshaxa ee ka kooban koob iyo tobanka cutub nuxurada iyo farsamooyinka ay xambaarsan yihiin in si faah-faahsan loogu sharaxo looguna fahmo; lagu tilmaamo hawlaha ardeyda iyo kuwa baraha; iyo in uu kaalin wanaagsan ka qaadanayo hannaashada ujeedooyinka ka waxbarashada.

Waxaa la isu-deyey in buuga ardeyga lagu soo bandhigo su'aalo hordhac ah oo ardeyda lagu baraarujiyo; layliska iyo shaqooyin loogu talagalay in ardeydu koox-koox u fuliso waxqabadyada baraha iyo ardeyda sida baraha looga baahan yahay in uu u maamulo in tilmaamo laga bixiyo.

Buuga tilmaame bare door muhiim ah in uu ka qaadan doono sidii ujeedooyinka waxbarashada loogu dhaqan galin lahaa islamarkaana natiijooyinka la rabo in ay ka soo baxayaan ayaa la huba.

Sida daraadeed si uu si fir-fircoon iyo ka qayb gal ku dheehan yahay ugu soo bandhigo baraha waxaa lagula talinaya inti awoodiisa ah hababka baris-barasho ee buugan tilmaame bare lagu soo bandhigay adeegsado isaga oo waafajinaya kolba xaalada ardeyda iyo deeganadoodu sida ay yihiin. Xaaladuhu sida ay doonnaan ha ahaadaane geedi-socodka hawlaha ama hababka baris-barasho, soo bandhiga iyo maamulka waxbarashada barayaashu kaalin muhiim ah in ay ku leeyihiin ayaa la aminsan yahay. Iyada oo arrintan loo fiirinayo ama lagu salaynayo in su'aalaha hordhaca ah iyo laylisyada laga shaqeeyo, sixida iyo dhanka hagaajinta rabitaanka baraha ama kolba baruhu sida uu rabo in uu u fuliyo maadaama loogu talagalay waa in ay fahmaan.

Fikradaha ama nuxurada ku xusan dhammaantood waxaa loogu talagalay in fahamka barayaasha lagu ballaadhiyo laguna xoojiyo laakiin ma'aha in loo fahmo in ay isha kali ah ee jirta tahay (ma'aha isha kali ah ee jirta). Buuga tilmaame bare sida ugu habboon si ay barayaashu ugu isticmaalaan waxaa lagama maar-maan ah qodobadan soo socda in lagu xisaabtamo lana fahmo.

## ISTICMAALKA BUUGA TILMAAME BARE

### 1. Su'aalaha Hordhaca

- Su'aalaha hordhaca ah waxaa loogu talagalay ama ujeddooyinka Aasaasiga ah ee laga leeyahay waxaa weeyaan in ciwaanada ama qodobada waxbarashadu ka kooban t ahay khibrada iyo aqoontoodi hore ay u lahaayeen si ay waxbarashada ama casharada ay baranayaan ugu adeegsadaan. Inta waxaa dheer macnaha fikradaha loo soo bandhigay iyo waxyaabaha la xidhiidha fahamka iyo aragtiyada ayka qabaan in ay qeexaan ayaa loogu talagalay. Waxaa kale oo loogu talagalay in la dardar galiyo rabitaankooda la xidhiidha ka qayb galka casharada ay baranayaan iyo in ay si fir-fircoon ula socdaan waxbarashadooda. Waxaa hadaba baraha laga sugaya in uu fahmo waxaa hadaba baraha laga sugaya in uu fahmo waxyaabaha korka lagu soo tilmaamay islamarkaana su'aalaha hordhaca ah in uu 10 daqiiqo gudahood ku soo gabagabeeyo kadibna casharka muhiimka ah ee xiga u gudbo.
- Jawaabaha su'aalaha hordhaca ah dhammaantood buugan tilmaame bare

gudihiisa in aan laga, hellin ayaa dhici karta. Jawaabaha lagu siiyey hadi ay yihiin ma'aha fursada kali ah ee jawaabo lagu heli karo. Jawaabaha ay ardeydu bixiso ama ka bixiso su 'aalaha hordhaca ah sharaxaadaha loogu saxayo looguna hagaajinayo in loo adeegsado ku xoojinta ayaa la kara. Hasa yeeshe laakiin ujeedada ka dambaysa su'aalaha hordhaca ah casharka muhiimka ah qodobada ku saabsan oo dhan inta la soo qaato wada hadalku in uu ballaadho fikraduhuna isu qasmaan in laga digtoonaado aya aloo baahan yahay. Mararka qaarkood waxaa dhici karta jawaabaha ardeydu ka bixiso su'aalaha hordhaca ah fikradaha loogu talagalay in lagu hagaajiyo ee buuga ardeyga iyo ka baraha lagu soo bandhigay in ay ku filnaan waayaan. Markan oo kale baruhu isaga oo aqoontiisa iyo khibradiisa adeegsanaya in ay si habboon ugu saxaan ayaa laga sugayaa.

## 2. Hawlgalada

- Buuga ardeyga waxqabadyada lagu soo bandhigay waxaa loogu yeedha laylis halka buug atilmaame barana loogu yeedho ama la yidhaahdo hawsha ama waxqabadka baraha waxaa aad la isugu taxalujiyey jawaabo laylisyada loogu talagalay in la soo bandhigo ama buuga lagu diyaariyo. Marka qaar su'aal kasta oo ka mid ah kuwa layliska jawaab u gaar ah ayaa laga bixiyey. Mararka qaarna su'aalo hal ka badan ama dhawr ah ayaa iyaga oo wada socda ama isu-dhafan sharaxaad iyo qeexitaan lagu xusay ama lagu soo bandhigay waxaana lagu dadaalay illo laga hello fikrado jawaabo u noqon kara in la tilmaamo.

## 3. Jadwalka Qodobada (Cinwaanada) Iyo Xiisadaha

- Qodob kasta oo ka mid ah cinwaanada casharada ama qodob hoosaadyada xiisadaha loo qoondeeyey in lagu soo bandhigo hawlgalada la socda dhammaantoodna lagu fulin kari waayo ayaa dhici karta. Xaaladahan oo kale marka ay la soo gudboonaadaan baraha waxaa laga sugaya waxqabadyada iyo cinwaanada uu is-leeyahay faa'iido dheeri ah ayey leeyihiin isaga oo soo xulanaya islamarkaana xiisada iyo casharka; dugsiga iyo xaaladaha deegaanka iyo awooda waxbarasho ee ardeyda isaga oo iswaafajinaya in uu ardeyda waxbaro.

## 4. Shaqo-Kooxeedyada

- Shaqo kooxeedyada buuga tilmaame bare ku xusan oo dhan kuwa la amisan yahay in ardeydu fulin karto qaar ka baxsan oo lagu talagalay in kooxo dhawr ah in ay qabtaan ayaa jira. Waxqabadyadanina waa hawlo loogu talagalay ardeyda kale ee aan waxbarashada ka qayb qaadanaynin oo bilaa camal fadhiya. Hasa yeeshe ardey dhawr ah oo kooxo loo qaybiyey ujeedada kooxeedyada ee buuga ardeyga ku xusan dhammaantood si loo daboolo kooxo kala duwan oo yar-yar oo ardeyda oo dhani xiliyo kala duwan ka qayb qaataan iyaga oo kooxo ah aqoonta iyo xirfadaha laga helo in ay fahmaan in loo fudaydiyo ama sidii loogu fudaydin lahaa weeyaan xaaladan marka ay timmaado baraha waxaa laga sugaya in uu fuliyo ama sammeeyo shaqooyin ardeydu fulin karto iyaga oo kooxo ah in uu u soo diyaariyo.

# CUTUBKA 1: NIDAAMKA DIMUQRAADIYADA

## (12-Xiisadood)

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubka kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Fahmaan macnaha iyo  muhiimada nidaamka diimuqraadiga ah uu leeyahay.
- Dareemaan xuquuqaha iyo xoriyadaha adamaha iyo diimuqraadiyadeed ee muwaadiniinta.
- Gartaan faraqa u dhexeeya iyo waxyaabaha ay isaga midka yihiin xuquuqaha diimuqraadiyadeed iyo kuwa Aadamaha.
- Dareemaan faraqyada u dhexeeya qaramada, qoomiyadaha iyo shuuubta dalkeena Itoobiya.
- Gartaan waxyaabaha Aasaaska u ah xidhiidhka Itoobiya la leedahay dalalka dibada.

| Tirada | Qodobada casharka | Ujeedooyinka faah-faahsan | Illaha xogaha lagu xoojinayo/Kaabayasha |
|---|---|---|---|
| 1. | Nidaamka Diimuqraadiga | • Sharaxaaan macnaha nidaamka diimuqraadiga ah waxaa u yahay.<br>• Qeexaan muhiimada nidaamka diimuqraadigu u leeyahay Itoobiya<br>• Sharaxaan macnaha fikradaha lagu kala. Sharaxaan macnaha fikradaha lagu kala.<br>• Qeexaan in laga heshiiyo faraqyada lagu kala duwan yahay ilsmaarkaana si nabadgalyo ah lagu wada noolaado waxtarka ay leedahay.<br>• Uga qayb qaataan si wada jir ah shaqo kooxeedyada iyo iyaga oo ah ururo kadib marka ay ka heshiiyaan fikradaha ay ku kala duwan yihiin. | • Dastuurka dawlada.<br>• Sawir muujinayo nidaamka wax loo doorto ama nidaam doorasho dad istaageersanaya oo hawlo fulinaya |
| 2. | Xuquuqaha Aadamaha iyo kuwa Diimuqraadiyadeed | • Liis gareeyaan waxyaabaha ay isaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihin xuquuqaha aadamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed | • Dastuurka |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3. | Faraqyada u dhexeeya qaramada qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya. | • Liis gareeyaan faraqyada u dhexeeya qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.<br>• Iyaga oo midba midka kale waxaa uu yahay iyo dhaqankiisa u tix-galinaya (luqada, diinta–iwm) shaqooyinka kooxaha iyo dhaq-dhaqaaqyada ururada kala duwani sammaynayaan. | • Dastuurka dawlada.Posters<br>• Shirkadaha ama ururada iyo xafiisyada kaladuwan boostarada lagu arko. |
| 4. | Xidhiidhka dibbada | • Liis gareeyaan qodobada Aasaasiga ah ee xidhiidhka Itoobiya dalalka dibada la leedahay ku salaysan yahay. | • Dastuurka dawlada<br>• Sharciyada caalamiga ah ee qeexaya xuquuqaha Aadamaha. |

## 1.1. NIDAAMKA DIIMUQRAADIGA (5-XIISADOOD)

### 1.1.1. Macnaha Nidaamka Diimuqraadigaah

***Kaabayaasha laga Tix-raacayo xogaha Waxbarashada***

- Dastuurka dawlada diimuqraadiga fadaraalka Itoobiya.
- Sawiiro muujinaya doorashooyin goobo kala duwan lagu qabanayo.
- Sharciyada lagu qeexay xuquuqda Aadamaha.
- Ururada aan dawliga ahayn natiijooyin daabacaada ku saabsan xuquuqda.

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca ah***

- Macnaha Diimuqraadigu waxaa uu yahay ma taqaaniin? Nidaamka diimuqraadiga ahse?
  - ❖ Ardeydu macnaha diimuqraadiga waxaa ay ka yaqaaniin warqad ha ku soo diyaariyaan.
  - ❖ Dhawr ardey ah sii fursad ay fikradahooda ku soo bandhigaan.
  - ❖ Fikradaha lagu soo jeediyey la xidhiidhi casharka aad rabtid in aad bilawdo

***Hawlgal***

- Mudane "Geedi Hadalkiisii"sheekada yar ee cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka baruhu u saxayo jawaabaha ardeydu soo jeedisay qodobadan soo socda waad adeegsan karta:
  1. Fikrada haa leh si ay ardeydu u haysato qodobo xog ah sheekada ka soo diyaari.
  2. Dhacdooyin iyo qeexitaano ku saabsan nidaamka diimuqraadiga; dhinac kalena lidi ku ah nidaamka diimuqraadiga oo loo soo bandhigo (mudani orkaydho hadalkiisi ugu dambeeyey).
  3. Qodobada aad isleedahay way ku habboon yihiin islamarkaana waa sax oo ay ku fahmi karaan oo aad xoojisid4. Making comparisons between the ideas explaining democratic and non-democratic systems form the speech of Orkaydo.
  4. Hadalada mudaneorkaydho waxya-abaha caddaynaya in ay diimuqraadi yihiin iyo in ayna ahayn oo la is-bar-bar dhigo.

***Hawlgal***

- Iyaga oo iska soo horjeedsanaya fasalka dhaxdiisa layliska ha kaga wada hadlaan.

Natiijooyinka ay wada hadalka ay ka soo saaraan fasalka ha usoo jeediyaan. Hadi ay lagama maar-maan noqoto qodobadan soo socda ayaad adeegsan karta marka aad u saxaysid.

Nidaamka diimuqraadiga siyaabo kala duwanba loo qeexa kuwa ugu waa weyn mid ka mid ah ayaa waxaa uu yahay dawlada nidaamka diimuqradiga ah ku dhaqanta Aasaaskeedu ama ujeedooyinka loo asaaso waxaa weeyaan in rabitaanka bulshada inteeda badan lagu saleeyo islamarkaana buuxiso illaalisana. Marka hore waa rabitaanka bulshada badankeeda lagu aasaaso. Marka xigana waa in ay dawladaasi daboosho baahida ama waxyaabaha bulshadu danaynayso islamarkaana illaaliso. Nidaamka diimuqraadgu in uuna ahayn aalad ama nidaam ixtiraamka iyo faa'iidada dadka laga tirada badan yahay in la fahmo ayaa iyadana lagama maar-maan ah. Nidaamku waa nidaam diimuqraadiyadeed sababta loo yidhaahdo waxa weeyaan maadaama uu muwaadiniinta oo dhan siinayo fursad ay si fir-fircoon arrimaha dhammaantood ugaga qayb qaataan. Qoysaskoodu arrimaha doorashada in ay ka qayb qaataam' barnaamijyada horrumarineec ee heer dal iyo kuwa heer degmo ama deegaan dhismaha dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada rayadka wada hadalada ku saabsan ee la qabto ayey si dhab ah muwaadiniintu uga qayb qaataan.

**Macnaha Diimuqraadiyada**

Diimuqraadiyada barayaal kala duwan ayaa waddooyin kala duwan laakiin isu-dhaw-dhaw u macneeyey. Diimuqraadiyadu ardeyda waxay uga dhigan tahay nidaam dawladeed, maamul, xarumo –iwm nidaam bulshadu iska leedahay in uu yahay ayaa si fudud loogu qeexi karaa ama sharaxi karaa.

Diimuqraadiyada macnaheeda si cad loogu qeexo waxyaabaha lagu sharaxay ee cinwaanka lambarkiisu yahay 11.3 hoostiisa ku xusan in si wanaagsan loo akhristo laguna fahamsiiyo ardeyda ayaa loo baahan yahay. Waxaa kale oo inta dheer qodobadan ama fikradahan soo socda waxay qeexayaan macnaha diimuqraadiyada:

- Sharci muwaadiniinta dalka oo dhani ay ixtiraamaan ama ku dhaqamaan nidaam wata ama ku salaysan weeyaan (saraynta sharciga).
- Muwaadiniinta oo dhan xuquuq siman in ay leeyihiin nidaam ay ku gartaan weeyaan
- Farsamooyin ay muwaadiniintu mas'uuliyiintooda maamulka u haynaysa ku doortaan, awooda mas'uuliyadeed ay kaga dajiyaan ama kaga qaadaan, dambi hadi ay sammeeyaana sida muwaadiniinta caadiga ah oo kale sharciga hortiisa lagu keeno iyada oo kolba fal dambiyeedka dadka awooda dawlada haya ay sammeeyeen baaxadiisa loo eegayo nidaam ku socda in ay diimuqraadiyadu tahay in ardeyda la fahamsiiyo ayaa lagama maar-maan ah. Si ay ardeydu u fahamto tallaabooyinka dhab ah oo diimuqraadiyada la xidhiidha iyada oo la soo qaadanayo ayaa ardeyda la fahamsiin karaa. Siyaabaha nidaamka ama anshaxa ardeyda fasalka iyo dugsigaba loo illaaliyo, kaabaglaasyada iyo ardeyda ururada ama kooxaha kala duwan ee dugsiga loo doorto, xidhiidhka ay saaxibadood la yeelanayaan iyo is-ixtiraamka ay isu-muujiyaan–iwm iyada oo tusaale ahaan loogu soo qaadanayo ayaa macnaha diimuqraadiyada la fahamsiin karaa.

### 1.1.2. Muhiimada Nidaamka Diimuqraadigu lee Yahay

*Hordhaca*

*Su'aasha Hordhaca ah*

- Si ardeyda fursad ay ku sharaxaan fikradaha ama waxyaabaha ay ka fahamsan yihiin nidaamka diimuqraadiga ah.

- Muhiimada iyo faa'iidada nidaamka diimuqraadiga waxaa ka mid ah illaalinta xuquuqda qoomiyadaha iyo bulshooyinka, nabad galyada iyo barnaamijyada horrumarinta oo la dhiso adiga oo u soo bandhigaya casharka muhiimka ah u bilaw.

*Hawlgal*

- Iyaga oo kooxo yar-yar ah layliskan fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Qodob aada ay wada hadalka ka soo saareen si ay ardeyda kale ugu qeexaan ardeyda hada ka hor aan fursad u helin in ay wax soo jeediyaan si fursad ay ku soo badhigaan. Adiga oo tusaalooyin fud-fudud adeegsanaya nidaamka diimuqraadigu in uu dalkeena aad muhiim ugu yahay fahamsiin ardeyda.
- Maamulka dalkeena si looga dhigo mid wanaagsan bulshadana faa'iido u leh in nidaamka diimuqraadigu gacan ka gaysan karo maamulka iyo dedejinta barnaamijyada horrumarinta ee xaafadaha, degmada, gobalka–iwm.
- Si awooda ugu saraysa bulshada rayadka ah ama madaniga ah u yeelato ama u lahaato wuxuu suurta galinaya in la Aasaaso dawlad rabitaanka bulshada iyo xubno bulshadu soo dooratay ku salaysan.
- Sinnaanta si loo sugo, arrimaha ama nidaam caddalad ahna dhidibada loogu taago, nabadgalyo waarta iyo deganaanshaha sugidooda ay u suura galinaya.
- Nidaamka diimuqraadigu in uu fudaydinayo ama sahlayo in horrumarinta ama barnaamijyada dalka lagu horrumarinayo oo la dadajiyo islamarkaana sabboolnimada iyo dib u dhacnimada laga saaro.
- Nidaamka diimuqraadigu in uu yahay aalad lagu xoojiyo ama koriyo ka qayb galka bulsho oo shucuur iyo is-xilqaan ku dheehan yahay iyo dareenkooda muwaadinimo—oo ardeyda la fahamsiiyo.

Nidaamka diimuqraadiga ah in uu yahay nidaam muwaadiniinta siinaya fursad ay dalkooda ugu fikiraan, xil iska saaraan arrimaha dalkooda la xidhiidha ama khuseeya ama in ay dareen lahaansho yeeshaan iyo waxyaabaha la xidhiidha adiga oo u faah-faahinaya u soo gabagabe casharka.

Illaa iyo hadda nidaamyada dalwadeed ee caalamka lagu soo arkay ama laga yaqaano dhammaantood nidaamka horrumarka iyo dareenka ama shucuurta qofka ama dadka Adamaha ah kaalin wanaagsan ka qaata uguna maamul fiican marka kuwa kale loo fiiriyo in uu yahay nidaamka diimuqraadiga ayaa la aminsan yahay. Nidaamkani faa'iidooyin badan in uu leeyahay waxqabadka 3aad ee korka ku xusan qodobada ku saabsan ee la liis gareeyo adiga oo ku salaynaya ayaad cinwaanka sharaxi karta.

### 1.1.3. Nidaamka Diimuqraadiga ah Astaamaha lagu garto

*Hordhaca*

*Su'aalaha laga duulayo (Hordhaca ah)*

- Nidaamka diimuqraadigu fasalka dhaxdiisa ma ka jira?Hadi uu jiro nidaamka ama falalka diimuqraadiyadeed ee fasalka dhaxdiisa maxaa lagu garta?
- Hadiuujiro nidaamka amafalalka diimuqraadiyadeed ee fasalka dhaxdiisa maxaa lagu garta?
- Fikradaha hordhaca ah daqiiqado kooban oo ay ku xafidaan ama ay ku darsaan sii.
- Si fursad ay fikradahooda ku qeexaan

Fikradahooda sidan soo socota in aad u hesho ama urursato isku day:

- Fasaladooda iyo dugsiyadooda dhaxdeeda ama farsamooyinka ama nidaamyada ka jira kuwa nidaamka diimuqraadiga waa faqsan ama ay is-leeyihiin way waafaqsan yihiin ha qeexaan kadibna fikradaha ay soo jeediyaan qaar in la saxo u baahan hadi ay jiraan u hagaaji.
- Fikradaha jaantuuska lagu diyaariyey marka aynu soo qaadano:

  Jaantuuska ardeydu ha ka shaqayso iyaga oo koxoo yar-yar ah. Fikradaha ardeydu soo jeedisay sababaha ay u yidhaahdeen waan ku faraxsanahay ama kuma farasanin (waan taageersan nahay ama ma taageersanin) si ay u qeexaan dhawr ka mid ah ardeyda si fursad. Tallooyinka la soo jeediyey iyada oo lagu salaynayo qaab ardeyda kale ee fasalka looga qayb galinayo loona fahamsiinayo in loogu saxo ay muhiim ah.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan marka aad u saxaysid su'aalaha waxaad adeegsan karta qodobadan soo socda:

1. Xaalada doorashada xorta ah; saraynta sharciga(cutubka 2aad ka fiirso), madax-bannaanida garsoornimada–iwm adiga oo soo qaadanaya qodobo ardayda deegaanadooda ka jira oo ay fahmi karaan ugu dar.
2. Inlaisixtiraamo laga heshiiyo arragtiyada lagu kala duwan yahay islamarkaana la wada noolaado; xidhiidh saaxiibtinimo oo waara in la sammaysto lana adkeeyo barnaamijyada horrumarinneed ee heer dalna la dadajiyo; sinnaanta si dhidibada loogu taago in ay lagama-maar-maan tahayinnidaamka diimuqraadiyadeed la dhiso iyo fikradaha kale ee la xidhiidha inta la tilmaamo lana tuso muhiimadooda ama in ay lagama-maar-aan tahay ama uu yahay nidaamka diimuqraadiga ah ayaa la tusi karaa.
3. Buuga ardeyga qodob 1.1.2 ee cinwaankeedu yahay "dhaqanka ka heshiinta khilaafyada fikradaha ku saabsan ee hordhaca ahaanta loogu talagalay ee korka ku xusan in la tixraaco ayaa loo baahan yahay ama lagama-maar-maan ah. Kadibna waa in aad sharaxaad uga bixiso ama ka siiso.

Xaaladaha ama siyaabaha nidaamka diimuqraadiga ah loo qeexo way badan yihiin. Waxaa lagu qeexi karaa qoyska fasalka, dugsiga, saaxiibada–iwm xidhiidhka ka dhax jira ama qofku xidhiidhka uu la leeyahay sida uu yahay ayaa laga qeexi karaa. Sida daaradeed, ardeydu si ay dhaqaanka diimuqraadiga ugu tababarato arrimaha ama nidaamyada diimuqraadiyadeed ee rasmiga ah ee agagaarada ka jira waxyaabaha uu faham wanaagsan u siiyo fikradaha soo socda ayuu adeegsan kara. Nidaamka diimuqraadiga arrimaha darajo-ahaan ugu sareeya ee lagu garto ama qeexo waxaa ka mid ah:

- Daryeelida/sugida xuquuqaha adamaha iyo ku diimuqraadiyadeed(casharada soo socda ayaa lagu sharaxay).
- Daryeelida/sugida xuquuqaha adamaha iyo ku diimuqraadiyadeed(casharada soo socda ayaa lagu sharaxay).
- Jiri taanka nidaam doorasho oo xor ah iyo u hogaansamida geedi socodka nidaamka doorashada.
- Saraynta sharciga, muwaadiniinta oo dhan sharciga hortiisa oo ay siman yihiin (cutubka 2aad fiirso).
- Arrimaha diimaha iyo nidaamka dawladeed oo la kala saaro ama in midba midka kale arrimihiisa ku xadgudbin.
- Khilaafyada oo laga heshiiyo iyo cabashooyinka oo waddooyin nabad galyo

ah lagu xaliyo dhaqanada la xidhiidha oo la yeesho ama la barto–iwm qodobadan adiga oo u liis garaynaya ama marka aad u faah-faahiso casharka waad soo gabagabayn karta.

*Gabagabada*

- Adiga oo ardeyda weydiinaya su'aalo kala duwan oo aqoon ama karti lagu heli karo hubi qodobadan soo socda in ay fahmeen:

⇨ Macnaha nidaamka diimuqraadiga in ay qeexi karayaan ama sharaxi karayaan.

⇨ Nidaamka diimuqraadiga ah muhiimada uu Itoobiya u leeyahay in ay faah-faahin karaan islamarkaana ay fahmeen.

⇨ Macnaha fikradaha (aragtida) lagu kala duwan yahay waxaa uu yaha iyo in laga heshiiyo fikradaha lagu kala duwan yahay si nabad galyo ahna loo wada noolaado faa'iidada ay leedahay in ay dareemeen islamarkaana fahmeen oo la hubiyo ayaa lagama-maar-maan ah

## 1.2. XUQUUQAHA ADAMINIMO IYO KUWA DIIMUQRAADIYADEED (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha Waxbarashada ee la tix-raacayo*

- Dastuurka jamhuuriyada diimuqraadiga fadaraalka Itoobiyas.
- Xeerasha ama sharciyada lagu qeexay xuquuqda Adaminimo (komishinka Itoobiya u qaabilsan xuquuqda adamaha iyo ururada/hay'adaha kale ee xuquuqda adamaha ka shaqeeya sharciyada ay daabacaan ama soo saaraan).
- Boostaro,footogiraafyo,–iwm qeexaya xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed.

### 1.2.1. Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa Diimuqraadiyadeed Waxyaabaha ay ka siman yihiin iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

- Xuquuqaha Adaminimo kuwa la yidhaahdo inta aad ka taaqaaniin saddex ka mid ah sheega.
- Xuquuqaha diimuqradiyadeed kuwa la yidhaahdo inta aad taqaanin saddex ka mid ah sheega
  - ❖ Si fursad ay ku xasuusan karaan fahamka ay ka haystaan nuxurka fikradaha xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed.
  - ❖ Fikradaha ay ku soo jeediyaan la xidhiidhi casharka rasmiga ah.

*Hawlgal*

- Iyaga oo kooxo ah jaantuuska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Fikradaha sababta "xuquuq Adaminimo ama mid diimuqraadiyadeed" loogu magac daray ha qeexaan islamarkaana mid kasta oo ka mid ah fikradaha jaantuuska ku xusan iyo sababaha si ay u soo bandhigaan kooxo kala duwan sii fursad. Marka aad u saxaysid fikrada Afraad iyo shannaad oo kali ah xuquuqaha Adaminimo in aadan ku qeexin haddaad u baahatid sababa kale oo aan la sheegin hadi ay jiraan u sharax. Kuwa kale laakiin xuquuqaha diimuqraadiyadeed bay qeexayaan. Sababta oo ah xuquuqaha adanimadu waa xuquuqo biniadamnimada lagu hello qof walba xili kasta uuna waayi karin maadaama la aminsan yahay weeyaan. Qofna in uuna ka hor joogsan karin in la ogaysiiyo ardeyda ayaa loo baahan yahay.

***Hawlgal***

Layliska sheekada cinwaankeedu yahay"Arday Daahir iyo bare Duulane" iyaga oo ku salaynaya guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Sixitaan muhiim ah si aad ugu sammayso waxaad adeegsan karta qodobadan soo socda:

*Su'aasha 1aad*

Ma'aha" si ay u odhan karaan oo loogu dhigo. Sababta oo ah dugsiga in fasax la weydiisto ayey ahayd ama looga baahna. Macnaha diimuqraadigu in uun ahayn nidaam wax kasta oo aynu rabno, xili kasta oo aynu rabno aynu ku heli karno in ardeyda la fahamsiiyo. Sida daraadeed nidaamyada iyo sharciyada goobaha oo dhan laga hello ama ka jira waa in la ixtiraamo.

*Su'aasha 2aad iyo 3aa*

Iyada oo sheekada asaas looga dhigayo qodobo lagu hagaajinayo in loo diyaariyo.

*Su'aasha 4aad*

Nidaamka sharciyeed ee dugsiga iyo tilmaamaha kala duwan ee lagu socdo oo la garto lana ixtiraamo waxaa lagama maar-maan ah in ardeyda iyo barayaashu gartaan xuquuqda iyo waajibaadka saara. Marka kadib xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed waxaa ay isaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin si faah-faahsan ugu sharaxa.

**Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa Diimuqraadiyadeed Waxyaabaha ay isaga midka yihiin iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin**

Nidaamka diimuqraadiga ah arrimaha ama waxyaabaha lagama maar-maanka ka dhigay in lagu dhaqmo waxaa ka mid ah mudnaanta heerka sare ah ee uu siiyey dareelida ama tix-galinta xuquuqaha Adaminimo kuwa diimuqraadiyadeed.

Dastuurka dalkeena qaynuunada Aasaasiga ah ee uu qeexayo waxaa ka mid ah ixtiraamida ama tix-galinta xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed. Sida daraadeed 2/3 ka mid ah dastuurka dalkeenu si toos ah iyo si dadbanba fikrado xuquuqaha ka hadlaya ayaa ku qeexan.

Aasaas ahaan caalamka illaa iyo hada arrimaha dadka biniadamka ah uu heerkii logoa baahna in uu u fulinin waxaa ka mid ah xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed oo si buuxda in loo daryeelo lagu guud daraystay. Xuquuqahan, si loo daryeelo lagu guud daraystay. Xuquuqahan, si loo daryeelana in nidaamka diimuqraadiga uu yahay fursad ama farsamada kale ee loo adeegsan karo in ardeyda la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

Xuquuqaha diimuqraadiyadeed iyo kuwa Adaminimo waddooyinka ama siyaabo badan fikrado la isugu aadin karo ama la isugu xidhiidhin karo weeyaan.

Hasa yeeshe laakiin inta badan xuquuqaha adaminimo in ay yihiin xuquuqo lagu helo abbuurka biniadamnimo ayaa la aminsan yahay. Dhanka kale ama dhinaca kalena xuquuqaha diimuqraadiyadeed sharciyo kala duwan, nidaamyo ama qaynuuno kala gadisan maadaama lagu xidiidi karo ama lagu waayi karo xuququaha adaminimo way ka duwan yihiin. Xuquuqahan sida lagu dhaqan galin kara kali ah. Marka maamulka ka jira uu yahay nidaamka diimuqraaadiga ah.Inta badan qaar ka mid ah maamulka dawladeed ee kali-taliska ah iyo kuwa ciidanka ama askarinimada ama askartu ka taliso daryeelida xuquuqaha mudnaan ma siiyaan ama xil iskama saaraan. Aha mudnaan ma siiyaan ama xil iskama saaraa.

### 1.2.2. Muhiimada ay leedahay in Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed la daryeelo

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca ah***

- Sawiradu fariimaha ay gudbinayaani waa maxay?
- Sawirada idinka oo ku salaynaya xuquuqaha adaminimo iyo kuwa

diimuqraadiyadeed faa'iidooyinka ay biniadamka siiyaan faah-faahiya:

- ❖ Iyagaoosawirada firsanaya daryeelida xuquuqaha adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed macnaha ama waxaa ay ka yaqaanin si fursad ay ku qeexaan.
- ❖ Tallooyinka ay ka bixiyeen sawirada adiga oo casharka muhiimka ah la xidhidhinaya in aad isticaasho ayaa loo baahan yahay.

U fiirso fikradahan yar-yar ee sawirada ku saabsan:

1. Bulshada rayadka ah dhaxdeeda iyo dalkaba si nabad galyada looga sugo ama looga dhaqan galiyo in ay lagama maar-maan tahay xuquuqaha adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed in la daryeelo oo la dareensiiyo ardeyda.
2. Mid ka mid ah siyaabaha lagu garto in xuquuqaha adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed la daryeelay in si aan kala duwanaansho aan lahayn wiilka iyo gabadhu ay helaan fursad isu-mid ah oo ay si siman shaqada ugaga wada qayb gallaan ama loo abbuuro xaalad ay si siman shaqada ugaga qayb qaataan.
3. Miisaanku caddaaladnimadu qeexaya. Iyada oo arrintan laga duulayo caddaaladu in ay Aasaas u tahay daryeelida xuquuqaha adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed oo ardeyda la ogaysiiyo.
4. Bannaan baxa nabad-galyada ah in uu yahay mid ka mid ah xuquuqaha diimuqraadiyadeed tilmaamaya oo la ogaysiiyo ardeyda.

***Hawlgal***

- Layliska koox-koox ha kaga wada hadlaan. Waxaa fahmeen si fursad ay ku sharaxaan.

**Muhiimada ay leedahay in la Daryeelo Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa Diimu-qraadiyadeed**

Xuquuqaha dadka soo dhan waxay ka kooban yihiin kuwa biniadamnimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed. Arrinta la xidhiidha xuquuqahan maadaama ay tahay arrin aad u muhiim ah islamarkaana lagama-maar-maan ah wax su'aal ah ama khilaaf arrinta ku saabsan oo caalamku isu-haysto ma jirto habayaraate. Qarniyadi hore laga soo bilaabo si xuquuqahan loo sugo ama illaaliyo dagaalo badan ayaa qaybaha kala duwan ee dunidan la isaga hor yimaday. Dad badanba naftoodi qaaliga ahayd ku waayey. Allaabo badanba ku gubtay ama ku bur-buray. Xiligan aynu ku jirno laftigiisa dhibaatooyinka badan oo xuquuqahani u sabab yihiin in ay jiraan in aynu ogaano ayaa loo bahaan yahay. Waxyaabahan oo dhan sababaha ay u dhaceen illaa iyo haddana u dhacayaani waa maxay? xuquuqahani waxaa aad laf-dhabar ama lagama-maar-maan u yihiin nabad galyada, horrumarinta, iyo guud ahaan sinnaanta bulshada. Lafti ahaan macnaha labbadan fikradood(xuquuqaha biniadaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed) waa aalado lagu garto ama muujiyo xuquuqaha sinnaanta ee muwaadiniinta. Sidaa daradeed xaalad kasta oo jirta ama lagu sugan yahay xuquuqaha adaminimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed in la daryeelo waxay Aasaas u tahay horrumarsinta dalka sida-daraadeed adiga oo tusaalooyin dhab ah oo deegaanka ku salaysan adeegsanaya ayaa u sharaxi karta. Barnaamijyada Aasaasiga ah ee horrumarinta iyo xarrumaha u qaabilsan arrimaha bulshada in a ballaadhiyo, nidaam caddaal ku dhisan dhidibada loo taago muhiimada ay leedahay adiga oo qaab ay u fahmaan ugu soo bandhigaya islamarkaana tusaalooyin rasmi ah isticmaalaya u qeex. Dadan cusub ee soo kacaysa loogama baahna in ay dareemaan islamarkaana fahmaan oo kali ah xuquuqahan waxaa kale oo looga baahan yahay

in ay u halgamaan daryeelida xuquuqahan uguna shaqayn lahaayeen.

***Gabagabada***

- Ardayda baranaysa casharkan qodobada ugu waa weyn in ay fahmaan hubi adiga oo su'aalo iyo hawlgalo kala duwan adeegsanaya. Qodobadan soo socdana waa in aad mudnaanta koobaad siisid:
  - ❖ Xuquuqaha biniadamnimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed waxyaabaha ay isaga mid yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin in ay fahmeen oo la hubiyo
  - ❖ Xuquuqaha biniadamnimo iyo kuwa diimuqraadiyadeed muhiimada ay leeyihiin in ay dareemeen oo la hubiyo.

## 1.3. QOOMIYADAHA IYO BULSHOOYINKA

***Kaabayaasha/Agabka Waxbarashada ee la tixraacayo***

- Footo giraafyo, boostaro–iwm tilmaamaya waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca ah***

- Sawirka maxaad ka dareenteen?su'aashan kuwa kale oo u dhigma ama la mid ah u soo bandhig
- Sawirka marka ay fiirsadaan si habboon in ay u fahmeen xaqiiji
- Fikradaha ay soo jeediyaan si aad u hagaajiso wada hadalka tooska ahna aad u bilawdo qodobadan soo socda ee sawirka la xidhiidha ayaad adeegsan karta:

Dalkeena in uu yahay dal Qoomiyada iyo bulshooyinka badan ay ku noolyihiin tusaalooyin tusinaya adiga oo isticmaalaya tilmaan ka sii. Sagaal waxood, sagaal dawlad-deegaan, oo dhaxdooda ay ku noolyihiin muwaadiniin diimo iyo waxyaabo kala duwan aminsan ama haysta, luqado iyo taariikh kala duwana leh in ay yihiin oo ardeyda la ogaysiiyo.

- Sidaa daradeed ama sababaha aynu soo sheegnay awgeed dalkeena Itoobiya in loo yaqaano muusiyeemka qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshooyinka oo ardeyda la ogsysiiyo. Ardeyda fasalka, bulshada dugsiga–iwm dhaxdeeda faraqyada ama waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin oo la ix-tiraamo faa'iidada ay leedahay adiga oo tilmaamaya casharka ramiga ah in aad bilawdid ayaa loo baahan yahay.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda inta ay kaga soo shaqeeyaan ha keenaan. Jawaabaha ay soo jeediyaan si aad ugu saxdid qodobadan soo socda adeegsan karta:

1. Su'aasha hordhaca ee baraarujinta loogu talagalay fikrada ku saabsan aragtiyada lagu kala duwan yahay tilmaam ama tus ardeyda. Si ay ardeydu u fahamtana cutubka 3aad u sheeg ama u tilmaan in ay akhristaan
2. Si isu-dhacyada ama khilaafyada looga hor tego ama la isaga illaaliyo hawlo kala duwan in la fuliyo ayaa loo baahan yahay. Hawlahan kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah:

- Aqoonta iyo dareenka bulshada oo la kobciyo arrimaha isu-dhac ama khilaaf ka dhax abbuuri kara oo la qeexo xalna loo raadiyo ayaa loo baahan yahay.
- Arrimaha dib u dhacnimada iyo arragtiyada lidiga ku ah caddaalada iyo sinnaanta oo la tir-tiro
- Isu-dhacyo ama khilaafyo hadi xata ay abuurmaan dhaqanka wada hadalka iyo wada sheekaysiga oo la yeesho lana kobciyo
- Tir-tirida isu-dhacyada farsamooyinka loo adeegsado oo lagala kaashado xarumaha u qaabilsan xalinta casriga ah islamarkaana

xal u helida dhibaatooyinka iyo fikradaha kale ee la xidhiidha inta loo sharaxo ama faah-faahiyo arrinta la xidhiidha isu-dhaca fahamka ay ka haystaana kor loo qaado ayaa la awoodi karaya. Kadibna kala duwanaanshaha bulshooyinka dalka dhaxdooda lagu arkana faah-faahin uga bixi.

Faraqyada bulshooyinka dalkeena dhaxdooda ka jira sida luqada, diimaha, dhaqanka–iwm in ay yihiin fahamsi ardeyda. Faraqu ama kala duwanaanshuhu sinnaanta in uu faa'iido u yeesho maahine in uuna sabab u ahayn in midba midka kale ku dhaco u sharax adiga oo adeegsanaya tusaalooyin ka soo jeeda deegaanada ardeydu ku nooshahay.

Faa'iidooyinka nidaamka diimuqraadigu leeyahay waxaa ka mid ah faraqyada ama khilaafyada bulshooyinka u dhexeeya si ay uga heshiiyaan is-fahamna dhaxdooda uga abbuurmo nidaam u maamula weeyaan.Faraqyada u dhaxeeya qoomiyadaha iyo bulshooyinka Itoobiya sinnaanta iyo horrumarka inay Aasaas u noqdaan maahine in ay sabab u noqdaan in ay kala qayb samaan bulshooba bulshada kale khilaaf iyo is-maan dhaafyo ka dhax abbuurmaan in ayna ahayn in loo faahfaahiyo islamarkaana la fahamsiiyo ayaa waxtar weyn u leh ardeyda. Fikradan arrimaha la xidhiidha buuga ardaygu, cutubka saddexaad sharaxaada sinnaanta ku saabsan wey fiirsan karaan.

### *Gabagabada*

- Aqoonti loogu talagalay in ay casharka ka bartaan in ay fahmeen iyo in kale in aad hubiso ayaa loo baahan yahay adiga oo su'aalo adeegsanaya.Qodobada casharka la xidhiidha ee ardeyda laga rabo in ay fikrado iyo tallooyin ka dhiibtaan waa kuwan soo socda:
  - Faraqyada qoomiyadaha iyo bulshooyinka Itoobiya ay ku kala duwan yihiin in ay faah-faahiyaan ayaa laga sugaya.
  - Faraqyada qoomiyadaha iyo bulshooyinka Itoobiya ay ku kala duwan yihiin in ay faah-faahiyaan ayaa laga sugaya.

## 1.4. XIDHIIDHKADIBBADA (2-XIIDADOOD)

***Kaabayaasha Waxbarashada laga tix-raacayo***

- DastuurkaJamhuriyadaDiimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya u yaala

### 1.4.1. Itoobiya Xidhiidhka ay Dalalka Dariska ah la leedahay

***Hordhaca***

***Su'aalaha laga dhaqaaqayo***

- Itoobiya dalalkan dariska la ah xidhiidhka ay la leedahay qodob maxay ah ayuu ku salaysan yahay?

  lIyaga oo ku soconaya tilmaamaha buuga ku xusan su'aalaha hordhaca ah shakhsi-shakhsi ha uga shaqeeyaan islamarkaana ha qoraan waxaa ay daremaan.
- Dhawr ka mid ah sii fursad ay jawaabahooda ardeyda intooda kale ugu qeexaan.

Waalidiintoodu dariskooda xidhiidhka ay la leeyihiin qaabka uu yahay adiga oo xasuusinaya tallooyinka ay soo jeediyaan casharka muhiimka ah la xidhiidhi kadibna waxaad bilaabi karta wada hadal.

***Hawlgal***

- Layliska si ay qoysaskooda ugala soo wada hadlaan guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Dhawr ka mid ah ardeydu jawaabahooda ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan. Baruhu isaga oo fudaydinaya jawaabaha iyo tallooyinka us 'aasha lagaga jawaabay ee ku saabsan daris wanaaga iyo dabeecadaha wanaagsan eeloo baahan yahay in darisku yeeshaan ayuu adeegsan karaa marka uu saxayo. Waxyaabahan tusaalaha ahaan waxaa ka mid ah is-

qadarin, is-afgarad ama in khilaafyada laga heshiiyo, faa'iidad bulshada oo la sugo mudnaantana la siiyo, muranka ama doodaha oo wado nabad ah lagu tir-tiro, dhibaato daran hadi ay timmaadana in xal loo raadiyo iyada oo sharciga lagu salaynayo–iwm. Is-taageerid,in la is-gargaaro islamarkaana qofba qofka uu wax ku dhaamo ku caawiyo xidhiidhka dalkeenu dalalka dariska ah la yeelanayo siyaasada Aasaaska u noqonaysa in ay tahay oo ardeyda la ogaysiiyo. Guud ahaan laakiin dalkeenu xidhiidhka uu dalalka dariska ah la leeyahay is-traatiijiyada uu ku socdo in sharciga iyo siyaasada lagu qeexay oo ardeyda la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay. Tusaale ahaan dastuurka dawlada qodobka"86aad" qodobada lagu sharaxay in la tuso ayaa loo baahan yahay.

**Itoobiya Xidhiidhka ay la leedahay Dalalka dibbada**

Itoobiya xidhiidhka ay wadana dariska ah la leedahay si ay u adkayso siyaasada ay ku socoto waa nidaamyada saboolnimada iyo dib u dhacnimada ka saari kara sidii loo adkayn ama xoojin lahaa ku salaysan islamarkaana mudaanta siinaya in nabadgalyada deegaanada iyo deganaanshahooda loo illaalin lahaa. Si loo kobciyo dhaq-dhaqaaqa ganacsi in ganacsiga xidhiidhkooda la xoojiyo ayaa xooga la saaray loona farsameeyey. Barnaamijyada horrumarinta ee asasaiga ah, is-gaadhsiinta si loo ballaadhiyo tiknooloojiyada cusubna dalka loo soo galiyo arrimaha la xidhiidha ayaa waxay ka mid yihiin qaybaha ama waxyaabaha Itoobiya xidhiidhka ay dalalka dariska ah la yeelanayso uu ku salaysan yahay. Arrimahanina haya'daha, ururada ama dadka maal-qaabeenka ah sidi dalkeena in ay yimmaadaa loogu soo jiidan lahaa maal-galintana loo ballaadhi lahaa dadaalada loogu jiro ayey marba marka ka dambeeya sii xoojin karaysa. Xidhiidhada loo baahan yahay in dalalka dariska ah lala yeesho qoysku xidhiidhka uu la leeyahay qoysaska dariska la ah in ay isu-mid noqdaan ayaa dhici karta.

### 1.4.2. Waxyaabaha Aasaaska u ah Xidhiidhka Siyaasadeed ee Itoobiya la leedahay dalalka dibbada

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca ah***

- Sawirka 1.4 muxuu tilmaamaya?
- Sawirada waxyaabaha xidhiidhka Itoobiya dalalka dibbada la leedahay ku salaysan yahay waxaa uu yahay ma laga fahmi kara?waxaa aad ka fahamteen hadi uu jiro xidhiidhka Itoobiya dalalka dibada la leedahay maxay yihiin?
- Sawirka 1.4 idinka oo fiirsanaya waxaa aad ka fahamteen ardeyda fasalka uu soo bandhiga.
  - ❖ Fikradaha ay soo bandhigaan si ay uga wada hadlaan u fudaydi.

***Hawlgal***

- Si ay qoysaskooda ugala soo wada hadlaan guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Bare! marka aad u saxaysid fikradan soo socotaa adeegsan karta.

Nidaamka diimuqraadiga ah oo la dhiso lana dadajiyo barnaamijyada horrumarinta ayaa waxay ka mid yihiin istraatijiyadaha ugu waa weyn ee dalkeena sabboolnimada iyo dib u dhacnimada lagaga saari karo. Jihooyin kasta oo siyaasada dalku leedahay waxaa loogu talagalay in ujeedooyinkan lagu dhaqan galiyo islamarkaana natijo wanaagsan lagaga soo hooyo. Xidhiidhka siyaasadeed ee dalkeenu dalalka dibbada la leeyahay wuxuu xoojinaya sidii loogu guulaysan lahaa ka midho dhalinta ujeedadan sida–daraadeed. Barnaamijyada horrumarinta in la kobciyo: Xidhiidhka ganacsi ee dalkeenu dalalka

dibada la leeyahay in la kordhiyo ayaa loo baahan yahay. Waxyaabaha dalkeenu dibbada u dhoofiyo islamarkaana uu dakhliga ka helo oo soo saaridooda la xoojiyo. Barnaamijyada horrumarinta si loo ballaadhiyo xidhidhka gudaha dalka waa in la xoojiyo. Xarrumaha u qaabilsan arrimaha bulshada sida dugsiyada, caafimaadka-iwm waa in la ballaadhiyo. Beero-falatada oo laga caawiyo sidi ay farsamooyinka tiknoolojiyadeed ee casriga ah uga faa'iidaysan lahaayeen si kor loogu qaado beeraha iyo wax soo saarkooda–iwm ayaa la tilmaami karaa

- Dhismaha nidaamka diimuqraadiga oo la xoojiyo:

Saraynta sharciga bulsho lagu xaqiijiyo, sinnaanta lagu xoojiyo in la abbuuro maadaama mudnaanta sinayo maamul wanaagsan (dammaanad qaadi kara, cad-caddaansho ku caan baxay, ka qayb galka bulsho–iwm) nidaam lagu xoojiyo si loo dhisi karo in lagu talagaly in la dareensiiyo.

***Arrimaha Aasaaska u ah Xidhiidhka Siyaasadeed ee Itoobiya la leedahay dalalka dibbada***

Xidhiidhka dalkeenu la leeyahay dalalka dibadu wuxuu ku salaysan yahay qodobo dastuurka dalkeena lagu qeexay oo xidhiidhka dibada aynu la leenahay ku salaysan yahay, xidhiidhka siyaasadeed ee dalkeena dalalka dibada la leeyahay sida u noqon karo sharci tilmaamaya weeyaan. Qodobadani waxaa lagu xoojiyey xeerar iyo shuruuc loogu talagalay in lagu fuliyo. Xidhiidhka siyaasadeed ee dalkeena dalalka dibbadaha la leeyahay sharciyada loo dhigay waa kuwa loo diyaariyey qaab faa'iido ama waxtar u leh sidii nidaamka diimuqraadiyadeed loo dhisi lahaa, nabadgalyada dhidibada loogu taagi lahaa barnaamijyada horrumarintana loogu dadajin lahaa. Guud ahaan, xidhiidhka siyaasadeed ee dalkeenu la leeyahay wadanada dibada waxaa loo dhigay qaab faa'iido u leh bulshooyinka dalka.

***Gabagabada***

- Qodobadan hoos ku xusan adiga oo soo qaadanaya ujeedooyinka casharka in ay ardeydu hannatan xaqiiji.Su'aalihi iyo qodobadi ay ka soo wada hadleen adiga oo soo qaadaya aqaoonta ay ka helleen in aad xaqiijisid ayaa loo baahan yahay.
    - ❖ Itoobiya dalalka dariska ah xidhiidhka ay la leedahay qodobada uu ku salaysan yahay iyo darisyada iyo dabeecadaha in ay yeeshaan laga sugayo in ay fahmeen hubi.
    - ❖ Xidhiidhka siyaasadeed ee Itoobiya dalalka dariska la ah ay la leedahay waxyaabaha Aasaaska u ah in ay faah-faahin karayaan oo la xaqiijiyo.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA EE BUUGA ARDAYDA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been'

1. Run 2. Run 3. Been 4. Run 5. Run

### II. Sida ay Isugu Habboonyihiin Isugu Aadi

1. J 2. B 3. X 4. T.

### III. U dooro Jawaabta Saxda ah

1. X 2. X 3. X.

### IV. Buuximeelaha Bannaan

1. Diimuqraadi
2. Walaalnimo iyo daris wanaag.

# CUTUBKA 2: SARAYNTA SHARCIGA

## (9-Xiisadood)

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Gartaan muhiimada dastuurku leeyahay.
- Fahmaan faa'iidada uu muwaadiniinta u leeyahay in ay sharciga dhawraan dadka kalena in ay dhawraan lagu dhiiri galiyo.
- Fahmaan muhiimada ay leedahay wakiilada blshadu doorato iyo mas'uuliyiinta dawlada ee awooda leh in awoodooda xad loo sammeeyo.

| Tirada | Qodobada casharka | Ujeedooyinka faah-faahsan | Illaha xogta xoojinta |
|---|---|---|---|
| 1. | Dastuurku waa maxay ama muxuu yahay? | • Liis gareeyaan muhiimada ay leeyihiin Dastuurka Dawlada Deegaanada.<br>• Fahmaan in ay kaalin heer sare ah ku leeyihiin xeer dhaqameedyada iyo qaynuunada deegaanka sidii dhidibada loogu taagi lahaa.<br>• Sharaxaan in muwaadin kasta mas'uuliyadi ka saaran tahay in sharciga ay dhawraan dadka kalana ku booriyaan in ay sharciga u hogaansamaan. | • Dastuurada Dawlada Fadaraalka iyo dawladaha Deegaanada. |
| 2. | Anshaxa (Ethics) | • Qeexaan macnaha anshaxa.<br>• Liis gareeyaan heer dugsi ahaan nshaxyada laga sugayo. | • Xeerka dugsiyada.<br>• Qodobada anshaxa la xidhiidha.<br>• Boostarada kala duwan ee ururada iyo xafiiyada kala duwan lagu daabaco ee anshax ku saabsan. |
| 3. | Xaddaynta awooda mas'uuliyiinta Dawlada | • Sharaxaan muhiimada ay leedahay xaddaynta awooda mas'uuliyiinta dawlada.<br>• Sharaxaan baahida keentay in la xaddeeyo awooda mas'uuliyiinta bulshadu soo doorato. | • Dastuurka dawlada.<br>• Boostarada ururada iyo xafiisyada kala duwan lagu daabaco. |
| 4. | Sirta | • Qeexaan dhibaatada ka dhalata sirta saaxiibada oo la bixiyo. | |
| 5. | Musuq-maasuqa | • Liis gareeyaan tallaabooyinka musuq-maasuqa ah ee mas'uuliyiinta xilkooda gudan waayey hadi ay yihiin mas'uuliyiin bulshadu soo dooratay iyo kuwa awooda dawlada haya ay gaysan karaan. | • Ururada iyo xafiisyada kala duwan/macadka dawlada fadaraalka u qaabilsan sugida anshaxa iyo la dagaalanka musuq-maasuqa/boostarada lagu daabaco. |

*Hordhaca*

*Su'aasha Hordhaca*

- Dastuurka Dawlada Fadaraalka iyo Dastuurada Dawlada, Deegaanada waxyaabihi aad ku soo barateen waxaa ay ahaayeen maxaad ka xasuusan tihiin? maxayse xidhiidh leeyihiin?
  - ❖ Dhawr ardey ah sii fursad ay ku qeexaan fikradaha ama fahamka ay ka haystaan su'aasha hordhaca iyaga oo kali-kali ah.
  - ❖ Su'aashu maadaama ay dhinac kale ula kici karta ku daddaal in aad casharka la xidhiidhiso tallooyinka ay soo jeediyaan.
  - ❖ Si su'aashu u noqoto mid baraarujisa ardeyda baraha ugama baahna in uu faah-faahin dheeri ah ka bixiyo.

*Hawlgal*

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan Jawaabaha ay ku siiyaan si aad ugu saxdo qodobadan soo socda ayaad adeegsan karta:

1. Dastuurka Dawlada in kasta oo siyaabo kala duwan loo macnayn karo macnayaasha ugu muhiimsan waxaa ka mid ah kuwan soo socda: Dastuurku.

- Waa sharciga ugu sareeya ee hal dal ama gobalka sharciyada iyo qaynuunada lagu dhaqmo ku ugu sareeyaa ee la adeegsado.
- Mas'uuliyiinta Dawlada awooda iyo mas'uuliyada waxaa si cad loo dhigay xadka awooda loo sammeeye.
- Dastuurka waxaa ku qeexan qaab dhismeedka siyaasadeed ee dawlada hal dal lagu Aasaaso, siyaabaha awooda dawlada loo kala haysanayo arrimaha doorashada, xuquuqaha iyo waajibaadka muwaadiniinta saaran lagana rabo in ay ka soo baxaan.
- Muwaadiniinta iyo Dawlada xidhiidhka u dhaxaynaya sida uu noqonayo–iwm ayuu faah-faahinaya.

2. Nidaamka siyaasadeed ee dalwada dalku u jihaysan yahay, dhaqaalaha iyo arrimaha bulsho iyo waliba siyaasada xidhiidhka dibada, xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed xeerashada la xidhiidha–iwm ayuu si guud u qeexa. Sharaxaada buuga ardeyga ku xusan iyo qeexitaanada korka ku xusan adiga oo ku salaynaya casharka waad u soo koobi karta.

## 2.1. DASTUURKA DAWLAD GOBOLEEDYADA MUHIIMADA UU LEEYAHAY

*Su'aasha Hordhaca*

- Dawlad goboleedyadu in ay Dastuur u gaar ah sammaystaan maxaa loogu baahday?
  - ❖ Hordhaca ama fikrada baraarujinta koox-koox ha uga wada hadlaan.
  - ❖ Dhawr kooxood natiijada ay wada hadalka ka soo sareen ardayda kale ee fasalka ha u soo bandhigaan kadibna casharka qaybta ugu muhiimsan in ay bilaabaan u sheeg.

*Hawlgal*

- Layliskana guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka aad u saxaysidna qodobadan soo socda adeegsan karta.

1. Si ay iskood isugu maamulaan, maamulayaasha bulshadu soo dooratay si ay meel dhaw uga maamulaan ama bulshada gobaladu si ay u doortaan maamulayaal dhaxjooga ama u dhaw si ay uga kaaftoomaan maamulayaasha heer fadaraal in ay wax ka sugaan; iyaga oo xaaladaha dhabta ah ee ay ku sugan yihiin ku salaynaya in ay xeerar koo-kooban oo ay isu-maamulaan sammaystaan ama in ay diyaarsadaan. Dhaqankooda iyo hiddahooda dhisaan; Hantidooda in ay maamulaan, in ay kobciyaan islamarkaana isticmaalaan; carruurta in ay ku haddalka

luqadodoa baraan; caddaalada iyo maamulka adeeg yadooda kale si ay meel dhaw uga hellaan, in bulshada arrimaheeda dareen ahaaneed, siyaasadeed, dhaqaala ahaaneed iyo bulsho ahaaneed sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen laga dhiso ayaa loo baahan yahay.

2. Su'aasha 1aad ee korka ku xsan fikradaha ama tallooyinka laga bixiyey in su'aashan in lagu saxo waa la karaya. Fikrado kuwan ka duwan hadi loo soo jeediyana kolba xaaladu sida ay tahay dawlad goboleed walba dastuurkeedu sida uu yahay iyada oo loo fiirinayo in la fahamsiiyo ama loogu hagaajiyo ayaa loo baahan yahay

***Shaqada koox-kooxda***

Shaqadan in kooxo 3-4 ardey ah ka kooban oo labo kooxood ah in loo diyaariyo kadibna la amro ardeyda in warbixin ka soo diyaariyaan islamarkaana soo bandhigaan ayaa wanaagsan. Xisiadaha kale ee dambe warbixinteeda koox walba way soo jeedin karta. Laakiin arrinta ugu muhiimsa nwaxaa weeye in faa'iidooyinka maalin walba laga helayo shaqada kooxaha in mudnaan la siiyo ayaa lagama maar-maan ah. Kooxda warbixinadooda soo jeedin wayda waa Ia ogaysiiyo in casharada xiisadaha kale ee mustaqbalka in kooxaha hadhay ay warbixinadooda midba mar soo jeedin doono ayaaloo baahan yahay waxyaabaha la soo jeediyey fikrado lagu hagaajiyo in la soo bandhigo ayaa muhiim ah:

Dalalka qaarkood in ay leeyihiin dastuuro hal ka badan leh in ay yihiin dalalka nidaamka fadaraaliga ah ku dhaqma in ay yihiin u sheeg. Sida daraadeed halka sagaalka dawflad-deegaan ee Itoobiya ka kooban tahay mid walba Dastuur u gaar ah ka leedahay Dawlada fadaraalka ah ee Itoobiyana hal Dastuur oo kali ah ayey leedahay. Guud ahaan taa macnaheedu waxaa weeyaan Dalkeena Itoobiya wuxuu leeyahay 10 Dastuur. Hasa ahaatee, sagaalka Dastuur ee dawlada gobaleedyadu leeyihiin dhammaantood waxay hoos yimaadiin Dastuurka Dawlada Dhexe ee Fadaraaka maadaama uu yahay Dastuurka dalka ugu sareeya.

Sidaa daradeed Dastuurada Dawlad gobaleeyada oo dhan waa in ay si toos ah ugu salaynaadaan ama waafaqsanaadaan Dastuurka Dawlada Fadaraalka. Qodobada ama fikradaha Dastuurada Dawlada gobaleedyada ku qeexan waa in ayna ka mid noqonin qodobo ama fikrado lidi ku ah ama ka hor imanaya Dastuurka Dawlada Fadaraalka ah. Qodobada ku qeexan Dastuurada Dawlada gobaleedyada hadi ay ku jiraan ama ka mid yihiin qodobo lidi ku ah ama aan waafaqsanayn Dastuurka Dawlada dhexe ee Fadaraalka ah Dastuurka Dawlad goboleedyada ama qodobada lidiga ku ah ka fadaraalka waxay noqonayaan kuwa ayna waxba ka jirin ama been abbuur ah. Sida daraadeed xidhiidhka u dhaxeeya labada.

Dastuurka oo kala ah Dawlada dhexee ee Fadaraalka iyo kuwa Dawlad gobaleedyada u faah-faahi adiga oo habab fudud adeegsanaya.

***Muhiimada Dastuurka Dawlad gobaleedyada leeyahay***

Dalkeenu in uu Dastuuro badan leeyahay waa in laga wargaliyo ardeyda. Sababta oo ah maadaama nidaamka ama qaab dhismeedka dawladeed ee aynu ku socono yahay nidaam fadaraali ah waxaa lagama maar-maan ah in Dawlad goboleedyadu ay yeeshaan Dastuuro u gaar ah. Aasaas ahaan sababta keentay in Dawlad gobaleedyadu yeeshaan Dastuuro u gaar ah qaramada, qoomiyadaha iyo bulshooyinka xuquuqdooda oo la dhawro faa'iidooyin dhaxal gal ah maadaama ay leedahay weeyaan. Sidoo kale Dastuurada Dawlad gobaleedyada xuquuqaha sinnaanshaha oo la xaqiijiyo waxay adkaynaysa midnimada bulshooyinka. Si aad faah-faahin dheeri ah u heshaan waxaad fiirsan kartaan casharkan hawlgalkiisa 2aad su'aasha 1aad sharaxaada laga bixiyey ee korka ku xusan.

**Xeerar Dhaqameedyada Deegaan ahaaneed kaalinta ay ku leeyihiin sugida asluubta iyo Deganaanshaha**

***Su'aasha hordhaca***

- Waa maxay baahida keentay in la hello ama uu jiro xeer dhaqameed deegaaneed

ama agagaarada ama goobaha la deegan yahay u gaarka ah.

- Su'aashan hordhaca qofba mar fikrado ha ka bixiyo.
- Is-faham la'aanta sida lama filaanka ah dadka deegaanku u soo dhax gala xarumo iyo xirfadaha lagu xalin karo ee deegaan-ahaaneed adiga oo soo qaadanaya wada hadalka rasmiga ah in loo gudbo.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan iyaga oo qoysaskooda kala soo sheekaysanaya. Natiijooyinka la soo jeediyey ugu yaraan saddexda ugu wanaagsan ardeyda fasalka intooda kale ha u soo bandhigaan. Marka aad saxaysid jawaababha labada su'aalood qodobadan soo socdaa adeegsan karta:
- Isu-dhacyada ama is-maan dhaafyada agagaaradooda laug arko farsamooyinka iyo nidaamyada lagula dagaalamo kaalinta ay ka qaataan sugida nabadgalyada adiga oo tusaale ahaan u soo qaadanaya u sharax.

***Xeer Dhaqameedyada Deegaanada ama Degmooyinka kaalinta ay ku leeyihiin sugida Deganaanshaha***

Dastuurka dhaxdeeda dhibaatooyinka bulshada ka dhax jira fikradaha iyo farsamooyinka lagu xaliyo oo aad u faah-faahsan una qoto dheerba ka mid ah lama odhan karo. Aasaas ahaan waxaa jira xeer dhaqameedyo aad u tiro badan oo kaalin aad muhiim u ah ka qaata la dagaalanka isu-dhacyada, dacwadaha, magac u dagaalanka bulshada dhaxdeeda ka dhaca oo dheeri ku ah sharciyada kala duwan ee ku qeexan Dastuurka dalka u yaala. Xeer dhaqameedyadan badankoodu ma qorna waxaana laga adeegsada goobaha kala duwan ee bulshooyinka kala duwani ku nool yihiin.Sida daraadeed hadi aynu soo qaadano qaar kamid ah xeerasha odayaashu ku kala saaraan dhinacyada isu-dhaca, shirarka ama wada hadalada qoyasaska–iwm ayaa ka mid ah. Adeegsiga xarumaha caddaalada iyo xeerarka kala duwan ee agagaarada oo la adeegsado waxay kaydinayaan kharash iyo wakhti badan oo ku lumi lahaa. Xeer dhaqameedyadu waxay fudaydinayaan in si deg-deg ah xal loogu hello dhibaatooyinka jira ama dhaca. Sida daradeed ardeydu waa in ay ogaato dhibaatooyinka iyo is-maan dhaafyada dadku la kulmaan dhammaantood ma aha wax ay xalin karaan maxkamadaha iyo xarumaha booliska oo kali ah mana aha dhibaatooyin dhammaada. Mustaqbalka dhibaatooyina isu-dhacyada iyo is-maan dhaafyada iman doona farsamooyinka lagula dagaalami doono iyo xarumaha dhaqan ahaaneed ee la adeegsan doono waa in la sii xoojiyo. Arrinta ugu weyni waxaa weeyaan nidaamyadan iyo xeerasha dhaqan ahaanneed ee la adeegsado waa in ayna lidi ku noqonin ama ka hor imanin Dastuurka Dawlada qodobada sharci ahaaneed ee ku qeexan.

**Sharciga oo la dhawri waayo Dhibaatooyinka Muwaadiniinta soo gaadhaya**

***Su'aasha laga dhaqaaqayo***

- Hadi lagu guul-daraysto in ku dhaqanka sharciga in la sugo dhibaatooyin noocee ah ayaa ka dhalan kara?
  - Ardeyda inta aad kooxo u kala saarto sii wakhti kooban oo ay ku wada hadlaan.
  - Qodobada ay isu-raacaan qaabka warbixinta oo kale ardeyda kale ha ugu soo bandhigaan.
  - Sharciga oo loo hogaansami waayo dugsiga, goobaha lagu noolyahay, dhibaatooyinka shakhsi ahaan iyo kuwa guud ee ay keeni karto ama ka dhalan kara adiga oo u soo koob lana xidhiidhi casharka qaybtiisa muhiimka ah kadibna shaqada xigta u gudub.

***Hawlgal***

- "Faslakii Sharciga Dajistay" sheekada cinwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka aad saxaysid jawaabaha ardeydu soo gudbiso qodobadan soo socda adeegso:

1. Ardeyda dhammaantood waxay ku heshiyeen in ay sharciga fasalka u hogaansamaan. Hasa ahaantee mas'uuliyada iyo awooda sharciga lagu abaabulayo lahayd dhibaatooyinka awood sareeya marka ay abburmaan in laga warbixiyo weeyaan kaalinta ay ku lahaayeen. Inta waxaa dheeri ku ah baraha fasalka uu maamulaha u yahay xaaladiisa u kuurgali waaya ayaa cannaanta iska leh. Dhibaatooyinka ardeyda fasalka haysta in mas'uuliyiinta dugsiga ee ka sareeya iyo barayaasha in uu kala hadlo ayey ahayd.
2. Baruhu
3. Ardeyda fasalka in uu sida ugu habboon u dabagalo ayey ahayd.Waxaa looga baahna in uu si deg-deg ah xal ugu hello dhibaatooyinka ardeyda fasalka lagu arkay ama ay keeneen. Cid kasta oo mas'uuliyad qaadaysa ama mas'uuliyada la saaro sidii uu mas'uuliyada uga soo bixi lahaa in la fahamsiiyo layliskana laga dhigo mid fir-fircooni ku abuura ardayda.

***Hawlgal***

- Layliska si ay fasalka dhaxdiisa ugu akhriyaan iyaga oo kali-kali ahna uga shaqeeyaan islamarkaana warbixin uga soo jeediyaan sii fursad ay ku fuliyaan. Tallooyinka ay soo jeediyaan ha ka wada hadlaan. Marka aad saxaysidna qodobadan soo socda adeegsan karta:
  - ❖ Qofka kale waxqabadkiisa, dabeecadiisa iyo falalkiisa inta aanaan dhaliilin ama wax ka sheegin ka hor inagu hawsha marka hore ma fulinayna su'aasha ah inta aynu is-weydiino in aynu ka fiirsano ayaa na looga baahan yahay. Innagu in aynu dadka kale tusaale u noqono oo ficilada xun-xun aynu fulino in aynu ka dhawrsanahay waa in aynu xaqiijino.

***Hawlgal***

- *Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan hana keenaan.*

1. Dhibaatooyinka aad baaxad u leh ayey la kulmi doonaan. Buugooda waxbarasho faah-faahinta ku xusan u fiirso.
2. Mas'uuliyada ugu weyn uguna horraysa ee dawlad u waa xaqiijinta sidii sharciga loogu hogaansami lahaa. Xarumaha/ macadyada iyo waaxyaha kale ee dawlada ee mas'uuliyada la saaray waxay mas'uuliyadi ka saardan tahay in ay sugaan ku dhaqanka sharciga dalka u yaala. Sidoo kale qof kasta oo muwaadin ah mas'uuliyada ka saaraan in uu sharciga u hogaansamo dadka kalena ku dhiiri galiyo in ay sharciga u hogaansamaan in ay aad u weyn tahay si faah-faahsan ugu sharax.

**Sharciga oo loo hogaansami waayo Waxyeelada Muwaadiniinta ka soo gaadhaysa**

Ku dhaqanka sharciga oo la hirgalin kari waayo dhibaatooyinka badan ayaa ka dhalan karaya ama dhibaatooyin badanba bulshada soo gaadhaya.

Xuquuqaha dhaqashada hantida iyo allaabada ayaa la waayaya ama lumaya-sharafta iyo xoriyada muwaadiniinta ayaa meesha ka baxaysa ama dhaawac soo gaadhaya. Waxaa adkaanaysa in hawlaha nolol maal-meedka lagula soo baxo si nabad galyo leh loo qabsado. In si degan waxbarasho iyo nolol loo hello ayaa haba yaraate aan laga fikiri karin.

Guud ahaan waxaa burburaya nidaam wanaagsan oo kala dambayn iyo asluubi ku

dheehan tahay. Falal aad u xun-xun oo xuquuqda dhaawacaya ayaa la fulinaya, hantida iyo allaabooyinka ayaa la boobaya, gubanaya. Sarayfnta sharciga ama sharciga oo loo hogaansamo ayaa noqonaya waxaan suurtoobi karayn. Dalka dariskeena ah ee soomaaliya xaalada uu ku sugan yahay adiga oo tusaale ahaan ugu soo qaadaya in aad fahamsiiso ayaa lagama maar-maan ah. Illaalinta iyo ku dhaqanka sharcigu waa mas'uuliyad cid kasta oo muwaadin ah saaran. Ardeyda waxaa laga sugaya in ay dhisaan dhaqanka u hogaansamida sharciga xaald walba ha ku sugnaadaane.Sida hadi aan la yeelin dhibaatooyinka dhici kara in aan la qiyaasi karayn u sharax ardeyda.

***Gabagabada***

- Casharka qaybtan in ay qodobada ugu waa weyn fahmeen islamarkaana aqoon ku filan ay helleen xaqiiji adiga oo su'aalo kala duwan adeegsanaya. Qodobadan soo socda in ay fahmeen xaqiiji.
    - ❖ In ay qeexi karaan macnaha Dastuur.
    - ❖ Muhiimada Dastuur Dawlada gobaoleedku leeyihiin in ay qeexi karayaan.
    - ❖ Xeer dhaqameedyada agagaarka laga adeegsado kaalinta ay ku leeyihiin sugida ku dhaqan ama illaalinta degnaanshaha iyo asluubta.
    - ❖ Sharciga oo loo hogaansami waayo loona hawlgali waayo sidii dadka kale ay ugu dhaqmi lahaayeen dhibaatooyinka muwaadiniinta soo gaadhaya si wanaagsan uga dhaadhici kadibna qodobka xiga u gudub.

## 2.2. ANSHAXA (ETHICS)(2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha Waxbarasho ee la tix-raacayo***

- Qoraalo, buug yar-yar, boodhadh, warqado daabacan oo ku saabsan ururada kala duwan ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn iyo macadyada/macadyada la dagaalanka musuq-maasuqa u qaabilsan.

**Waa maxay anshaxu?**

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca ah***

- Sawirka dhaxdiisa ficilo side ah ayaad ka aragteen?
- Idinkuse ficilada in aad ka qayb gashaan aad ku faraxsanaan lahaydeen waa kuwe?
    - ❖ Si wakhti kooban oo ay ku fiirsadaan sawirka buugooda ku yaala.
    - ❖ Fikradaha anshaxa la xidhiidh ha soo qodobeeyaan.
    - ❖ Ficilada anshaxa wanaagsan la xidhiidha ee illaaliyo hada ay sammeeyeen hadi ay jiraan sii fursad ay dadka kale ugu qeexaan.

***Hawlgal***

- "Abaalka anshaxa wanaagsan" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya laylisku guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan.

Jawaabaha ay ardeydu ku soo jeediso qodobadan soo socda waad barbardhigi karta:

1. aad noqotid qof nidaamka dugsiga u hogaansan; qof dammaanad qaada oo ardey wanaagsan ah oo aad noqotid; guud ahaana dugsiga iyo agagaarkiisana dhaqan wanaagsan in aad huwiso.
2. Si aad noqoto qof anshax wanaagsan leh mar ka hore in aad dareentid in uu naftaada, shakhsiyaadka, qoysaskaaga iyo waliba dalkaaga in uu faa'iidooyin heer sare ah u leeyahay in aad dareensiisid.

Marka aad u saxaysid anshaxa iyo falalka ama hab dhaqanka ka sokow anshaxooda in ay fiirsadaan u sheeg.

*Hawlgal*

- Iyaga oo koox-koox u wada shaqaynaya qodobada jaantuuska dhaxdiisa ku xusan fasalka dhaxdiisa ha ka wada hadlaan. Jawaabahooda sababahooda iyaga oo soo jeedinaya; weedh walba kooxo kala duwan in ay soo bandhigaan sii fursad. Jawaabaha la soo jeediyo ardeyda kale tallooyin ay ku taageerayaan ama kaga horjeedaan in ay ka bixiyaan weydi. Fikradaha ay soo jeediyaan kala wada hadalsi ugu dambayna sharaxaad ku filan u soo bandhig si ay faham buuxa uga hellaan.

## Anshaxu waa maxay?

Anshaxu (ethic) waa waax ka mid ah waxbarashada iyo aqoon qarniyo hore in badan la soo falsafadeeyey lagana soo hadlay. Anshaxu waa allad Aasaas u ah dhaqan wanaagsan sidii loo yeelan lahaa ama waxyaabaha loo baahan yahay in aynu sammayno ama aan loo baahnayn in aynu sammayno xaalad noo tilmaamaysa weeyaan. Anshaxu wuxuu tilmaamaya in qofka anshaxa wanaagsani ficiladiisa iyo ficilada dadka kale in uu yidhaahdo waa sax ama waa khalad wuxuu u leeyahay khibrad uu ku miisaamo kuna go'aamiyo.

Dadku d'a kasta oo ay gaadhsiisan yihiin falal ama hawlo kala duwan bay maalin walba fuliyaan. Sida daraadeed ardeyda laga soo bilaabo carruurnimadoodi hawlihi ay soo fulinayeen iyo waxyaabihi ay soo sheegi jireen marka in badan la bar-bar dhigo in ay yihiin kuwo faa'iido leh islamarkaana in la taageero ku habboon in ay xaqiijiyaan ayaa looga baahan yahay.Lafahooga hadi ay tahay iyo dadka kale hadi ay tahayba waxyaabaha ama ficilada waxyeelayn kara in ay ka fogaadeen xili walba si cad in ay u xaqiijiyaan in looga baahan yahay in la dareensiiyo ayaa loo baahan yahay.

**Heer dugsi ahaan Anshax Ardeyda Dugsiga laga sugayo in ay Muujiyaan**

- Dugsiga dhaxdiisa anshaxa ardeyda laga sugayo in ay yeeshaan waa maxay?
  - ❖ Waxbarashada rasmiga ah si aad u bilawdid ardeydu marka ay dugsiga dhax joogaan anshaxa looga baahan yahay in ay ku socdaan si ay u qeexaan sii fursad.
  - ❖ Fikradaha ay soo jeediyaan ha ka wada hadlaan.

*Hawlgal*

- Iyaga oo koox-koox ah su'aalaha layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan.

Dhammaan jawaabaha su'aalaha fasalka h au soo bandhigaan. Marka uu rabo in uu u saxo jawaabaha qodobadan soo socda wuu adeegsan kara.

1. Ardeydu allaabada dugsiga isticmaalkooda qodobada la xidhiidha dib u hagaajin habboon ugu same. Hadi ay si habboon u isticmaali waayaan allaabada dugsiga dhibaatooyinka soo gaadhaya in aad ardeyda fahasiisid ayaa loo baahan yahay.
2. Nidaamka dugsiga iyo fasalka oo la dhawro, nadafada oo la illaaliyo; waxbarashadooda oo ay sida ugu habboon u la socdaan, qalabka dugsiga oo ay si habboon u daryeelaan una illaaliyaan– iwm weeyaan.
3. Qodobo iyo fikrado kala duwan ayaad soo qaadan karta: Ardaydu mustaqbalka in ay yihiin dadka dalka maamulkiisa la wareegi doono, mas'uuliyiinta ama hogaamiyayaasha dalka, barayaasha,– iwm in ay yihiin in la ogaysiiyo ayaa la sugaya. Si kastaba ha ahaatee, loogama baahno oo kali ah in ay hellaan aqoon la

xidhiidha sida wax loo akhriyo iyo sida loo qoro oo kali ah ku eg laakiin waxaa laga sugaya in ay bartaan waxbarasho wadato anshax wanaagsan iyo asluub wacan in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay. Anshaxa wanaagsanina wuxuu waxtar u yeelan doona bulshada, horrumarka dalka iyo in xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeedba la daryeelo. Aqoontooda iyo hantidooda in ay kobciyaan muwaadiniin u heelan in ay noqdaan ayaa u sahlaanaysa.

4. Qoysku wuxuu Aasaas u yahay bulsho weynta. Walidiinta waxay mas'uuliyad weyni ka saaran tahay in ay carruurtooda anshax wanaagsan ku soo barbaariyaan. Sida daraadeed waalidiintu waa in ay tusaale wanaagsan u noqdaan carruurtooda. Kolba inta ay awoodoodu u saamaxdo in ay carruurtooda xannaaneeyaan, tallooyinsiiyaan ama la taliyaan iyo in ay waxbaraan ayaa looga baahan yahay. Waxaa uu xilka saaran yahay waalidiinta kolba inta awoodu u samaxdo in ay carruurtooda barsaan shaqada islamarkaana la siiyo fursad ay ku bartaan faa'iidada ay shaqadu leedahay. Waalidiintu marka ay mas'uuliyadooda ka soo baxaan in ay muwaadiniin wanaagsan soo saaraan kaalin aad u heer saraysa in ay ku leeyihiin waa in ardeyda la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

***Heer Dugsi ahaan Anshaxa laga sugayo Ardeyda***

Ardeyda ama carruurta meelaha ay Anshaxa ku bartaan ama ka hantaan midka mid ah waxaa weeye dugsiga. Dugsiyadu ma aha meelo karti iyo aqoon tayo leh lagu barto oo kali ah waxaa kale oo laga barta Anshaxa wanaagsan. Arriinta ugu muhiimsan laakiin waxaa weeyaan Anshaxu waa shayga qof kasta nolol, maal-meedkiisa uu ku kobciyo ama horrumariyo ku gaadhsiiyo. Sida daraadeedna waxaa lagama maar-maan ah in ardeyda la fahamsiiyo. Anshaxu waa arrin nolosha udub dhaxaad u ah islamarkaana la'aantood ayna horrumar samaynaynin.

Sida daraadeed arrimaha ardeydu dugsiyada ka fuliyaan sharciga iyo nidaamka dalka iyo macadyada (xaruumaha) muwaadiniin ku daryeesha in ay noqdaan in loo layliyo ayaa loo baahan yahay. Dugsiga wqaxaa looga baahan yahay in uu noqdo ardeygu ka hello aqoon iyo Anshax wanaagsan oo u horseeda nolol sharaf iyo wanaag huwan iyo muwaadin Dalka, dadka horrumar iyo barwaaqo u horseeda–iwm adiga oo tusaale ahaan u soo qaadanaya sharaxaad uga bixi.

***Gabagabada***

- *Adiga oo adeegsanaya su'aal iyo jawaab waa in aad hubisid in ardeydu fahamtay qodobada hoos ku xusan ee Aasaasiga ah*:
  - ❖ Macnaha anshaxa (sumcada) in sidii looga baahna ay u fahmeen.
  - ❖ Dugsiga marka ay joogaan anshaxa ama sumcada laga sugayo in ay yeeshaan in ay fahmeen islamarkaana ay faah-faahin karayaan in la hubiyo ayaa loo baahan yahay.

## 2.3. XADDAYNTA AWOODA MAS'UULIYIINTA DAWLADA (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha Waxbarashada laga tix-raacayo***

- Dastuurka Dawlada (gaar ahaan Dastuurka Dawlada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya)
- Sharciyada dugsiga.
- Sharciyada/Xadka awoodu waa maxay?

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Xaafadaha ama degmooyinka xubin laga soo doortay oo lagu eedaynayo ama lagu haysto in uu adeegsady awoodi sharcigu u ogoolaaday mid ka saraysa in uu jiro ma maqasheen ama ma taqaanin?

- Falal noocan oo kale ah qofka ka qayb qaatay ama fuliyey tallaabo noocee ah ayaa ku habboon in laga qaado ayaad leedihiin?
    - ❖ Su'aalahan hordhaca ah waxyaabaha la xidhiidha ee ay khibrada u leeyihiin, ama waxaa ay ka maqleen hadi ay jiraan ku dhiiri gali in ay qeexaan.
    - ❖ Goobaha ciyaaraha, dugsiga, fasalka dhaxdiisa qof garsoore ahaan loo doortay lana saaray mas'uuliyad uu sharciga ku illaaliyo si uu mas'uuliyadiisa ama awoodiisa mas'uulnimo u isticmaalo cid uu tallaabo ka qaaday ama iyaga oo khalad sammeeyey oo uuna tallabo ka qaadin hadi ay jirto weydi inay qeexaan kadibna wada hadalka muhiimka ah u gudub.

*Hawlgal*

- Si ay waalidiintooda ugala soo sheekaystaan layliskan guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Jawaabaha ay ka bixiyaan ha ka wada hadlaan. Marka aad u saxaysidna waxaad adeegsan karta qodobadan soo socda:

1. Dadka awoodaha mas'uuliyadeed la siiyey ujeedada loo siiyey ma aha iyaga oo awoodooda isticmaalaya in ay muwaadiniinta kale ku xadgudbaan dalkana waxyeelo gaadhsiiyaan laakiin waxaa weeyaan iyaga oo sharciga iyo nidaamka dalka u yaala ku socda in shaqada loo xil-saaray ay sida ugu habboon uga soo baxaan in looga baahan yahay ardeyda in la ogsiiyo weeyaan.
2. Dhibaatooyin kala duwan ee ay dhici karaan tusaalooyin ahaan in loogu soo bandhigo. Tusaale qodobka saraynta sharciga ayaa lumaya. Mas'uuliyiinta haysata ama fadhida boosaska xilalka awoodeed ee ay hayaan in ay waxaa ay rabayaan u suurtoobaysa-waxaa u furmaysa wado ama fursad ay hantida iyo qalabka bulshada iyo dawlada ku musuq-maasuqaan ama ku tagri fallaan. Maadaama falalka caddaalad-darada ah baahayaan nabadgalyada bulshada iyo amniga in ay dhib ama halis galiyaan ama ay faraha ka baxaan ayey u suurta galinaysa.

**Macnaha Xadka Awoodu waa maxay?**

Astaamaha ama dabeecadaha Nidaamka Diimuqraadiga ah ugaarka ah waxaa ka mid ah mas'uuliyiinta leh awoodaha xileed iyo shaqalaha dawlada awoodaha mas'uuliyadeed ee la saaray waxaa lagu miisaamay ama lagu cabiray sharciga ama waa mid sharciga lagu xaddeeyey kadibna la siiyey. Tallaabadanina waxay tilmaamaysa xadka awooda waaxda la siiyey xaddaynta ay u baahan tahay ee u dhiganta awooda xilka ay hayso waxaa loogu talagalay hantida iyo qalabka bulshada in ayna ku takri falin; bulshada in ayna ku xadgudbin iyo waliba awooda la siiyey in ay ku shaqeeyaan iyo shaqada ay tahay in la qabto in ay si cad u gartaan weeyaan. Xaaladan oo kale hadi xata dambi la galena ama la fuliyana cida lagala xiisabtamayo cida ay tahay sidii loo garan lahaa in la garto ayaa fududaanaysa.

***Awooda Mas'uuliyiinta Bulshadu soo doortay oo la xaddeyo Muhiimada ay leedahay***

- Xubnaha bulshadu soo doortay waayo ama waa kuwe?
    - ❖ Cid ay yaqaanin oo bulshadu soo doortay oo ka tirsan xubnaha qoyskooda ama qoysaska jaarka ay la yihiin ka tirsan hadi uu jiro tusaale ahaan in ay u soo qaataan ku dhiiri galin.
    - ❖ Tallooyinka ay soo jeediyaan saxitaan ku habboon inta aad siiso xubnaha bulshadu soo doortay macna ahaan waxaa uu yahay tilmaan inta aad siisid hawsha xigta u gudub.

*Hawl galka*

- "Mudane Qabdiid" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo koox-koox ah ha akhriyaan kadibna fasalka dhaxdiisa

ha kaga shaqeeyaan layliska.Jawaabaha ay ku soo gudbiyaan waxyaabaha soo socda bar-bardhig.

*Su'aasha 1-3^aad^* iyaga oo sheekada lagu salaynayo in loo saxo waxyaabaha ay khaldeen. Iyada oo loo fiirinayo xaddaynta awooda Qabdiid awoodiisa uu ma aqoono leeyahay in ayna macquul ahayn in la ogaysiiyo.

*Su'aasha 4^aad^* hab tijaabooyinka carruurtu sammaysay loo qeexi adiga oo u fudaydinaya in ay u soo jeediyaan ardeyda sida wanaagsan u soo tijaabisay ardeyda fasalka ha u soo jeediyaan.

***Hawlgal***

- Layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan sharaxaada hoosta ku xusan ayaad adeegsan karta marka aad u saxaysid.

**Muhiimada ay leedahay in Awooda Mas'uuliyiinta Bulshadu soo dooratay la xaddeeyo**

Xubnaha mas'uuliyiinta bulshadu dooratay waxaa weeyaan wakiilada ay bulshadu u dooratay in ay arrimaheeda kala duwan u fuliyaan ee dawlada ka tirsan. Sida daraadeed tusaale ahaan waxaa jira mas'uuliyiin matalaya ama bulshadu u dooratay una wakiilataay in ay ka mid yihiin amniga, dhaqan galinta baranaamijyada horrumarinta,– iwm u qaabilsan.

Xaafadaha, degmada, dawlada gobaleedka iyo fadaraalka ee golayaasha kala bulshada wakiil uga ah–iwm ayaa la yidhaahda wakiilada bulshadu soo dooratay. Waakiilada bulshadu soo doorato awooda la siiyo maadaama ay tahay mid laga rabo in ay damaanadeeda qaadaan sidii ay uga soo bixi lahaayeen islamarkaana lagu aminay si ayna si khaldan ama habboonayn ugu adeegsanin waxaa loo sammaynaya xad. Xaddayntanina waxay suurta galinaysa in ayna dadka kale gaf ama falal caddaalad daro u gaysanin. Muwaadiniinta xuquuqdooda in aan lagu xadgudbin ayey gacan ka gaysanaysa.

***Gabagabada***

- Adiga oo su'aalo weydiinaya aqoonti loogu talagalay in ay casharka ka bartaan in ay fahmeen iyo in kale xaqiiji ama in aad xaqijisidba loo baahan yahay. Qodobadan soo socda ayaa ka caawin kara in aad saxitaan ku habboon iyo fikrado wanaagsan ka siiso ardeyda.
  - ❖ Macnaha xaddaynta awooda waxaa uu yahay in ay fahmeen.
  - ❖ In ay qeexi karaan muhiimada uu leeyahay xaddaynta lagu sammeeyey awooda wakiilada ay bulshadu soo doortay.

## 2.4. SIRTA (1-XIISAD)

***Qalabka Waxbarashada la tix-raacayo***

- 12 qodob oo la xidhiidha ama ku saabsan ama ka mid ah qodobada Anshaxa shaqaalaha lagu qiimeeyo.
- Waraysiyo

### 2.4.1. Sirta Saaxiibada

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Sirta saaxiibada marka aad maqashiin maxaad dareentiin?
- Arrin aad saaxiibadiin kala sheekaysteen oo aad tidhaahdeen waa sir ma taqaaniin?
- Dadka saaxiibada ah waxyaabaha ay sir ahaan u haysan karaan maxay noqon karaan?
- Su'aalahan hordhaca ah si kooban macnaha sirta dadka saaxiibada ah sirtooda iyaga oo ku aadinaya ha ka wada hadlaan.
- Sharaxaad aad faah-faahinaysid ee ku saabsan sirta saaxiibada inta aad si kooban ugu soo jeedisid waxqabadyada xiga u gudub.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan iyaga oo qoyskooda kala soo sheekaysanaya kooxo dhawr ah sii fursad mid walba hal su'aal ah uu kaga jawaabo. Arrinta ugu weyn waxaa weeyaan ardeydu

xaalad kasta oo jirta in ay ardeydu yeelato islamarkaana kobciyaan ama xoojiyaan dhaqanka illaalinta sirta saaxiibadooda. Sirta oo la illaalin waayo dhibaatooyinka ka dhalanaya in ay dareemaan islamarkaana ay lagama maar-maan ah in laga digtoonaado. Hasa yeeshee laakiin falalka xun-xun in la yidhaahdo waa sir lana qariyo arrin habboon in ayna ahayn in la dareensiiyo ayaa loo baahan yahay. Arrintan in sharaxaada soo socota in laga bixiyo ayaa lagama maar-maan ah.

***Sirta Saaxiibka***

Sirta oo la illaaliyo waa astaanta ama dhaqanka wanaagsan ee muwaadinka fiican lagu garto. Xaalado kala duwan ayaa laga yaaba in aad arrimo sir ah ku ogaatid ama ku heshid. Sirta saaxiibka ayaa ah mid ka mid ah:

Sida daraadeed si kasta oo xaalada aad ku sugan tahay u adagtahay ama u dhib badan tahay saaxiibada sirahooda in aad si qayra-mas'uulnimo ah dad kale ugu khasaariso waa arrin aan loo baahnayn islamarkaana aad u fool xun. Mid ka mid ah sababaha ay lagama maar-maanka u noqotay in siraha la illaaliyo arrin sir ah oo aad bixiso waxaa ka dhalan karta dhibaatooyin adiga iyo dadka kalaba waxyeelooyin aad u daran idin soo gaadhsiin kara. Sirta qofka bixiyey waxaa lumaya aminnimada iyo sharafti uu lahaa iyo kalsoonidi loo hayey. Guud ahaan illaalinta sirta waa arrin ama dhaqan wanaagsan oo loo baahan yahay in xiliga carruurnimada lagu soo bar-baaro ay lagama maar-maan tahay.

***Gabagabada***

- Qodobada ugu muhiimsan ee casharkan in ay ardeydu fahamtay iyo in kale waa in aad xaqijisid adiga oo adeegsanaya su'aalo kala duwan. Isu-day in aad xaqiijisid qodobadan soo socda in ay fahmeen:
  - ❖ In ay garteen macnaha sirta saaxiibka.
  - ❖ Faa'iidada ay leedahay sirta saaxiibka oo aan la bixinin.
  - ❖ In ay dareemeen sirta saaxiibka oo la bixiyo dhibaatooyinka ka dhalan kara oo la xaqiijiyo.

## 2.5. MUSUQ-MAASUQA (2-XIISADODO)

***Kaabayaasha/Qalabka tix-raaca***

- Waxyaabo daabacan oo ka hadlaya komishinka u qaabilsan anshaxa iyo la dagaalanka musuq-maasuqa.
- Shaqooyinka war-baahinta ee ku saabsan dhacdooyinka musuq-maasuqa.

### 2.5.1. Macnaha Musuq-maasuqa

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Dadka aad sawirka ka arkaysiin maxay in ay sammaynayaan baad u malaynaysiin?
- Dhawr qof bulshada dhaxdeeda falal waxyeelo u gaysanaya hadi ay ka fuliyaan maxaad ku sammaynaysiin?
  - ❖ Sawirka idinka oo su'aalaha hordhaca ah ku Aadinaya dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad ay ku qeexaan fikradaha ay ka fahamsan yihiin macnaha musuq-maasuqa.
  - ❖ Tallooyinka ay soo jeediyaan in ay fikradahooda ka dhiibtaan oo la weydiiyo.
  - ❖ Ugu dambayn musuq-maasuqa sidi loola dagaalami lahaa taageerada looga baahan yahay in bulshadu bixiso sawir qeexaya in uu yahay u sheeg ardeyda.

***Hawlgal***

- "Waxaasaa Natiijo ah" sheekada cinwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo inta ay kooxo isu-qaybiyaan ha ka shaqeeyaan. Barahana waxaa laga sugaya in uu:

*Su'aasha 1aad* iyo *2aad* qodobada uu ku saxayo si toos ah qoraalka ama sheekada uga soo diyaariyo.

*Su'aasha 3aad* koox walba go'aankeeda in ay soo diyaarsadnayso waa la ogyahay. Hasa

ahaatee Anshax-sumcadeedka laga sugayo in uu hal bare yeesho mid ka mid ah waxaa weeye in uu cilmiga uu leeyahay shaqadiisa mid aminsan ama ku kalsoon waa in uu noqdo. Baruhu cilmiga shaqada baranimo ee uu ku takhasusay falal dhaawacaya ayuu sammeeyey. Iyada oo arrinta laga duulayo in uu shaqada isaga tego ayaa ku waajib ah go'aanka ah ayaa ku habboon.

*Hawlgal*

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Jawaabaha la soo jeediyo u sax adiga sheekada buuga ardeyga ku xusan ku salaynaya. Jawaabaha su'aalaha ku habboon ee ardeyda kale heleen in aad meel mariso ama adeegsato waad karta. Kadibna macnaha musuq-maasuqa faah-faahin ka sii.

**Macnaha Musuq-maasuqa**

Musuq-maasuqu waa fal u dhigma ama la siman falalka ay sammeeyaan dadka anshax-sumcadeedku ku dhiman yahay ama dadka bila anshaxa ah ay fuliyaan. Musuq-maasuqu waa faldambiyeed hantida iyo allaabada bulshada iyo Dawlada si sharciga ka baxsan shakhsiyaad ama cida kale loogu faa'iidaynayo. Ardeydu falalka noocan oo kale ah in ay fuliyaan in ay iska illaaliyaan islamarkaana is-hortaagaan muwaadiniin u heelan in ay noqdaan hada laga bilaabo isu-diyaariyaan ayaa looga baahan yahay. D'ada hada ay gaadhsiisan yihiin iyada oo loo fiirinayo waxyaabaha anshax xumada ah ee mararka qarkood lagu arko inta nuxurka rasmiga ah lala xidhiidhiyo in la fahamsiiyo ayaa la karaya.

### 2.5.2. Dad Mas'uuliyad aan qaadi karin hadi ay tahay wakiilada Bulshadu dooratay iyo Mas'uuliyiinta awooda Dawlada haya Falalka Musuq-maasuq ah ee ay fulin karaan

*Fikrada laga dhaqaaqayo*

- Falalka musuq-maasuqa ah ee ay fulin karaan mas'uuliyiinta awooda leh ee waajibaadkooda gudan kariwaayey waa maxay?
- Awodoa bulshadu na siisay waddooyin noocee ah ayaa na looga baahan yahay in aynu u isticmaalo?
  - ❖ Fikradahan baraarujinta ah kooxo xubnaha ka tirsani ay aad u kooban yihiin ha kaga wada hadlaan.
  - ❖ Firkadaha ay isu-af-gartaan ardeyda inteeda kale ha u soo bandhigaan.
  - ❖ Wada hadalka kadib fikradaha ay isu-raacaan qodobadan hoos ku xusan baruhu ha la xidhiidhiyo wixii ka khaldana ha u hagaajiyo.

*Hawlgal*

- Marka loo fiiriyo heerkooda waxaa suurta gal noqon karta in ay su'aalahani ardeyda badankood aku adkaadaan. Sida daraadeed, waxaa anaagsan in la siiyo fursad ay waalidiintooda ama qoysaskooda ka gala soo sheekaystaan kana soo shaqeeyaan. Jawaabaha ardeydu soo jeediso si aad ugu hagaajiso dareen wanaagsana aad uga siiso waxaad fiirsan karta fikradahan soo socda:

Xubnaha bulshada soo dooratay waxaa weeyaan xildhibaanada bulshadu sida tooska ah u soo doorotay islamarkaana bulshadu wakiilatay.

Xubnahanina iyaga oo matalaya aa bulshada doorotay wakiil u ah waxay fulinayaan hawlo dhawr ah. Boosaska ama xafiisyada kala duwan qaarkood iyaga oo bulshadi soo doorotay matalaya in ay fadhiistaan ama laga helo ayaa dhici karta. Xiliyada intooda badan in ay mushaar la'aan ku shaqeeyaan ayaa suurta gal noqon karta. Mararka qaarna xubnahan bulshadu soo doorotay in ay dawladu boosas kala duwan u magacawdo ayaa dhici karta. Xaalada noocan oo kala ah xubnaha dawladu soo doorotay si lama filaan ah ayey mas'uuliyiin dalwadeed oo awood sare leh ku noqon karaan.

Mas'uuliyiinta awooda dawladeed leh ama madaxa awooda dalwada leh waxaa weeyaan dadka dawladu si toos ah mas'uuliyado kala duwan ugu magacawdo. Dadkana waxaa lagu xushma ama lagu saleeya in si rasmi ah ama in mudo ah mas'uuliyado kala duwan loo magacaabo takhasusuka aqooneed ee ay u leeyihiin shaqooyinka loo magacaabayo, kartida ay u leeyihiin fulinta hawlaha loo xilsaarayo iyo kolba sida loogu amini karo arrimaha siyaasadeed iyo tayadooda. Xubnahan intooda badan ama mas'uuliyiinta badankoodu mushaar dalwadeed oo rasmi ah iyo faa'iidooyin kala duwan ba la siiya. Dadkani xiliyada ay noqdaan mas'uuliyiin awood sare leh waa marka bulshada soo doorato ku aminto in ay hawlo kala duwan wakiil uga noqdaan una doortaan. Xiliganina islawakhti isu-mid ah ayey mas'uuliyiinta awooda dawlada leh iyo wakiilada bulshadu soo dooratayba marka kali ah wada noqonayaan weeyaan macnuhu. Dad ka tirsan mas'uuliyiinta ugu awood saraysa dawlad islamarkaana bulshadu soo dooratay oo wakiil u ah oo ah shakhsiyaad qayru-masuul ah in ay musuq-maasuq sammeeyaan ayaa dhici karta.

Arrimaha Musuq-maasuqa ah ee ay fulin karaan xubnaha Bulshadu soo wakiilatay ama Mas'uuliyiinta awooda Dawladeed ee ugu saraysa leh midkay doonnaanba ha ahaadaane.

Noocyada arrimaha musuq-maasuqa ah ee mas'uuliyiinta haya xilalka shaqo ee ugu sareeya ay fulin karaan way kala duwan yihiin. Mas'uuliyiinta leh awooda xileed ee ugu saraysa iyo wakiilada bulshadu falalka musuq-maasuqa ah ee ay fulin karaan in ay lacag qaataan iyo in ay lacag gunno ah bixiyaan dhacdooyinka ka bilaamba oo kali ah ma aha musuq-maasuqa ay sammeeyaan. Waxaa kale oo ay sammeeyaan falal kale oo musuq-maasuq ah-waxaa kale oo ka mid ah hantida iyo allaabada dalwada oo si gaar ah ugu danaystaan, dhacdooyin caddaalad iyo kuwa kale oo tiro badanba ka mid ah kuwa ay fuliyaan.

***Gabagabada***

- Qodobada Aasaasiga ah ee soo socda in ay ardeydu fahamtay in aad xaqiijiso ayaa loo baahan yahay adiga oo su'aalo kala duwan adeegsanaya.
    - Macnaha musuq-maasuqa in ay fahmeen.
    - Dadka mas'uuliyadodoa gudan kari waayay ee ah wakiilada bulshada ama mas'uuliyiinta leh awoodaha dawlada ee ugu sareeya falalka musuq-maasuqa ah ee ay fulin karaan in ay qeexi karaan oo la xaqiijiyo ayaa lagama maar-maan ah.

## JAAWAABAHA GABAGABADA CUTUBKA EE BUUGA ARDAYADA

### I. Weedhaha soo socda tii run ah ku qor "Run" tii been ahna ku qor "Been"

1. Run
2. Been
3. Been
4. Run

### II. Jawaabta saxda ah u dooro

1. X
2. J
3. J
4. T

### III. Buuxi meelaha bannaan

1. Anshax suuban
2. Carruurnimo
3. Sharciga , nidaamka

### IV. Ka jawaab su'aalahan

- Jawaabaha su'aalahan oo dhan buuga ardeyga iyo ka barahaba sheekooyinka ama qoraalada ku xusan iyada oo lagu salaynayo waa in la saxo.

# CUTUBKA 3: SINAANTA

## (9-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubkan

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Darreemaan xuquuqaha sinnaanta ee qoomiyadaha iyo bulshooyinka Itoobiya eek u aadan si siman uga faa'iidaysiga.
- Gartaan kaalinta ama doorka ay ku leeyihiin ka qayb qaadashada dumarka ee la xidhiidha barnaamijyada horrumarinta iyo dhisida dalka.
- Fahmaan xuquuqaha ay tahay in hellaan dadka laxaadka l'a ee dugsiyada ku sugan.

| Tirada | Xiisada casharka | Ujeedooyinka faah-faahsan | Illaha xogta xoojinta |
|---|---|---|---|
| 1. | Xuquuqaha sinnaanta | • Liis gareeyaan qoomiyadaha iyo bulshooyinka sinnaantooda iyo xuquuqaha si siman uga faa'iidaysiga.<br>• Sharaxaan faa'iidada ay leedahay ama lagu helo sinnaanta iyo xuquuqaha si siman uga wada faa'iidaysiga oo la dhawro.<br>• Ixtiraamaan xuquuqaha sinnaanta iyo si siman uga wada faa'iidaysiga | • Dastuurada J.D.F Itoobiya iyo dawlad deegaanada.<br>• Boostaro, tashiiro-sharaxaya sinnaanta. |
| 2. | Caddaymaha sinnaanta | • Liis gareeyaan arrimaha ama falalka algama–maar-maanka ka dhigay in dhaqanada qoomiyadaha iyo bulshooyinka si siman loogu daryeelo ama loogu ixtiraamo. | • Dastuurada J.D.F Itoobiya iyo Dawlada deegaanada.<br>• Boostaro iyo taswiiro qeexaya sinnaanta. |
| 3. | Sinnaanta caynta | • Qeexaan faa'iidada ay uleedahay horrumarinta iyo dhismaha dalka dumarka oo si la siman raga uga qayb gala.<br>• Ixtiraamaan sinnaanta ardayda gabdhaha ah ee dugsiga wax ka barta | • Dastuurada J.D.F Itoobiya iyo Dawlada gobaleedyada.<br>• Boostaro iyo taswiiro qeexaya sinnaanta. |
| 4. | Xuquuqaha ay xaqa u leeyihiin in loo tix-galiyo dadka la xaadka l'a. | • Liis gareeyaan xuquuqaha lagama-maar-maanka u ah in ay hellaan dadka la xaadka la'le.<br>• Tix-galiyaan xuquuqaha dadka laxaadka l'a.<br>• Siiyaan taageerooyinka lagama-maar-maanka u ah dadka laxaadka l'a | • Dastuurada J.D.F Itoobiya iyo Dawlada gobaleedyada.<br>• Boostaro iyo taswiiro qeexaya sinnaanta |
| 5. | Muhiimada ay leedahay sinnaanta Diimaha oo la daryeelo. | • Ixtiraamaan sinnaanta DImaha. | • J.D.F Itoobiya Dastuurkeeda iyo Dastuurada Dawlada gobaleedyada.<br>• Boostaro iyo taswiiro qeexaya sinnaanta |

## 3.1. XUQUUQAHA SINNAANTA (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha Xogaha Waxbarasho laga tix-raacayo***

- Dastuurka Dawlada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya qodobka saddexaad iyo Dastuurka Dawlad gobaleedyada.
- Buug yar-yar oo dhawr bog ka kooban, boostaro, sawiiro.

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Xuquuqaha sinnaanta ee degaandina laga dhaqanayo sharaxa idinka oo tusaalooyin adeegsanaya.
    - ❖ Deegaanadiina, dugsiga dhaxdiisa, meelaha aad ku nooshihiin xuquuqaha sinnaanta ee laga dhaqan galiyo tusaalooyin muujinaya ha qeexaan.
    - ❖ Waxyaabaha ay soo jeediyeen hadi ay yihiin waxyabaha laga wada hadli karo si fursad ay kaga wada hadlaan.
    - ❖ Adiga oo ku salaynaya fikradaha ardeydu soo jeedisay casharka ama qaybta casharka ugu muhiimsan u gudub.

***Hawlgal***

- Layliska kooxo 2-3 ardey ka kooban fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Baruhu hadi uu is-yidhaahdo waa muhiim fikradahan soo socda ayuu ku bari kara ardeyda:

*Su'aasha 1*$^{aad}$*-2*$^{aad}$ arrimaha deegaan ahaaneed ee sinnaanta lagu xaqijin karo tusaale sida:

Xaafada, xarumaha caafimaadka, dugsiga, xarumaha ama macadyada muwaadiniinta/ luqada, caynta, qaybinta hantida, xoriyada, xarrumaha bulshada rayadka ah qaybinta caddaald ku salaysan–iwm iyada oo loo fiirinaya si siman uga wada faa'iideysiga xaalad dhab ah ama rasmi ah inaad ku fahamsiiso ku dadaal.

*Su'aasha 3aad* Arrimaha waxyaabaha la xidhiidha Dastuurka dawlada cutubka saddexaad qodobka 25-39aad sharaxaadaha ugu waa weyn ee ku jira fikradaha Aasaasiga ah si loogu hagaajiyo waa la fiirsan kara (Dastuurka dawlada xiligan aynu ku jirno dugsiyada dalkeena intooda badan waxaa la filaya in laga helayo).

**Xuquuqaha Sinnaanta**

Iyada oo lala xidhiidhinaya faraqyada u dhexeeya Diimaha, luqadaha, nolol-maal-meedka, caynta –iwm xuquuqaha sinnaanta waa la tusin kaara fasalka dhaxdiisa faraqyada ardeyda dhaxdooda lagu arko ama ka muuqda inta la tuso nuxurka sinnaanta xaalad dhab ah ama tusaalooyin dhab ah in lagu fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

Aasaas ahaan sabaha ugu waa weyn ee lagama maar-maanka ha dhigay nidaamka Diimuqraadiyadeed iyo Dastuurka diimuqraadiga ah waxaa ka mid ah qodobka tilmaamaya ama qeexaya in sharciyada xuquuqaha sinnaanta lagu sugo ama lagu daryeelo. Iyada oo arrintan lagu salaynayo xuquuqaha sinnaanta ee dalkeena tallaabooyinka lagu xaqiijiyo waa la liis garayn kara.

**Xuquuqaha Sinnaanta iyo si siman uga wada Faa'iidaysiga Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Bulshooyinka**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca ah***

- Falal ama arrimo muujinaya sinnaanta ka ka wada faa'iidaysiga muwaadiniinta ee deegaanadiina tilmaama?
    - ❖ Aqoonti ay horay u lahaayeen iyaga oo ku salaynaya ama ka dhaqaaqaya qofba mar tallooyinkooda ha usoo jeediyaan.
    - ❖ Su'aasha waxay ku kala duwanaan karta kolba xaalada rasmiga ah ee goobta ardeydu ka soo kala jeedo ama laga hadlayo.
    - ❖ Tallooyinka ay ku soo jeediyaan qaab ama si aad casharka u bilawdid u jihe ama casharka aad bilaabaysid in aad la xidhiidhiso ayaa loo baahan yahay.

*Hawlgal*

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan iyaga oo waalidiintooda kala soo sheekaysanaya. Bare! fikradahan soo socda ayaad su'aalaha u fiirin karta marka aad hagaajinaysiid:

1. Xarrumaha bulshada; barnaamijyada horrumarineed ee Aasaasiga ah; siinta iyo baahan tamarta oo la tuso. Xuquuqda la xidhiidha in umad ama bulsho walba iskeed isu-maamusho oo la illaaliyo ama la tix-galiyo; cid walba in ay heeshay ama awood ama xoriyad ay diinteeda iyo dhaqankeeda ku dhaqmi karto–iwm in loo qeexo ayaa loo baahan yahay.
2. Jaantuus inta lagu soo diyaariyo ama lagu soo jaan gooyo jawaabaha ay ku siiyeen in loo saxo iyada oo loo fiirinayo kolba xaaladaha dhabta ah ee goobahooda ka jira. Adeegyo aan buuxin ama dhammaystirayn hadi ay jiraan in la buuxiyo ama la dhammaystiro islamarkaana loogu saxo ardeyda si ama waddooyin ay ku fahmi karaan ayaa muhiim ah. Marka aad ku hagaajinaysidna waa in aad u fahamsiiyo ama u dareensiisid mas'uuliyadaha ardey kasta mustaqbalka in uu qaado laga sugayao.

**Sinnaanta Qoomiyadaha Shucuubta iyo Bulshooyinka iyo Xuquuqaha si siman uga wada faa'iidaysiga**

Sinnaanta marka la leeyahay haba yaraate ma tilmaamayso xaalad iyo arrimo kasta in laga sinnaado. Hasa ahaatee sinnaantu waa arrin ku socota farsamooyin lagu miisaamayo laguna salaynayo xuquuqaha iyo faa'iidooyinka muhiimka ah ama aasaasiga ah in lagu illaaliyo. Xuquuqaha aasaasiga ah ee sinnaanta muwaadiniinta sida: Caynta, diimaha, luqada–iwm arrimaha la xidhidha ayey sinnaantu koobaysa. Sida iyada oo ay tahay arrimaha ku saabsan xuquuqda si siman uga faa'iidaysiga hadi ay yihin marka loo fiirinaya heerka uu gaadhsiisan yahay horrumarkeenu iyo badida dhibaatooyinka barbar socda mudo koobanba dhammaantood ama goboaha/deegaanada oo dhan looga dhaqan galiya lama odhan karo. Gaar ahaan goobaha qaarkoodururada dawlada ama xurumaha dawliga ee ah ee adeegyada bulshada bixiya (dugsiga; caafimaadka; barnaamijyada horrumarinta ee aasaasiga ah–iwm) arrimaha caddaalada iyo amniga shaqo badan in ay ka qabtaan ayey uga baahan tahay.

Hase-yeeshe xiligan aynu joogno qoomiyadaha iyo bulshooyinka si loo daryeelo/illaaliyo xuquuqahooda si siman uga faa'iidaysiga dadaalo dhab ah oo laga fuliyey ayaa la tilmaami kara. Tusaale: Ciidaha ama xusaska Diimaha iyo waxyaabaha la aminsan yahay in siman ama aan kala duwanayn loo qdariyo iyo tallaabooyinka la qaaday si loo xaqiijiyo xuquuqaha sinnaanta ee dumarka shaqooyinka la xidhiidha ee la wado, daddaalada loogu jiro in wiilasha iyo gabdhaha carruurta ah xaqa y u leeyihiin in ay waxbarasho isu-mid ah hellaan lagu sugayo, bulsho walba xaqa ay u leedahay in ay Afkooda hooyo wax ku bartaan islamarkaana isticmaalaan; luqadaha qoomiyadaha iyo bulshooyinka kala duwan ee Raadhiyoonka iyo tilifishinka laga soo siidaayo, barnaamijyada horrumarinta iyo xarrumaha bulshada u adeega ee kililada laga dhisayo iyada oo kolba xaalada ama baahida dhabta ah ee deegaanada ka jira lagu salaynayo daddaalada loogu jiro si loo sugo xuquuqaha sinnaanta sidii looga wada faa'iidaysan lahaa ayey ka mid yihiin.

**Bulshooyinka Goobo kali ah kuwada nool Xarrumaha ay si siman ugaga wada Faa'iidaystaan**

*Hordhaca*

*Su'aalaha*

- Bulshooyinka agagaaradooda ku nool xarumaha horrumarinta ee ay isticmaalaan liis gareeya.
- Xarrumahani hadi ayna jirin dhibaatooyin aad is-leedihiin way imaan karaan sheega.

Fikradahooda si tara-tara ah ardeydu ha u qeexaan. Fikradaha ay soo jeediyaan si aad ugu

hagaajiso qodobadan soo socda waad adeegsan karta:

Xaruumaha horrumarinta ee bulshada kuwa layidhaahdo xarrumaha sida guud bulshada ugu adeega sida kuwa bulsho, caddaalada iyo kuwa maamul ahaaneed ayey ka kooban yihiin. Maxkamadaha iyo xarumaha boolisku hadi ayna jirin dhibaatooyin noocee ah ayaa dhici kara? Faa'iidooyinka xarumaha xaafadaha laga maamulo, caafimaadka iyo dugsigu leeyihiin adiga oo dareensiinaya waxqabadyada xiga in aad u gudubto waad karta.

*Hawlgal*

- "Dawlad Deegaaneedka Soomalida" sheekada ciwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo shaqo guri ahaan ugu dir. Jawaabaha ardeydu soo jeediyo si aad ugu hagaajiso qodobadan soo socda waad adeegsan karta:

1. Sheekada adiga oo ku salaynaya xarrumaha la tilmaamay inta aad ka soo saarto waad tusi karta.
2. Midba midka kale in la is-ixtiraamo xuquuqda dadka kalena aan lagu xad-gudbin, siyaabaha ama arrimaha macadyadu u kala qaabilsan yihiin in la fahmo sharciga iyo nidaamka ama anshaxa oo la garto lana ixtiraamo; caddaalad darada oo lala dagaalamo–iwm weeyaan.
3. Si siman uga wada faa'iidaysiga dhibaato hadi ay ka muuqato farsamooyin lagu toosiyo/hagaajiyo in la dajiyo ayaa loo baahan yahay. Tusaale:
   - Xarumaha jira hadi ayna ku filnayn iyada oo bulshadu ka qayb qaadanayso in xarumo dheeri ah la dhiso.
   - Aqoon yahano cilmi u leh fulinta hawlaha xarumaha bulshada u adeega ay qabtaan dhibaatada sida loo fudaydin karo ama wax looga qaban karo in la tuso.
   - Falalka anshax-xumada ah caddaalad-darada: Sida qabyaalada iyo lacag la adeegsado–iwm hadi ay jiraan waaxyaaha dawlada ee ay khusayso in la ogaysiiyo si wax looga qabtana tallooyin in aad ka siiso.
4. Waaxyaha maamulka ee degmada ama goobaha sida xarumaha xaafadaha laga maamulo, degmada, gobalka xarumaha caddaalad ee laga helo, maamulka, xarumaha caynta (gender institution) u qaabilsan–iwm in la tilmaamo kaalinta ay ka qaataan dadajinta barnaamijyada horrumarintu in ay aad u sarayso in ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay.

**Bulshooyinka goob kali ah ku wada nool Xarrumaha si siman ay u wada isticmaalaan**

Xarumahah lacagta ama hantida Dawlada iyo bulshada lagu Aasaasay looguna talagalay in ay adeegyo kala duwan bixiyaan waa in ay noqdaan xarumo xaqiijiya xuquuqaha sinnaanta ee bulshooyinka. Xarrumaha noocan ah baddankooda waxaa kamid ah arrimaha bulshada, barnaamijyada horrumarinta, amniga iyo arrimaha caddaalada xafiisyada fuliya ama dhaqan galiya ayey tilmaamayaan. Xarumaha iyo kuwa kale ee la midka ah ama la xidhiida dawlada illaaliso ama dabagasha islamarkaana maamulka u haysa. Nidaamka diimuqraadiga ah dawlada ku dhaqanta waxay xarumahan dhammaantood ugu talagashay in ay noqdaan xarumo si aan kala soocnayn muwaadiniinta ugu adeega xuquuqahooda u xaqiijiya. Xarumahani adeegyadooda xuquuqaha si siman uga faa'iidaysiga muwaadiniinta kuwa ku xaqiijiya in ay noqdaan laga sugaya ama looga baahan yahay.

**Xuquuqaha Sinnaanta iyo si siman uga Faa'iidaysiga oo la daryeelo Faa'iidada laga hello**

*Hordhaca*

*Su'aasha*

- Xuquuqaha sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga oo la daryeelo faa'iidooyinka laga hello liis gareeya.
  - ❖ Fikradaha ay soo jeediyaan cida taageersan ama ka hor jeeda weydi.

- ❖ Adiga oo casharka la xidhiidhinaya in aad wada hadalka soo koobtidba lagaaga baahan yahay.

***Hawlgal***

- Iyaga oo ku salaynaya fahamka illaa iyo hada ay ka helleen casharka ay soo barteen fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Qodobada loo diyaariyey in saxitaanka loo adegsado adiga oo ku salaynaya waxyaabaha ay khaldeen u hagaaji sida awgeed:

1. Arrimaha sida dhabta ah loo arko ee agagaarka ka jira (dugsiga, fasalka dhaxdiisa kuwa la midka ah) in aad sheegtid hadi aad kartidna in aad tustid.
2. Sinnaanta hadi aa la daryeelin ama la sugin dhibaatooyinka dhici kara iyaga oo waxyaabihi ay horay u soo barteen loo fiirinayo oo loo hagaajiyo: Hadi aan la sugin heer dal ahaan dhibaatooyinka dhici kara in la dareensiiyo iyada oo loo qeexayo xaaladaha dalka soommaaliya iyo dalal kale oo badan ka jira ayaa lagama maar-maan ah.

**Faa'iidooyinka laga hellayo uquuqaha Sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga oo la sugo**

Xuquuqaha sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga oo daddaalada loogu jiro rabitaanka iyo xuquuqaha shakhsi ahaanneed iyo kuwa bulsho in la xaqiijiyo ama la sugo (illaaliyo) faa'iido aad u heer saraysa ayey leeyihiin. Xuquuqaha sinaanta iyo si siman uga faa'iidasiga in la sugay ama la daryeelay si loo xaqiijiyo tallaabooyinka la qaado faa'iidooyin kala duwan bay leeyihiin. Dareenka wacan ee laga rabo muwaadiniintu in ay yeeshaan ayuu kor u qaada ama uu xoojiya. Dadka maadaama uu ku dhiiri-galinayo in ay hantidooda iyo allaabadooda Dalka gashadaan waxay dar-dar galisa horrumarka dalka. Waxaa arrinta ka sii wanaagsan ama ka sii waxtar badan sinnaantu maadaama ay tahay qodob lagu muujiyo nidaamka diimuqraadiga dhismaha nidaamka diimuqraadiyadeed ayey adkaysa. Maadaama ay suurto galinayso in bulshooyin kala duwan is-jeclaadaan is-fahamsiyo isu-tannaasulna kuwada noolaadaan waxay gacan ka gaysanaysa in la abbuuro mushtamac nabad galyo iyo deganaansho qoto dheer ama dhab ah ku nool. Horrumarinta Dalkana way dadajinaysa, ka qaybgalka bulshooyinka, dareenkooda lahaansho, is-xilqaanimadooda ayey xoojinaysa taas oo iyadna horrumarinta iyo barwaqaynta Dalka ayey dar-dar galinaysa. Taariikhda, dhaqanka in la garto lana illaailyo ayey gacan ka gaysanaysa. Xarumaha bulshada ee Dawlada in goobaha ama deeganaada dalka oo dhan lagu baahiyo iyada oo loo fiirinayo kolba baahida bulshada deegaanka ku nool caddaadkeeda iyo arrimo kale oo badan loo fiirinayo ayey suura galisa. Hasa ahaatee, arrinta loo baahan yahay in la garto waxaa weeyaan qoomiyadaha iyo bulshooyinka Dalkeenu horrumar isu-mid ah ama siman oo ayna helaynin ama helin. Sida daradeed hada ka hor deegaanadi dib u dhacay iyo deegaanada marka kuwan loo fiiriyo xooga horrumar ah sammeeyey bulshooyinka soo koraya taageerooyinka xiliilaha ah in ay noqdaan tallaabooyin sinnaanta lagu sugayo ama lagu hagaajinayo in ay noqdaan mooyaane dhacdooyin ama arrimo lidi ku ah si siman uga faa'iidaysiga oo caddaalad daro ah in ayna ahayn in ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay.

***Gabagabada***

- Qodobada ugu waa weyn ee casharkan in ay ardeydu fahamki iyo aqoontii laga sugayey in ay ka helleen in aad xaqiijiso ayaa loo baahan yahay adiga oo su'aalo kale duwan adeegsanaya. Hadi ayjiraan waxyaabo ayna faham ama si laaxin ah ay u fahamsan yihiin casharka xiga inta aadan bilaabin kahor isu-day in aad saxdo. Si aad u ogaatidna hubi qodobadan hoos ku xusan:
- ❖ Xuquuqaha sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga qoomiyadaha iyo bulshooyinka ay leeyihiin oo la daryeelo faa'iidooyinka ay leedahay in ay fahmeen.
- ❖ Bulshada rayadka ah ee agagaaradooda ku nooli xarumaha si siman ama midaysan ay u wada isticmaalaan waddooyinka lagu garto in ay dareemeen oo la hubiyo.

- Xuquuqaha si siman uga faa'iidaysiga oo la daryeelo ama la imtixaamo faa'iidada ay leedahay in ay dareemeen.

## 3.2. WAXYAABAHA LAGU GARTO SINNAANTA (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha Xogaha Waxbarasho laga tix-raacayo***

- Deegaankiina sinnaanta waxyaabaha lagu garto saddex ka mid ah sheega ama liis gareeya.
- Sinaanshaha bulshooyinka oo la daryeelo faa'iidada ay keento ama laga helo liis gareeya.
  - Fahamki hada ka hor helleen adiga oo ka dhaaaqaya fikrado ay shakhsi-shakhsi u doorteen oo la xidhiidha hal su'aal ah oo kali ah talloyinkooda ha ka dhiibtaan.
  - Tallooyinka ay soo jeediyeen sixitaan ku habboon adiga oo ka siinaya casharka qaybtiisa ugu muhiimsan u gudub.

**Sinnaanta Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Bulshooyinka waxyaba lagu garto**

*Hordhaca*

- Qodobada lagu qeexay dastuurka si wanaagsan iyaga oo u akhriyaya waxyaabaha ay ka fahmaan ha qeexaan:
  - Iyaga oo koox-koox ah fikradahooda ha ka wada hadlaan.
  - Waxyaabaha ay ka soo saareen wada hadalka kooxba mar ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan.
  - Tallooyinka ay soo jeediyaan si aad ugu saxdid qodobadan soo socda waad adeegsan karta.
- Xuquuqdooda la xidhiidha ku hadalka luqadooda hooyo; barashada iyo qorida luqadooda xaqa ay u leeyihiin in la sugay.
- Taariikhda oo la daryeelo inla ixtiraamo qalab-dhaqameedyada lagu adeegto iyo dharka lagu labisto ee dhaqanka, farshaxanada goobaha taariikhiga ah; xafladaha farxadaha iyo murugada lagu xuso ama lagu muujiyo–iwm ayaa la sheegi karaa.

**B. Sinnaanta luqadaha**

*Su'aalaha hordhaca ah*

- Dalkeena luqad la yidhaahdo way weyn tahay ama way yartahay in ay jirto ma u malaynaysiin? sabab?
  - Fikradaha sedan soo socota ama wadadan soo socda waa loo tusi karaa.
  - Bulshooyinka luqad qudh ah in ay yeeshaan in ayna suurta gal noqon karin waa la ogyahay. Luqadu in ay tahay mid bulsho badan ama bulsho yari ku hadasho in kasta oo ay noqon karto luqaduhu in ay luqad ahaantooda ku siman yihiin in la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Dalkeena in uu leeyahay luqado tiradoodu ka badan tahay 80 islamarkaana luqadaha dhammantood bulshooyinka ku hadla waxaa ay isu-af-gaartaan ama isu-fahmaan in ay yihiin una adeegsadaan shaqada in ardeyda la fahamsiyo ayaa loo baahan yahay.

**T. Sinnaanta caynta**

*Su'aasha hordhaca ah:*

- Sinnaanta caynta in la ixtiraamo in ay lagama maar-maan tahay ma aminsan tihiin?
  - Fikradaha ardeydu ka bixisay su'aasha dhammaantood in ay yihiin kuwa ku saabsan ama tilmaamayaan in adamaha oo dhan rag iyo dumar iyaga oo aan loo kala qaadin ay siman yihiin in la hubiyo ayaa loo baahan yahay.
  - Ardeydu gabdhaha iyo wiilashu in ay xuquuq siman leeyihiin inta la fahamsiiyo qaybta casharka ugu muhiimsan u gudub.

*Hawlgal*

- Layliska iyaga oo qoysaskooda kala soo wada hadlaya ha ka soo shaqeeyaan. Marka

uu u saxayo jawaabaha qodobadan soo socda ayuu adeegsan kara.

1. Hada ka hor fikradi luqada laga bixiyey in la fiiriyo ayaa habboon. ku hadalka luqada oo la barto, qorida iyo ku hadalka ama in lagu hadlo, way ku farxayaan, arrimaha bulshada faa'iido u ahna way ku fulinayaan.
2. Dumarka oo ah badh ama lab meelood marka bulshada dalka loo kala qaybiyo meel ka mid ah barnaamijyada horrumarinta iyo diimuqraadiyada dhismaheeda hadi aan laga qayb galinin dhibaatooyin ama waxyeelo aad u daran ayey keenaysa. Saboolnimada iyo dib u dhacnimada waxaa Dalka laga saari karaa oo kali ah maka waaxyaha xafiisyada dawlada oo dhan si fir-fircoon dumarka looga qayb galiyo. Gacan kali ah in lagu shaqeeyo islamarkaana horrumar waara la gaadho lama awoodi karayo. Guud ahaan barnaamijyada horrumarinta waxaa dar-dar la galin kara muwaadiniinta dhammaantood gabadh, wiil iyada oo aan look ala qaybinin marka si siman u wada shaqeeyaan, u wada isticmaalaan, u wada go'aamiyaan islamarkaana ay waxtar u wada yeeshaan in ardeyda loo qeexo a yaa muhiim ah.

**Sinnaanta Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Bulshooyinka waxaa lagu garto**

Aasaas ahaan arrinta xuquuqaha sinnaantu maadaama ay tahay qodob ka mid ah waxyaabaha nidaamka diimuqraadiga ah lagu garto nuxurkeeda waxaa la xidhiidhin karaa dhismaha diimuqraadiyada. Xuquuqaha sinnaanta ee qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshooyinka in la daryeelay ama la sugay waxyabaha lagu garto waxaa ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- Qof walba in uu ku socon karo diintiisa iyo waxyaabaha uu aminsan yahay, bulsho walba in ay iskeed isu-maamusho; dhaqanka iyo hiddaheeda in ay kobciso, xarumaha dawlada iyo kuwa bulshaba in si siman loogu adeego, golayaasha xildhibaanada heer fadaraal iyo kuwa heer deegaan ee bulshadu wakiilatay in ay xubno bulshada deegaanka matalaya lagu yeesho, barnaamij kasta oo horrumarineed iyo mid bulsho ahaaneedba dhaq-dhaqaaqyada laga sammaynayo in si siman looga qayb galo faa'iido habboona la helo–iwm ayaa la tilmaami kara.

**Dumarka oo si siman uga qayb gala Barnaamijyada Horrumarinta iyo kobcinta dalka**

***Su'aasha laga dhaqaaqayo***

Dumarka oo waaxyaha shaqo oo dhan si la siman raga uga qayb qaata barnaamijyada horrumarinta iyo kobcinta Dalka faa'iidada lagu hello qeexa?

- ❖ Dhawr ka tirsan ardeyda sii fursad ay tallooyinkooda kaga bixiyaan.
- ❖ Sido oo kale, hooyoyinkood, gabdhaha walaalahood ah; gabadha hawl karnimo leh oo agagaarada laga yaqaano heerka ay gaadheen iyo horrumarinta Dalka doorka ay ku leeyihiin in ay xasuustaan ha isu-dayaan hana tilmaamaan.

Tallooyinka ku siiyaan wada hadal kooban inta aad kala yeelato hawsha ugu muhiimsan ugudub. Tallooyinka ay ku siiyeen hawlgalka 5aad su'aasha 2aad fikradaha la xidhiidha ama ku saabsan ka fiirso. Waxaa inta dheer nolosha qoyska oo kor loo qaado iyo horrumarinta Dalka oo la kobciyo, barayaasha dumarka ah iyo kuwa kale oo lagu yaqaano ka qayb galka hawlaha mutadawacnimo doorka ay ka qaateen xog dhab ah adiga oo adeeganaya u sharaxa.

***Hawlgal***

- "Xaalada Waxbarashada Ee Dumarka Deegaanka Soomaliyeed" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya

layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Si aad ugu saxdidna fikradahan soo socda adeegso:

1. Sheekada iyada oo lagu salaynayo dumarkac shaqadi ay qabatay oo la xasuusiyo.
2. Dumarka sida raga oo kale maadaama ay dad adama ah yihiin waa in xuquuqahooda loot ix-galiyo. Dumarka ad-adag ee xubnaha qoyska ka tirsan, gabdhaha ardeyda ah ee tusaale wanaagsan u noqon karta dugsiga, qoysaska jaarka ah–iwm ayaa la tilmaami kara. Baruhuna isaga oo arrinta ka duulaya khibrada uu u leeyahay ha u soo bandhigo ardeyda.
3. Fikradaha hawlgalka 5aad iyo kuwa ka sareeya ama ka horreeya su'aasha hordhaca ah ee casharkan fikradaha lagaga hadlay in la fiirsado ayaa loo baahan yahay:

***Hawlgal (jaantuus)***

- Wada hadal is-barbar socda fasalka dhaxdiisa in ha kaga shaqeeyaan. Qodobadan soo socda sixitaan waad u adeegsan karta:

1. Adiga oo jaantuuska ku salaynaya qodobo aad ugu hagaajiso soo diyaarso.
2. Hawlo kala duwan marka aad fulisid dhibaatooyinka waad fudaydin karta. Tusaale: ka qayb galka bulshada oo aad kor u qaadid, Dareenka bulshada oo aad xoojisid, barnaamijyada horrumarinta ee aasaasiga ah iyo xarumaha bulshada dhismahooda oo la ballaadhiyo.
3. Xaaladaha agagaaradooda adiga oo ka dhaqaaqaya gabdhaha ardeyda ah in badan in waxbarashadooda ay ka qayb gallaan iyo iyada oo waxyaabahan lala xidhiidhinayo dhibaatooyinka agagaaradooda ka jira si loo fudaydiyo noocyada shaqooyinka loo baahan yahay in la qabto in la ogaysiiyo ayaa lagama maar-maan ah.

**Dumarka oo si raga siman uga qayb gala Horrumarinta iyo kobcinta Dalka waxtarka ay u leeyihiin**

Ardaydu sinnaanta caynta fahamka ay ka haystaan si loo sii xoojiyo dugsiyadu. Dugsi ahaan tallaabooyin ka lagu sugayo ama daryeelayo xuquuqaha ardeyda gabdhaha ah bulshada dugsiga dhammaanteed ayey korka ka saaran tahay. Ka qayb galka dumarka dalka, bulshada oo dhan in nolosheeda kor loo qaado kaalin aad u saraysa in ay tahay waa in ardeyda la ogaysiiyo. Dhanka laga soo bilaabo carrunimadooda ardeyda gabadha ah xuquuq la mid ah ta raga in ay leeyihiin si cad in ay u soo dhisaan shaqooyinka u suura galinaya in ay ka soo dhisaan shaqooyinka u suura galinaya in ay ka soo shaqeeyaan ayaa lagama-maar-maan ah. Iyada oo ay sidaa tahay ujeedada waxbarashada iyada oo loo fiirinayo ama lagu salaynayo si ay ardeydu u aminto cayn (wiil iyo gabadh) ahaan in ay yihiin muwaadinin siman in aad wada hadal adag oo ay fikrado isu-waydaarsadaan u qabatid ayaa loo baahan yahay.

***Gabagabada***

- Adiga oo su'aalo kala duwan adeegsanaya in ay helleen fahamki iyo aqoonti la sugayey in ay fahmeen in aad xaqijiso ayaa lagaa raba si gaar ah u hubi in ay fahmeen qodobadan soo socda:
    - ❖ Waxyaabaha lagu garto sinnaanta qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshooyinka in ay liis garaayn karaan.
    - ❖ Arrimaha ugu waa weyn ee sinnaanta qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshooyinka iyaga oo deegaanadooda u fiirinaya in ay xaqiijiyeen ama ayna xaqiijinin (sugan ama ayna sugin) in ay miisanmi-karaan.
    - ❖ Macnaha sinnaanta cayntu waxaa ay tahay in ay qeexi-karaan.
    - ❖ Barnaamijyada horrumarinta iyo sugida nabad galyada oo dumarku ka qayb qaataan faa'iidada ay leedahay in ay qeexi karayaan iyada oo darajadooda

loo fiirinayo in la qiimeeyo lana hubiyo ayaa loo baahan yahay.

## 3.3. XUQUUQAHA AY MUDAN YIHIIN KAABAYAASHA XOGTA WAXBARASHADA LAGA TIX-RAACAYO

- Dastuurka Dawlada.
- Buugta, qoraalada ka hadlaya ururka dadka laxaadka l'ale ee Itoobiya leeyihiin.

***Hordhaca***

***Su'aasha laga dhaqaaqayo***

- "Jaantuska 3.3 hoostiisa taswiirada ku xusan waxyaabaha ay tilmaamayaan waxyaabaha ka midka ah ee ay isu-afgarteen ha qeexaan.
- Fikradaha ay soo jeediyeen dadka laxaadka l'a iyaga oo u fiirinaya dib ha eegaan.
- Laxaad la'aantu in ay siyabo kala duwan ku timmaado u tilmaan.

***Hawlgal***

- "Xaliimo iyo Xaawo" sheekada cinwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka aad u saxaysid qodobadan soo socda waad adeegsan karta:

*Su'aasha 1^aad^* iyo *2^aad^* qodobadan aad ku saxaysid sheekada in aad ka soo diyaariso isuday. Xarumaha Dawlada oo ay dugisyaduna ka mid yihiin Dadka laxaadka l'a xuquuqahooda la xidhiidha adeegyada ay xaqa u leeyihiin in la siiyo xaaladaha lagu sugayo waa I nay u diyaariyaan.

*Su'aasha 3^aad^* Dadka laxaadka l'a noocyada dhibaatooyinka ay qabaan ama haysato waxaa ay yihiin u sharax. Dhibaatooyinkooda si loo fudaydiyo hawlaha lagama maar-maanka ah ee ay tahay in dugsiyada iyo agagaarada laga fuliyo in ardeyda la ogaysiiyo ayaa muhiim ah. Ardeydu inti awoodooda ah taagerooyinka dadka laxaadka l'a ee walaalahood ah ay siin karaan iyaga oo fiirinaya (Tusaale in uu wax doorto, allaab in uu meel ka qaado goob kalana u wareejiyo oo laga caawiyo; fikradahooda ay midaarinayaan oo la fahmo ama laga taageero, maadaama ay yihiin dad dul-qaad badan in looga baahan yahay in ay ficil ahaan u dhaqan galiyaan in loo qeexo ayaa loo baahan yahay.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Qodobadan soo socda ayaad adeegsan karta marka aad u saxaysid:

1. Dastuurka Jamhuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya qodobka 41/5 fikradaha ku xusan in aad u fiirsato. Dawlada iyo bulshadu mid walba doorkiisa iyaga oo buuxinaya taageerada looga baahan yahay sidii ay ugu caawin lahaayeen in loo hawlgalo. Ardeyduna inti awoodoodu ah taageerooyin ay siin karaani in ay jiraan oo aad u tilmaamtid.
2. Dugsiyadoodu dadka laxaadka l'a waxyaabaha ay tahay in ay ku taageeraan oo loo googol xaadho. (wadada loo banneeyo, meelaha ay wax ku baranayaan, goobaha ay seexanayaan in loo diyaariyo-iwm).

**Xuquuqaha lagama-maar-maanka u ah in ay hellaan Dadka laxaadka l' a ama aan lahayn**

Laxaad la'aantu waa dhaawac ama shil dabeeci ah. Sida xannuun aa cudur (dabaysha, xannuunada isha–iwm) ama shil qofka ka soo gaadha waxyaabaha dadku sammeeyo ama dabeeci ah (gaadhiyada, biyaha, danabka, qofka oo si aad u xun u kufa ama u dhaca, daawooyin, irbada, daawo dhaqameedyada oo la isticmaalo) waxyeelooyin ay sabab u yihiin ku laxaad beela-laxaan la'aantu ma'aha dhibaatooyin qofba qofka kale ugudbiyo ama dadku kala qaado ama wax la isku abuuro.

Dadka laxaadka aan qabin maadaama ay yihiin dad muwaadiniin ah waxay xaq u leeyihiin in xuquuqahooda loo daryeelo. Dalkeena iyo dalalka caalamka hadi ay tahayba sharciyo loogu talagalay in xuquuqaha dadka laxaadka aan qabin lagu daryeelo ayaa la soo saaray islamarkaana

waxaa la abbuuray xaruumaha loo xil saaray in ay illaaliyaan xuquuqaha dadka laxaadka aan lahayn. Sida daraadeed Dal walba iyada oo xuquuqaha dadka laxaadka aan qabin mudnaan la siinayo Dastuurka Dawlada waxaa lagu qeexay sharciyo loogu talagalay in lagu sugo xuquuqaha dadka laxaadka l'a ama xubnaha jidhkooda qaar ka mid ah ay maqan yihin ama ayna shaqaynin. Dareenka ugu muhiimsan eel agama-maar-maanka ah in la yeesho fursadaha taageerooyin ku habboon lagu siin karo dadka laxaadka l'a muwaadiniinta noqon karaan. Sida daraadeed shakhsi ama xarumo midkay doonta ha ahaate taageerooyin ku habboon in la siiyo dadka laxaadka l'a ayaa loo baahan yahay.

*Gabagabada*

- Adiga oosu'aalo kala duwan adeegsanaya qodobadan aasaasiga ah ee soo socda in ay ardeydu fahamtay in aad hubisid ayaa loo baahan yahay:
  - ❖ Xuquuqaha dadka laxaadka daran leh ay mutaysteen in ay yeeshaan in ay dareemeen xaqiji.
  - ❖ Xuquuqaha dadka laxaadka l'a ay leeyihiin si loogu daryeelo taageerooyinka laga sugayo in uu dugsigu u fidiyo in ay liis garayn karaan in aad xaqiijisid.

## 3.4. MUHIIMADA AY LEEDAHAY IN LA DARYEELO AMA LA TIX-GALIYO SINNAANTA DIIMAHA (1-XIISADOOD)

***Kaabayaasha xogta Waxbarashada laga tix-raacayo***

- Dastuurka Dawlada (Dasturka J.D.F Itoobiya)

*Hordhaca*

- Sinnaanta Diimaha oo la daryeelo muhiimada ay leedahay qeexa.
  - ❖ Hada ka hor fahamki asasiga ahaa sinnaanta ku saabsana ama fikradaha sinnaanta ay ka helleen iyaga oo isticmaalaya sinnaanta Dimaha ha qeexaan.
  - ❖ Qodobada ay soo jeediyeen si aad u adkayso sharaxada hoos ku xusan waad adeegsan karta:

*Hawlgal*

- ❖ Layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan iyaga oo koox-koox ah. Dhawr kooxood natijooyinka wada hadalkooda fasalka ha u soo bandhigaan. Qodobadan soo socda waad adeegsan karta marka aad u saxaysid:

1. qeexida sinnaanta sharaxaada fikrada lagu soo gabagabeeyey fiirso.
2. Inta uu gaadhsiisan yahay ixtiraamka uu rabo in diintiisa la siiyo in le'eg diimaha dadka kalana in uu ix-tiraamo:

- Diimaha dadka kale in lala dagaalamo, la yaraysto ama la xaqiro oo laga digtoonaado.
- Diimaha oo si siman loo ixtiraamo nabadgalyada, is-jacayl–iwm in ay waxtar aad u heer sareeya ay leedahay in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

**Muhiimada ay leedahay in Sinnaanta Diimaha la ix-tiraamo**

Sinnaanshaha sida caynta iyo luqadaha oo kale sinnaanta diimuhuna muhiimad heer sare ah ayey leedahay. Dadku nololahooda ruuxi ahaanneed go'aan shakhsi in ay ku salaysnaadaan ama ku salaysan yihiin in la ixtiraamo ayaa loo baahan yahay. Arrinta Diintu go'aan shakhsi ahaaneed maadaama ay ku salaysan yihiin qof kasta oo muwaadin ah diinta uu doorto in uu raaco xaqbu u leeyahay. Iyada oo qodobkan lagu salaynayo qof walba diin kasta iyo wax kasta oo qof ama dad aminsan yahay in la af-lagaadeeyo, islamarkaana la dhaliilo ama la xaqiro waa mamnuuc. Qofba diinta dadka kale iyo waxyaabaha uu aminsan yahay ama ay aminsan yihiin isaga oo aan waxyeelo u gaysanayn una Af-lagaadaynin si xor ah diinta uu raacsan yahay wuu ugu socon karaya. Qof walba diinta uu rabo, waxaa uu aminsan yahay oo uu ku socdo islamarkaana

aminsanaado waa mid ka  mid ah waxyaabaha lagu xaqiijiyo jiritaanka xuquuqaha sinnaanta ee muwaadiniinta. Diimaha iyo waxyaabaha kala duwan ee la aminsan yahay oo si siman loo wada fiiriyo la ogolaado waa qodob ka mid ah ama hab ka mid ah hababka nidaamka diimuqraadiga ah lagu xaqiijiyo.

***Gabagabada***

- Qodobadan casharka ugu muhiimsan in ay fahmeen aqoontii loogu talagalay ay ka helleen xaqiiji adiga oo su'aalo kala duwan adeegsanaya gaar ahaan qodobadan hoos ku xusan in ay fahmeen hubi:
    - ❖ Ugu dambayn diimaha oo si siman loo ixtiraamo muhiimada ay leedahay in ay dareemeen adiga oo qiimaynaya xaqiiji.

## SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA EE BUUGA ARDAYDA

### I. Ku qor "Run" ama "Been" mid ka ay tahay.

| | |
|---|---|
| 1. Been | 2. Been |
| 3. Run | 4. Been |

### II. Isu-aadi kolba sida ay isugu habboon yihiin

| | |
|---|---|
| 1. X | 2. B |
| 3. BJ | 4. T |

### III. Su'aal walba jawaabta ku habboon u dooro

| | |
|---|---|
| 1. X | 2. T |
| 3. X | 4. T |
| 5. X | |

### IV. Buuxi meelaha bannaan

1. Bulso, Xuquuq
2. Waxbarashada kuwa ka fog; kuwa ku nool goobo ka fog badhtamaha dalka, gabdhaha goobaha cidhifka ah ku nool–iwm
3. Xuquuq.

# CUTUBKA 4: CADAALADA

## (10-Xiisadood)

### Ujeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Fahmaan arrimaha kala duwan ee caddaalad darada ah ee macnaha kala duwan laga fuliyo.
- Dareemaan muhiimada ay leeyihiin macadyada ama xarumaha bulshada rayadka ah ee deegaanadooda laga hello.
- Fahmaan farsamooyinka ama arrimaha macadyada/xarumaha bulshadu qabtaan in looga baahan yahay in ay noqdaan kuwo ku hufan caddaalad daro islamarkaana caddaalad ku dhisan ama ku shaqeeya.
- Dareemaan taariikh ahaan sida ay cashuurtu ku timiday iyo isbed-bedalka uu wakhtigu muujinayo.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka qodobada faah-faahsan | Illaha xogaha lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Illaha xogaha lagu xoojinayo | • Qiimeeyaan arrimaha caddaalad darada ah ee deegaanadooda laga fuliyo.<br>• Qeexaan macnaha falalka caddaalad darada ah waxaa ay yihiin<br>• Uhawlgalaan intidadaalkooda ah ama awoodooda ah sidi deegaanadooda loogu ballaadhin lahaa arrimaha caddalada | • Taswiiro boostaro–iwm qeexaya falalka iyo dhacdooyinka caddaalad darada ah ee laga fuliyo xafiisyada iyo ururada ama shirkadaha kala duwan. |
| 2. | Macadyada ama xarumaha arrimaha bulshada | • Qiimeeyaan falalka laga fuliyo xarumaha ama macadyada bulshada ee deegaanadooda caddaalad nimadooda | • Taswiiraha dugsiga, xarun caafimaad ama goobaha cidhiifyada magalooyinka ee wax lagu baadho. |
| 3. | Macadyada ama xarumaha arrimaha bulshada | • Qiimeeyaan falalka laga fuliyo xarumaha ama macadyada bulshada ee deegaanadooda caddaalad nimadooda<br>• Dar yeelaan ama ixtiraamaan xuquuqaha saaxiibadood<br>• Ugu adeegsan saaxiibadooda fasalka si siman iyo midnimo ku dheehan tahay. | • Taswiiro, boostaro tilmaamaya xarumaha caddaalada, xarun boolis, xarun maxkamadeed, iyo xarumaha kale ee arrimaha caddaalada la xidhiidha ka shaqeeya. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Xaaladaha lagama maar-maanka ka dhigay in ay caddaaladi jirto. | • Liis gareeyaan xaaladaha lagama maar-maanka ka dhigaya in caddaalada la ballaadhiyo. | • Sharciyada maamulka, qaynuunada anshaxa ama asluubta, bayaanada, goobaha deegaanada ee odayaashu ku shiran, kaniisadaha, masaajidada, goobaha shirarka. |
| 5. | Cashuur | • Qeexaan taariikhdi cashuurta la bilaabaymention the taxable incomes.<br>• Liis gareeyaan noocyada dakhliga cashuuraha la ururiyo laga hello.<br>• Sharaxaan waxaa muwaadiniinta laga sugayo si cashuurta loo bixiyo<br>• Sharaxaan in cashuur bixintu waajib ku tahay muwaadiniinta | • Goobaha cashuuraha lagu ururiyo, taswiirahooda, boostarada ogaysiisyada cashuurta |

## 4.1. CADDAALAD DARADA ( 2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha/Tix-raaca***

- Sawiro iyo boostaro, qoraalo, qeexaya falalka caddaalad darada ah ee xafiisyada iyo ururada ama shirkadaha kala duwan lagu daabaco.
- Arrimaha Caddaynaya falalka caddaalada darada ah ee Deegaanadiina laga fuliyo.

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca ah***

- Macnaha falalka caddaalad-darada ha waa maxay?
- Ardeydu su'aalaha hordhaca ah si ay uga shaqeeyaan oo koox-koox loo qaybiyo.
- Qodobada ay ku heshiiyaan si ay u qeexaan in dhawr kooxood fursad la siiyo.
- Natiijada ay soo bandhigaan ha ka wada hadlaan.

Tallooyinka ay ku soo jeediyaan si casharka rasmiga ah loola xidhidhin karo ugu sax ama ugu hagaaji kadibna casharka rasmiga ah eek u xiga u gudub.

Arrimaha/falalka ay soo liis gareeyeen in ay caddaalad daro yihiin iyo in ayna ahayn waxaa ay ku heshiiyeen, in ay soo bandhigaan tilmaan ta leh fikradaha lagaga wada hadlayo iyada oo laga duulayo fikrad ahaan soo socda ee loogu talagalay in lagu hagaajiyo waa in tix-galin la siiyo.

- Falal tiradoodu dhan tahay 5 mid ka mid ah oo laga yaabo in uu yahay falka 2aad waa fal caddaalad daro ah ama ma aha fikrad leh oo laga doodi karo weeyaan. In faraq ama waxyaabo lagu kala duwan yahay uu jiro waa loo baahan yahay. Waana fikrada loo baahan yahay. Sababta oo ah marka dhanka abbuurka rabbaaniga ah ee dadka laga fiiriyo in ay adag tahay ama ay tahay arrin ay adag tahay in go'aan laga gaadho in aynu ogaysiino ayaa na looga baahan yahay. Hase yeeshee, ma laga yaaba arrimaha daawada carruurtoodu in ay tahay mid hoos timmaada cilmigooda shaqo? Ama hadi ay tahayse meel si toos ah shaqadooda aan ula xidhidhin laakiin ay ka shaqeeyaan? Run ahaan iyaga oo carruurtoodu xannuunsanayso in ay dadka kale carruurahooda si habboon u daaweeyaan ma karayaan? su'aalaha ah adiga oo soo qaadanaya fikrado balaadhan oo laga wada doodi karo in la soo qaato waa la karaya. Hadi kalese waxaa adkaanaysa in wax lagu heshiis yahay la gaadho. Sida daradeed falalkaasi waa caddaalad daro iyo ma'aha iyada oo la leeyahay in lagu

soo gunnaanado dhibteeday leedahay ama in ay dhibteeda leedahay in tilmaamo laga siiyo ardeyda ayaa loo baahan yahay.

*Hawlgal*

Sheekada cinwaankeedu yahay "Nelson Mandeela"Qaybta koowaad inta ay akhriyaan guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka aad rabtid in aad u saxdidna qodobadan soo socda adeegso: ama waad adeegsan karta:

1. Jawaabaha oo sheekada aad ka soo diyaarisid.
2. Sax bu ahaa midka leh oo lagu soo gunnaanado sababta oo ah falalka caddaalad-darada ah in laga hor jeesto waa waajibaadka iyo mas'uuliyada qofka muwaadinka ha.
3. Mandeela hawlaha uu qabtay in ay yihiin hawlo geesinimo in la ogaysiiyo ardeyda. Waxyaabaha ay Mandeela ka baran karaan hadi ay tahay waxyaabaha ay arkayaan islamaraakana kala kulmi karaani falalka caddaalad darada ah oo laga horjeesto hal-adayg geesinimo iyo daacadnimo arrimo ay ku dheehan tahay in ay tahay in la ogaysiiyo weeyaan.
4. Waxaa laga yaaba in ay jiraan tallaabooyin ficil ah iyo kuwo Afka ah oo looga baahan yahay. Laakiin falal caddaalad daro ah oo ay lagama maar-maan tahay in la toosiyo ama la saxo tallaabooyin Afka ah oo lagu xalinayo lama qaadanayo waddo nabad galyo oo sidi bare-ahaaneed in lagu hagaajiyo in ay muhiim tahay in ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Wadanina in ay tahay saxitaan faa'iido waligoodba ayu aayi doonnaan leh islamarkaana kaalin muhiim ah ka qaadanaysa ballaadhinta nabad galyada islamarkaana fursad kale oo wanaagsan in ay tahay in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

*Hawlgal*

- Si ay waalidiintooda ugala soo wada hadlaan ugana soo shaqeeyaan shaqo guri ahaan ugu dir layliska si aad ugu hagaajiso su'aalaha qodobadan soo socda waad adeegsan karta.
- Si loo tir-tiro falalka caddaalad darada ah waxaa loo baahan yahay in tallaabooyin kala duwan la qaato arragtiyada iyo falalka dib u dhaca ah dhibaatooyinka ay keennaan waxaa lagaga hor tegi kara bulshada rayadka ah oo wax la baro taasoo si tallaabo-tallaabo ah loogu tir-tiri karo. Waxbarashada casriga ah oo la ballaadhiyo waxay suurto galin karta in la soo bar-baariyo ama la abbuuro jiil falalka caddaalad-darada ah neceb.

1. Dadka falalka caddaalad darada ah kuwa kaca bulshada iyo muwaadiniinta islamarkaana xadgudub u gaysta in sharciga la horkeeno tallaabooyin lagu ganaaxo laga qaado.

- Dadka falalka caddaalad darada ah kula kaca si tallaabo ku habboon looga qaado waxaa bulshada laga sugaya in ay u soo gudbiso waaxyaha u qaabilsan ka hortega iyo la dagaalanka arrimaha caddaalad-darada ah. Bulshadu waa in ayna lacag iyo allaabo kala duwan siinin dadka falalka caddaalad darada ah ku hawlan islamarkana ku garab galin caddaalad–xumada.

2. Falal caddaalad-daro ah oo deegaanadooda laga fuliyo hadi ay jiraan qaab ay wax uga faa'iidaysato ardeydu in ay u soo bandhigaan ku dhiiri gali.

- Iyada oo la qiyaasayo falalka caddaalad-darada ah ee xafiisyada kala duwan sida dugsiyada, fasalada wax lagu barto dadka dareen mas'uuliyadeed aan lahayn ay ka fulin karaan in ardayda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Sida daradeed falalka caddaalad darada ah ee xafiisyada dawlada ee kala duwan laga fulin karo oo tusaale ahaan loogu soo qaado.

**Falalka kala duwan ee Caddaalad darada ah ee Deegaanadooda ka jira Waxyaabaha lagu garto**

*Hawlgal*

- Falalka caddaalad-darada ah waddooyin kala duwanba loo fuliya.

Falal-dhaqameedyo qaar ay sabab u yihiin oo ka mid ah falalka caddaalad darada ahba jira. Waxaa kale oo jira falal caddaalad daro ah oo ay sabab u yihiin lacag, qaarabaysi, iyo saaxiibtinimo. Arrimaha ama falalka lagu garto caddaalad-darada qaar ka mi dah hadi aynu soo qaadano waxaa ka mid ah waxyaabaha kala duwan ee la isu-maan dhaafo iyo isu-dhacyada qaybaha kala duwan ee bulshada oo la xidhiidha xukun maxkamadeed ama gudi-dhaqameed ku ridden labbada dhinac ee is-haya dhinac ka mid ah kadibna dhinaca laga guulaystay uu ku qanci waayo xukunka maadaama uu yahay xukun caddaalad-daro ah. Khayraadka iyo hantida Dalka iyo allaabada oo qaar muwaadiniinta ka mid ah loogu faa'iideeyo tallaabooyin loogu faa'iidaynayo oo la qaado; caddaalad-daro ku salaysan cayn (lab iyo dhadig), Diin, Luqad, Qabiil–iwm iyo tallaabooyin qofba qofka kale lagaga saraysiinayo ayaa jira.

***Gabagabada***

- Xarumo kala duwan iyo shakhsiyaad hawlaha ee ay fuliyaan in ay caddaalad daro u yihiin iyo in ayna ahayn kartida lagu kala saaro ama lagu qiimeeyo in la dhiso ayaa loo baahan yahay. Qaybahan waxbarasho qodobada ugu waa weyn in ay ardeydu fahamtay si aad u xaqiijisid siyaabo kala duwan u qiime kadibna waxyaabaha ay si khaldan u fahmeen ama ayna fahmin si kooban ugu sharax adiga oo tusaale adeegsanaya. In ay yeeshaan khibrad ay kaga hor jeestaan falalka caddaalad darada ah islamarkaana kobciyaan waa ujeedooyinka kale ee casharkani leeyahay. Sida daraadeed Geedi socodka tallaabooyinka lagaga hortegayo falalka caddaalad-darada ah waajibaadka muwaadiniinta ka saaran in ay ka soo baxaan waxaa looga baahan yahay in ay horray awoodooda u sii dhisaan.
- Aqoonti iyo xirfadihii la rabay in ay casharka ka bartaan in ay hanteen iyo in kale islamarkaana ujeedada casharka in laga gaadhay si aad u xaqiijisid su'aalo guud oo la xidhiidha weydi qaarka mid ah ardeyda. Qodobadan hoos ku xusan in ay fahmeen iyo in kale hubi:
- Arrimaha caddaalad darada ah ee deegaanadooda laga fuliyo waxyaabaha lagu garan karo ama lagu qeexi karo in ay dareemeen islamarkaana kobciyeen xaqiji.

## 4.2. XARUMAHA/MACADYADA ARRIMAHA BULSHADA RAYADKA KA SHAQEEYA (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha/Qalabka Tix-raaca***

- Dugsi, xarun caafimaad ama sawiro kale oo la mid ah ama la xidhiidha.

**Xarumaha Adeegyada kala duwan ee Bulshada rayadka ah bixiya ee Deegaanadooda laga helo tayada iyo Caddaaladnimada ay muujiyaan**

***Su'aalaha Hordhaca ah***

- Deegaanadiina dugsiga la rummaysan yahay in uu yahay dugsiga aad ugu waa dugsige? faah-faahiya sababaha uu ugu wanaagsanaaday? (liis gareeya).
- Xarumaha bixiya adeegyada bulshada ee deegaandiina ka jira kana wanaagsan kuwa kale inta aad sheegtaan sababaha ama waxyaabaha uu kaga wanaagsan yahay liis gareeya.
- Ardayda deegaanadooda dugsiyo isu-mid ah hadi ay ka jiraan tayada ay leeyihiin iyo sababaha ha qeexaan.
- Tallooyinka ay soo bandhigeen dareeno kala duwan ama is-khilaafsan hadi ay jiraan ardeyda kale si ay fikradahooda uga dhiibtaan u soo bandhig si ay uga wada hadlaan.
- Ugu dambayn qodobada casharka ugu waa weyn si kooban ugu soo jeedi adiga oo la xidhiidhinayo casharka cusub ee aad rabtid in aad bilawdid.
- Hasa-yeeshee, dugsiba dugsi, xarunba xarun marka la isu-barbar dhigayo lana

tartansiinayo waa in laga digtoonaado in ay isu-dhacyo iyo muran in uu ka dhax abbuurmo. Waa in qodob muhiim ah oo dhab ah inta la doorto la isu-miisaamo.

*Shaqada kooxaha ee 1aad*

- Afar kooxood oo midiiba 4-5 xubnood ka kooban diyaari. Iyaga oo amar ka ama tilmaamaha la siiyey ku salaynaya koox walba warbixin saddex-maal-mood gudahood ha ku bandhigto ujeedada shaqada kooxduna waa in ay soo xaqiijiyaan xarrumaha bulshadu adeegyada ay bulshada siiyaan in ay yihiin adeegyo ku habboon islamarkaana caddaalad ah in ay yihiin iyo in ayna ahayn iyaga oo waxyaabo la taaban karo ku qiimaynaya kuna tartan siinaya adeegsanaya taas oo u noqonaysa fursad ay ku kobciyaan xirfadahooda in loo hawl fudaydiyo ayaa loo baahan yahay.

*Shaqada kooxaha ee 2aad*

- Laba kooxood oo wali aan soo jeedinin shaqadooda ama xiligi ay soo jeedin lahaayeen; gaadhin diyaari. Qodobka ugu weynina waxaa weeyaan si ay dalkooda sabboolnimada uga saaraan in laga caawiyo sidi ay u yeelan lahaayeen dhaqan wanaagsan. Sida daradeed arday walba mustaqbalka waxyaabaha uu/ay leeyahay/leedahay waan u sammayn doona ama sidii loogu sammayn lahaaban u hawl galaya Deegaankiisa, bulshadiisa iyo dalkiisa dareenkiisa is-xilqaanimo iyo ka go'nnaanshihiisa in labaadho weeyaan. Hasa yeeshe waxaa loo baahan yahay in laga digtoonaado in ayna ku abuurmin shucuur ama dareen hiyi kac ah oo xad-dhaaf ah ama si aan caadi ahayn uga sareeya intii loo baahna.

**Xarumaha bixiya adeegyada Bulshada ee Deegaanadooda laga hello tayada farsamada iyo Caddaaladnimadeeda**

- Buuga ardeyga iyo sharaxaada iyo qeexitaanada buuga tilmaame bare ku xusan in ay ku filan yihiin ayaa laga yaaba. Iyada oo qeexitaanada lagu salaynayo islamarkaana tijaabooyinka gaar ahaaneed lagu xoojinayo in casharka la soo gabagabeeyo waa la kara.

*Gabagabada*

- Waxbarashada xiisadan adiga oo qodobaa ugu waa weyn mid-mid u soo qaadanaya dareen iyo aqoon ku filan in ay helleen in aad xaqijiso waa lagama maar-maan. Qodobka soo socda fahamki looga baahna in ay helleen in uu gaadhsiiisan yahay inta aad xaqiijiso casharka cusub u gudub.

## 4.3. WAXYAABAHA AASAASKA AH

*Kaabayaasha/Tix-raaca*

Boostaro iyo taswiiro muujinaya xarumaha caddaalada sida xarun boolis, maxkamad iyo waaxyo kale oo la xidhiidha

*Hordhaca*

*Su'aasha hordhaca*

- Dadku falal caddaalad-daro ah maxay u sammeeyaan waxyaabaha ama qodobadan aad is-leedihiin waxay sabab u yihiin falal caddaalad daro ah la sammeeyo liis gareeya.
- Falalka caddaalad xumada ah ee Darajo ahaan iyaga loo gaysan karo iyo waxyaabaha asaaska u noqon kara si ay u sharaxaan dhawr ka mid ah sii fursad.
- Tallooyinka ay soo jeediyaan ardeyda kale weydi si ay aragtidooda uga bixiyaan.
- Kadibna si kooban ugu soo koob dulucda casharka adiga oo la xidhiidhinaya qaybta casharka ugu muhiimsan (badhtamaha).

*Hawlgal*

- "Mudane Caydiid; Duqii magaalada" sheekada cinwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Qodobada aad ugu hagaajinaysidna sedan soo socota waad u soo diyaarsan karta.
- *Su'aalaha 1aad* iyo *4aad* qodobada aad ugu saxaysid sheekada uga soo diyaari.

- *Su'aasha 2aad*, waxaa lagu miisaamaya aragtiyada gaar ahaaneed ee ardey walba si gaar ah u leeyahay. Farsamadu sax ma'aha ku leh oo aminsani waa in ay noqdaan. Dhibaatooyinka soo gaadhay waaxyaha kale ee caddaalada in ay ogaysiiyaan si ay tallooyin uga siiyaan islamarkaana ay noqdaan kuwa talada qeexa u qeexa. Iyaga iska daayo dhibaatooyinka caddaalad darada ah ee dadka kale soo gaadhaya Dhaqan ay kaga horjeestaan isla haddaba in aad mas'uuliyadeeda korka ka saarto waad karta.
- *Su'aasha 3aad.* Isla arrinta iyada ah cida mas'uuliyada ugu saraysa ay saaran tahay waa gudida. Arrimo aan caddaalad ahayn iyada oo la fulinayo amusnaan hadi ay ku dhaafaan qof kasta oo gudiga xubinka ah ayaa mas'uul ka noqon doona lagalana xiisabtami doono.

***Hawlgal***

- Kooxaha 7aad ama 8aad inta aad diyaarisid layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Koox walba su'aal ha shaqayso. Warbixintana dhawr kooxood oo qudha ha soo bandhigaan. Waxaa habboon in aad loogu dadaalo in su'aalaha oo dhan la soo bandhigo. Bare! si aad su'aalaha ugu hagaajiso qodobadan soo socda isticmaali karta:

1. Gafafka muwaadiniinta loo gaysanayo dad kala duwan oo ay ka mid yihiin shakhsiyad, mas'uuliyiin dawladeed iyo shaqaalaha dawladaba waa loo gaysan karaa. Xadgudubyada muwaadiniinta loo gaysto intooda badan waxaa fuliya mas'uuliyiinta dawlada ee xarumaha kala duwan maamula iyo shaqaalaha in ay yihiin ayaa la fahamsiin kara. Dugsiyada dhaxdoodana xadgudubyada laga gaysan karo tusaale ahaan ugu soo qaad.

- Xadgudubyada ay si gaar ahaaneed u arkeen iyada oo la fulinayo islamarkaana ay maqleen ha qeexaan.
- Sida uu odhaah ahaan ama hadalkiisa sida ugu sharaxay waan ku heshiinayna ama waan ku qanacsanahay inta la yidhaahdo waa in lagu soo gabagabeeyo. Hadalkan ama odhaahdan weyn laga bilaabo da'da hada ay jiraan waxyaabaha xadgudubyada ah ee ayna rabin in iyaga loo gaysto waa in ay ka digtoonaadaan in ay dadka kale u gaystaan.

2. Qaybta 1aad ee korka lagu liis gareeyey dhammaantood waad qeexi karta. Hasa yeeshee waaxyahan korka lagu liis gareeyey darajadooda marka loo fiiriyo mas'uuliyado kala duwan bay yeelan karaan. Waaxyaha dalwada iyo shaqaaluhu marka loo fiiriyo dadka kale mas'uuliyada aad u weyn ama aad u saraysa in ay ka saaran tahay in ay caddaalada illaaliyaan islamarkaana dadka kale ku dhiiri galinyaan in ay ixtiraamaan waa in ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Sida daradeed xarrumaha dawlada mas'uuliyiintooda iyo shaqaalaha muwaadiniinta xuquuqdooda in ay dhawraan ayaa loo xilsaaray. Heer dugsimarka loo fiiriyo maamulaha dugsiga, barayaashu ardeyda iyo dhammaan shaqaalaha dugsiga oo dhan mas'uuliyada ka wada saraysa mas'uuliyadaha dadka kale ayaa saaran. Xuquuqda ardeyda ee lagu joogsaday in ay dhawraan iyo in dadka kale ku dhiiri galiyaan in ay ixtiraamaan iyada o loo fiirinayo mas'uuliyado kala duwan in ay leeyihiin in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.

***Gabagabada***

- Qodobadan soo socda ee aasaasiga ah in ay ardeyda si wanaagsan u fahmeen si aad u hubisid waa in aad adeegsatid su'aal iyo jawaab.
- Xuquuqda muwaadiniinta oo ah la daryeelin.
- Awooda mas'uuliyadeed ee la siiyey oo ayna si habboon u adeegsanin iyo.

- Muwaadiniinta oo si siman ama midaysan aan loogu adeegin dhibaatooyinka ka immaan kara in ay fahmeen in la xaqijiyo ayaa loo baahan yahay.

## 4.4. XAALADAHA LAGAMA MAAR-MAANKA AH (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka Tix-raaca*

- Dastuurka Dawlada, qaynuunada, sharciyada la isu-hogaamiyo/maamulo/, nidaamyada dugsiyada lagu maamulo iyo sharciga asluubta ee lagu socdo.
- Boostaro, taswiiro, iyo tusaalooyin muujinaya xarumaha xalinta khilaafyada iyo isu-dhaca deegaanada ku dhaca.

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

- Xaaladaha lagama maar-maankau ah in dugsiyada iyo fasalada wax lagu barto caddaalad laga dhaqan galiyo maxay yihiin.
- Qofka falal caddaald–daro ah loo gaystay xuquuqdoodana laga duudsiyey maxaa ay tahay in ay sammeeyaan?
- Ardeydu iyaga oo soo qaadanaya fikradihi hada ka hor ay ka wada hadleen tallooyin ha ka dhiibtaan.
- Tallooyinka ay soo jeediyaan ha ka wada hadlaan.
- Iyada oo mawduuca casharka lala xidhiidhinayo qodobada ugu muhiimsan adiga oo u taxaya u soo koob.

*Hawlgal*

- Qaybta labbaad "Nalson Mandeela" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga shaqeeyaan. Bare! marka aad u saxaysidna qodobadan soo socda waad adeegsan karta:

1. Iyada oo sheekada lagu salaynayo in qodobo lagu saxo la diyaariyo.
2. Nidaamka diimuqraadiga ah iyo xarumaha caddaalada iyada oo la adkaynayo, xadgudubyada muwaadiniinta loo gaysanayo iyada oo loo fiirinayo kolba faldambiyeedka la gaystay inta uu le'egyahay in ganaax u dhigma la ganaaxo. Dareenka shucuur ahaaneed ee muwaadiniinta oo la dhiso, fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo oo laga baxo–iwm

- Faa'iidada caddaalada oo la liis gareeyo xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed oo la daryeelo, nabad-galyada iyo barwaaqada, nidaamka Diimuqraadiyadeed oo la xoojiyo in la xidhiidhiyo lana fahamsiiyo ayaa la karaya.
- Arrimaha lagama maar-maanka u ah in caddaalada la dhidibada loo taago fikradaha la xidhiidha ee la liis gareeyey iyada oo lagu Aadinayo fikradaha lagu soo jeediyey fikrado aad ugu toosinayso u soo bandhig. Tusaale: Waxyaabaha nidaamka diimuqraadiga lagu garto mid ka mid ah ayaa waxaa uu yahay nidaamka caddaaladeed oo dhidibada loo taago lana ballaadhiyo. Sida daraadeed, si caddaalada dhidibada loogu aaso waa in nidaamka diimuqraadiga ah la adkeeyo.
- Anshaxa wanaagsan (good ethics) ayaa ah farsamooyinka caddaalada lagu ballaadhiyo mid kale oo ka mid ah. Si la aqbali karo islamarkaana qofna aan xuquuqdiisa ku xadgudbaynin oo anshax wanaag ku dheehan yahay in loo fuliyo hawlaha kala duwan waxaa lagu heli kara marka muwaadinin anshax wanaagsan leh la hello. Fikradaha kale ee la soo dhigay sedan oo kale ay xidhiidh toos ah ula leeyihiin.

*Hawlgal*

- Si ay layliska ay qoysaskooda ugala soo sheekaystaan guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Jawaabaha ay ku soo gudbiyaan dadaalada caddaalada dhidibada loogu aasaasayo ee illaa iyo hada la sammeeyey ha qeexaan (guriga, dug siga–iwm). Ardayda tijaabooyinka wanaagsan sammeeya in ay ardeyda kale

in uu u qeexo ku dhiiri gali. Hadi aad karto waxyaabo aad ku baraarujisid u soo bandhig.

**Xaaladaha Aasaaska u ah Jiritaanka Caddaalada**

Bulshada dhaxdeeda si caddaalad looga dhax abuuro maxaa loo baahan yahay in hawlo kala duwan la qabto ugu horrayn Dawlada iyo muwaadiniintu Dastuurka dalka u yaala sida ugu habboon waa in ay u ixtiraamaan, sharciga iyo nidaamka oola qadariyo, falalka caddaalad darada ah si loo hagaajiyo oo tallooyin laga siiyo waxay ka mid yihiin waxyaabaha ama xirfadaha caddaalada lagu xoojiyo ee laga sugayo muwaadiniintu in ay la yimmaadiin. Xuquuqaha dadka kale in la dhawro islamarkaana in dadka kale falal caddaalad daro ah aan loo gaysanin–iwm fikradaha leh ayaa la soo qaadan kara. Sida daraadeed had iyo jeer in la yidhaahdo caddaalad waa la sugaya lana joogtaynaya iyada oo la qiyaasayo suurta gal ma noqonayso.

Dadku ma yaqaano caddaalada maadaama ayna garanayna xiliyo kala duwan iyaga oo khaladaad badan sammaynaya ayaa la arka. Waxaa hadaba mamuuc ah in falka caddaalad oo lagu hagaajinayo aan la qaadanin ama tallaabo lagaga aar gudanayo in la qaado ma habboona.

Tallaabooyinka noocan oo kala ah waxay lidi ku yihiin adkaynta caddaalada. Bulshada rayadka ah dhaxdeeda falalka caddaalad-darada ah ee laga fuliyo waxay timmaada marka waddooyin nabad galyo ah islamarkaana sharciga waafaqsan in la qaado ayna lugo adag ku taagnayn.

Sida daraadeed, mararka qaarkood waxaa lagama maar-maan noqota in lala xaajoodo waaxyaha ku kacay ama falalka caddaalad-darada ah fuliyey si loo helo xal iyo is-faham waana hab kale oo caddaalada loo adkeeyo ama loo xoojin karo.

Habkani hadi uu noqon waayo mid xal lagu gaadhi kari waayo waxaa lagama maar-maan ah in gafka iyo caddaalad darada loo gudbiyo waaxyaha caddaalada ee ay khusayso. Tusaale ahaan, mararka qaarkood gaf aad u daran cida gaysatay si toos ah ama fool-ka fool ah loola hadlo xalna loogu helo dhibaatada islamarkaana si sharciga aan waafaqsanayn in ay noqdo ayaa laga yaaba. Arrimaha noocan oo kala ah waxaa lagama maar-maan ah loon abaahan yahay in si toos ah waaxyabaha caddaalada ee ay khusayso loo ogaysiiyo.

***Gabagabad***

- Adiga oo su'aalo adeegsanaya fikradaha casharka ugu muhiimsan in ay fahmeen waa in aad xaqiijisid si gaar ah u xaqiiji in ay ardeydu fahamtay qodobadan soo socda:
- Falalka caddaalada ah oo la dhaqan galiyo.
- Waaxyaha caddaalada ee deegaanku awooda mas'uuliyadeed ee la siiyey ee sharciga ku salaysan oo kali ah in ay ku shaqaynayaan.
- Muwaadiniintu in ay caddaalad helaan xuquuqahoodana isticmaalayaan.
- Xuquuqda oo la daryeelo iyo in la helo caddaalad dareen is-xilqaano la yeesho adkaynta caddaaladu faa'iidada ay u leedahay in ay qeexi-karayaan oo la xaqiijiyo.

## 4.5. CANSHUUR (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha tix-raaca***

- Buug, boostaro, xafiisyada cashuur ururinta–iwm.
- Qaynuunada cashuuraha lagu ururiyo oo daabacan.

**Cashuurta Xiliga iyo sidii loo bilaabay**

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Dawladu si ay muwaadiniinta ugu buuxiiso arrimaha guud ee faa'iidada u leh lacagaha ay ku bixiso halkay ka keenta ama ka hesha?
- Si ardeyda fursad ay ku qeexaan waxyaabaha ay ka fahmeen cashuurta iyo waxyaabaha la xidhiidha.

- Waxyaabaha ay soo jeediyeen qodobada ugu muhiimsan ee ayna fahmin ama khaldeen u hagaaji kadibna casharka dulucdiisa u gudub.

*Hawlgal*

- Iyaga oo laba-labo iyo saddax-saddex ah layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Su'aalaha layliska si aad ugu saxdid qodobadan soo socda waad adeegsan karta.

1. Dawlada waxay mas'uuliyadi ka saaran tahay in ay muwaadiniinta hawlo kala duwan u qabato. Waxay mas'uuliyadi ka saaran tahay in amniga iyo nabadgalyada bulshada ay sugto. Mushaarka shaqaalaha ayey bixisa, hawlaha dhismaha ayey fulisa.
2. 2aad iyo 3aad buuga ardeyga adiga oo ku salaynaya dib ugu hagaaji.

*Hawlgal*

- Layliskan fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan iyaga oo qof-qof ah. Dhawr qof sii fursad ay ku soo bandhigaan waxaa ay qabteen. Marka aad u saxaysid waxaad adeegsan karta "warbixinti nakdhujaan qaybteeda labbaad" sheekada cinwaankeedu yahay.

**Noocyada Dakhliga ah ee Cashuurta laga soo ururiyo**

*Su'aasha hordha*

- Sammanadi hore dadku noocyada cashuurta ee ay dawladahooda siiyaan liis gareeya.
- Qofba mar in ay fikradahooda ka dhibtaan ku dhiiri gali.
- Fikradaha ay soo jeediyeen daqiiqado kooban ha ka wada hadlaan.
- Saxitaan ku habboon marka aad siisid kadib casharka xiga waad u dhaafi karta.

*Hawlgal*

Layliska shaqo guri u sii si ay qoysaskooda ugala soo wada hadlaan. Qodobadan soo socda waad adeegsan karta marka aad u saxaysid:

Marka loo fiiriyo dal walba illaha cashuurta uu ka helo, noocyada cashuurta iyo caddaadka cashuurta la bixiyo isu-mid ma aha. Noocyada iyo caddadka cashuurta la qaado waxay ku xidhan tahay ama ku kala duwan yihiin kolba horrumarka dhaqaale ee dalku heerka uu gaadhsiisan yahay. Tusaale Itoobiya waaxda Beeraha iyo waaxda dhaqashada lo'da (lo'da) cashuur badan in ay ka soo ururiso way karta.

Dalka suudaana cashuurta kara. Hal dal dhaxdi isana illaha iyo caddaadka cashuurta uu ururiyo xiliba xiliga ku xiga way isbedali karaan.

Tusaale, Dalkeenu mustaqbaalka hadi uu yeesho shidaal wuxuu noqonaya il cusub oo cashuur laga ururiyo weeyaan macnuhu. Ardeydu iyaga oo qoysaskooda waydiinaya ha isu-dayaan in ay tilmaamaan illa kale oo cashuur laga helo. Dadka aan lahayn awood ay cashuur ku bixiyaan marka laga reebo muwaadiniinta sharcigu ku waajibiyey in ay cashuur bixiyaan oo dhan uu waa in ay bixiyaan in ay waajibku tahay waa in ardeyda la ogaysiiyo.

**Noocyada Dakhliga ah ee Cashuurta laga soo ururiyo**

Sharaxaadaha ama faah-faahinta buuga ardeyga ku xusan ee lagu qeexay macnaha iyo noocyada cashuurta iyo laylisyada dhaxdooda qeexitaanada la socda in ay fahmaan ku filan ka heli doonan ayaa loo malaynaya.Sida daraadeed ku wargali in ay akhristaan.

**Cashuurta in ay bixiyaan waa waajibaad Muwaadiniinta saaran**

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca ah*

- Maxay muwaadiniinta waajib ugu noqotay in ay cashuur bixiyaan?
- Muwaadiniintu cashuurta si ay u bixiyaan anshax noocee ah ayaa looga baahan yahay in ay yeeshan?
- Fikradahan la xidhiidha cashuurta bixinteedu oo xuquuqda iyo waajibaadka mas'uuliyadeed iyo Anshaxa wanaagsan marka la isu-dhafo waxaa ay ka fahmeen in ay qeexaan ku dhiiri gali.
- Fikradaha ay soo jeediyaan in ay ka wada hadlaan. Waxyaabaha ay khaldeen u

hagaaji adiga cashar qaybtiisa muhiimka ee aad rabtid in aad bilawdo adiga oo la xidhiidhinaya.

*Hawlgal*

- Layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan. Qodobadan soo socda adeegsan karta marka aad rabtid in aad u saxdid.

1. Hadi cashuurta la bixin waayo barnaamijyada horrumarinta, Amniga, xarumaha bulshada u adeega arrimaha la xidhiidha dhibaatooyinka immaan kara oo la tuso.
2. Sheekada ku saabsan manhaj warbixinteeda qaybta saddexaad adiga oo ku salaynaya faah-faahin dheeri ah u soo bandhig ardeyda.

**Waajibka Muwaadiniinta ka saaran in ay bixiyaan Cashuurta xaqa ah**

Dawladu in ay tahay xarun/macad guud oo bulshadu leedahay in ay tahay ayaa la aminsan yahay. Dawladu adeegyo kala duwan ayey bulshada siisa waxayna dhista macadyada ama xarumaha adeega guud siiya.Barnaamijyada horumarintana way ka shaqaysa.

Si ay barnamijyadan u fulisana waxay u baahan tahay lacag in ay hesho. Si kharashkan si ay u daboosho muwaadiniintu dakhliyada ay hellaan dawladooda waa in ay cashuur ka siiyaan. Cashuur bixintu hadi ayna waajib ku ahayn ama qasab lagaga dhigin muwaadiniinta qaarkood cashuurta waajibka ku ah ee xaqa ah in ay bixin waayaan ayaa dhici karta.

Sida daraadeed cashuurta waxaa waajib looga dhigay muwaadiniinta waajibaadka cashuur bixinta ee la saaray hadi ay ka soo bixi waayaan maadaama loo tiranayo ama loo arkayo in ay dambi galeen tallaabo sharciga waafaqsan ayaa laga qaadaya laguna ganaaxaya. Sida daradeed cashuurta in la bixiyo waxay noqotay arrin waajib ku ah qof kasta oo muwaadin ah oo leh awood uu cashuurta dawlada ku bixiyo. Sida awgeed muwaadiniinta xili kasta waxaa laga sugaya in ay cashuurta xiliga ku habboon iyo caddaadka xaqa ah ee lagu leeyahay ay bixiyaan. Cashuurta oo la bixin waayo, khiyaamo iyo musuq-maasuq lagu dhaqaaqo sharciga hortiisa oo la is-horkeeno ka sokow waxay noqonaysa arrin Anshax xumo ah.

*Gabagabada*

- Adiga oo su'aalo kala duwan weydiinaya ardeyda in ay fahmeen dulucda casharka iyo in kale xaqiiji. Kadibna waxyaabaha ay khaldaan ama ayna fahmin si kooban ugu faah-faahi. Qodobadan hoos ku xusan in ay fahmaan si gaar ah u hubi:
- Mudadi iyo sidii cashuurta ururinteedu ku bilaaban tahay in ay fahmeen.
- Noocyada dakhliga ah ee cashuurta laga ururiyo in ay liis garayn karayaan.
- Cashuurta xaqa ah oo la bixiyo in ay tahay waajibaad muwaadiniinta saaran in ay fahmeen.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA BUUGAARDAYDA

### I. Kor "Run" ama "Been" mida ku habboon

1. Run.
2. Been.
3. Been.
4. Run.
5. Been

### II. Isugu aadi sida ay isugu habboon yihiin

1. J.
2. KH.
3. B.
4. X.
5. T.

### III. Su'aalaha soo socda mid walba jawaabta ku habboon u dooro

1. B.
2. X.
3. X.
4. X.
5. X.

### IV. Buuxi meelaha bannaan

1. Cashuur.
2. Caddaaladnimo.

### V. Su'aalahan soo socda sharaxaad kooban mid walba kaga jawaab

# CUTUBKA 5: DAL JACAYL/WADANINIMO

## (9-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan waxyaabaha lagu garto ama lagu muujiyo dareenka dal jacaylka.
- Gartaan taariikhda dalka oo la garto faa'iidada ay u leedahay in dareenka dal jacaylka xoo gaysto.
- Fahmaan ujeedada adeega ku salaysan is-xilqaanka ama in uu qofku rabitaankiisa isu-diro.
- Gartaan hababka ama farsamooyinka lagu hello muwaadinimada.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka qodobada casharka oo faah-faahsan | Isha/caddaymaha lagu xoojinayo illaha laga helo. |
|---|---|---|---|
| 1. | Dal-jacayl | • Liis gareeyaan xaaladaha asaaska u ah lahaanshaha dareen dal-jacayl<br>• U bogaan garashada taariikhda dalkooda iyo bulshooyinkooda. | • Sawiiro kala duwan oo qeexaya dareenka dal-jacaylka. |
| 2. | Dhacdooyinka ama ficilada waxyeelada leh iyo kuwa wanaagsan. | • Daryeelaan allaabada dugsiga.<br>• Ururiyaan kadibna ku daadiyaan qushaashka meelo ku habbon. | • Taswiiro, boostaro muujinaya ficilada ama hab dhaqameedyada wanaagsan. Tallaabooyinka xubnaha wayxeeleeya. |
| 3. | Dabeecadaha isilqaanka | • Liis gareeyaan waxyaabaha lagu garto dhaqanada ama dabeecadaha is-xilqaanka.<br>• Yeeshaan dabeecadaha is-xilqaanka ah ee dugsiyadooda iyo agagaaradoodu ka sugayaan.<br>• Liis gareeyaan tallaabooyinka ama hawlaha laga sugayo in ay isu-xilqaamaan si ay dugsiyada dhaxdooda ugu fuliyaan.<br>• Ka qayb qaataan hawlaha dugsiga dhaxdiisa laga fuliyo iyada oo la is-xilqaamayo. | • Sawir, taswiiro–iwm muujinaya tallaabooyin is-xilqaan ah (dad si toos ah u fulinaya hawlo ay isu-xilqaameen. |
| 4. | Saboolnimada oo la tir-tiro. | • Sharaxaan muhiimada siyaasadaha iyo istraatiijiyadaha lagu tirtirayo sabboolnimada. | • Istraatiijiyada, jaraa'ido kala duwan oo barnaam-ijyada horrumarinta. Sawiro, taswiiro, muu-jinaya maal-galino, lagu sammaynayo jidad, layd-hka, waxbarashada caafi-maadka–iwm. |
| 5. | Muwaadiniimo | • Liis gareeyaan hababka muwaadinimada lagu hello.<br>• Qeexaan sida ay iyagu ku helleen muwaadinimada.<br>• Qeexaan macnaha calanka qaranka ujeedada iyo calaamada. | • Dastuurka jamhuriyada diimuqraadiga fadaraalka Itoobiya. |

## 5.1. DAL JACAYLKA (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha Waxbarashada laga tix-raacayo*

- Sawiro, buugaag, qoraalo, odhaahyada, qeexitaano, wargaysyo–iwm muujinaya ama qeexaya Dal-Jacaylka.

### 5.1.1. Xaaladaha Lagama-maar-maanka u ah dhisida dareenka Dal-Jacayl/Wada inimada

*Hordhaca*

*Su'aasha laga dhaqaaqayo*

- Gabayada buuga dhaxdiisa lagu soo bandhigay mawduucyada ay ka hadlayaan qeexa waxaa ay kala yihiin.
- Gabayga dhaxdiisa wada jira qoomiyadaha side loo qeexay?
- Iyagoo kali-kali gabayga inta ay akhriyaan fikradaha dal-jacaylka tilmaamaya ha tilmaamaan.
- Tallooyinka laga siiyey ama laga bixiyey inta ay ka wada hadlaan waxyaabaha u baahan in la saxo ugu hagaaji kadibna hawsha ku xigta uga gudub.
- Itoobiya in uu yahay Dal qoomiyado kala duwani si midaysan ugu wada noolyihiin islamarkaana ay tahay qurux dalku uu leeyahay ogaysii
- Guud ahaan muwaadiniintu in ay dalkooda sidii ay horrumar la taaban karo ugaadhsiin lahaayeen in ay u hawlgalaan iyaga oo is-xilqaamaya in ay muhiim tahay u sharax.

*Hawsha/Ficilka laqabanayo*

- "Dooda ardeyda" sheekada leh iyaga oo ku salaynaya layliska iyaga oo koox-koox ah fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Kooxuhu jawaabaha la siiyey iyaga oo wada hadalkooda ka dhaqaaqaya sida ugu habboon ha u hagaajiyaan. Dareenka Dal-jacaylka in siyaabo kala duwan loo kasbado loona xoojiyo in la qeexo. Labada kooxood qodobada ay ka doodayaan iyo faah-faahintooduba in uu Dal-jacaylka oo la xoojiyo uu Aasaas u yahay waa in la ogaysiiyo. Dal jacaylka si loo kobciyo waxaa lagama maarmaan ah in xuquuqaha gaar ahaaneed iyo kuwa kooxahaba inay daryeelaan "Fikrada leh inta la faah-faahiyo xuquuqaha diimuqraadiyadeed iyo kuwa adamaha eek u xusan cutubka koobaad in la xasuusiyo lana fahamsiiyo ayaa muhiim ah.

*Hawsha*

- Ardeydu su'aalaha layliska fasalka dhaxdiisa ha ku akhriyaay. Kadibna qodobadan hoos ku xusan ayey adeegsan karaan si ay isu-saxaan.

1. Dal jacaylka waxyaabaha ugu mudan ee lagu qeexo ma'aha quruxda ama bilicda dabeeciga ah ee dhulka sida wabiyada, buuraha, bannaanka, geedaha ama dhirta iyo kaymaha–iwm oo loo bogo ma'aha laakiin waxaa weeyaan in ay ardeyda la fahamsiiyo in bulshooyinka jacayl ku haboon iyo tix-galinba la siiyo. In xuquuqaha sinnaanta mudnaan la siiyo bulshada ah laga qaato, in ka go'naansho iyo dhaqan is-xilqaan ku dheehan yahay la yeesha ayaa ka mid ah waxyaabaha kale Dal-jacaylka lagu muujiyo ka mid ah loona baahan yahay in ardeyda la fahamsiiyo. Run ahaan waxyaaabha dabeeciga ah maadaama ay Adamaha muhiimad iyo faa'iido u leeyihiin in aynu daryeelno islamarkaana jeclaano ayaa waajib nagu ah. Hasa ahaate, marka la isu-soo duubo muwaadiniinta xuquuqahooda oo la ixtiraamo, ixtiraamka iyo jacaylka muwaadiniinta ka baxsan ma'aha.
2. Bare fikradaha cutubka afraad ku xusan ee fasalada 5aad iyo 6aad u tilmaam:

- Dareenka dal jacaylka oo luma
- Dagaalo sokeeye, kacdoon, dalka oo la burburiyo–iwm in ay qeexaan way karaan.

3. Fikradaha kala duwan oo su'aashan la xidhiidha ayey ardeydu qori karta. Muwaadiniinta da'dooda oo kale ah hawlaha ay qaban karaan in ay yihiin oo la tuso:

- In lagu dadaalo in si taxadar leh casharada loo darso/akhristo waxna la barto, dadka ilaalka/taakta daran oo la caawiya.
- Hantida iyo allaabada deegaanka iyo dugsiga oo la daryeelo.
- Qoyska oo kolba inta la awoodo la caawiyo.
- Xuquuqda dadka kale oo la dhawro.
- In loo hogaansamo sharciga iyo nidaamka dugsiga–iwm.

***Xaaladaha lagama maar-maanka u ah Xoojinta Dareenka Dal-jacaylka***

- Hababka Dareenka Dal-jacaylka loo xoojiyo way kala duwan yihiin islamarkaana aadbay u tiro badan yihiin. Sida awgeed, waxaa la tilmaami karaa waxyaabo badan oo midba midka kale taageeraya/xoojinaya. Waxyaabahan xuquuqaha sinnaanta in la ixtiraamo ayaa ah mid ka mid ah. Nidaamka diimuqraadiga ah arrimaha loo bogay tusaale in la isu-tanaasulo ama laga heshiiyo arragtiyada lagu kala duwan yahay, in la is-dhegaysto, in la wada hadlo–iwm oo dhaqan laga dhigto islamarkaana loo xoojiyo waxay aasaas u yihiin xoojinta/kobcinta dareenka dal jacaylka. Kuwa kalana waa la tilmaami karaa.

***Tusaale***

Khayraadka (hantida) dalkooda oo si siman uga faa'iidaystaan.

- Qolo-qolo, diin-diin, midab, luqad, dhaqan–iwm xadgudubyada ku salaysan oo la tir-tiro iyo kuwa la mid ah ayaa la sheegi kara.

Iyada oo waxyaabahan laga duwayo muwaadiniinta waxaa laga raba in ay noqdaan laga soo bilaabo carruurnimadooda kuwa arrimaha dalkooda u yeesha dareen ka go'naansho iyo lahaansho ku dheehan yahay una dooda in xuquuqaha bulshooyinka la daryeelo.

***Gabagabada***

Qodobkan casharada ay ku soo barteen fikradihi ugu waa weyna in ay fahamku filan helleen in la hubiyo ayaa lagama maarmaan ah. Kadibna waa in loo soo gunnaanado.

## 5.2. FICILADA WAXYEELADA UGAYSANKARO DAREENAK DAL JACALKA (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha la tix-raacaya***

- Sawiiro, boostaro, muujinaya ficilada waxtarka leh, dhacdooyin waxyeelo leh tallaabooyin ama ficilo muujinaya.

### 5.2.1. Hantida/Qalabka dadka/bulshada ka dhaxeeya oo la daryeeliwaayo ama la dayaco

***Su'aasha Hordhaca***

- Hantida dadka ka dhaxeeya lagu adeegto maxay yihiin?
  - ❖ Fikradaha/tallaabooyin kala duwan ee ardeyda ku siisay sabuurada korkeeda ku qor.
  - ❖ Tallooyinka la sabuurada lagu liis gareeyey ha ka doodaan ama ha ka wada hadlaan.
  - ❖ Fikrado habboon oo kooban marka ay soo jeediyaan ama adigu bare ahaan si kooban ugu saxdo qodobka xiga waad u dhaafi karta.

**Hantida Dadka ka Dhaxaysa oo la daryeeliwaayo**

Allaabada dadka ka dhaxaysa ee lagu adeegto waxaa weeyaan muwadiniinta badankoodu ama goobo gaar ah bulshada ku nool xubnaheedu allaabada sida wada jirka ugu adeegtaan ee ka dhaxaysa.

Tusaale ahaan macadyada ururada bulsho ee dugsiga iyo xaafada iyo allaabada ama qalabkooda, kaymaha goobaha kala duwan ee miyiga dalkeena laga hello, goobaha lagu

raaxaysto iyo waddooyinka–iwm macadyadan iyo meelahan dhaxooda allaabada kala duwan ee ay leeyihiin oo sida ugu habboon loo hayo, looga faa'iidaysto loona daryeelo ayaa loo baahan yahay. Waxaa loo baahan yahay dhalin yarada in ay si habboon u gartaan allaabadan dadka ka dhaxaysa waxaa ay yihiin iyo in la fahamsiiyo in looga baahan yahay in ay yeeshaan islamarkaana sii xoojiyaan dhaqan ama dabeecad lagu daryeelo allaabadan aynu soo sheegnay. Allaabada dadka ka dhaxaysa in bur-burinta iyo khasaarinta laga illaaliyo lana yeesho dareen muwaadinimo iyo mas'uuliyadeed oo dal-jacayl ku dheehan yahay.

### 5.2.2. Waxyaabaha hadhaaga wasakhda/qushinka oo goob kasta lagu daadiyo, suuliyada oo aan si habboon loo isticmaalin iyo dhaqanka "maxaa iga galay"

*Su'aasha Hordhaca*

- Qushinka oo goob kasta lagu shubo, suuliyada oo si habboon aan loo isticmaalin dhibaatooyin nooce ah ayaa ka dhalan kara?
  - ❖ Waxyaabaha ay ka garanayaan midba mar ha qeexaan.
  - ❖ Marka loo fiiriyo deegaanadooda dhibaatooyinka caafimaad sida xannuunada faafa, hargabka, xannuunada biyaha xummaada ka dhasha–iwm adiga oo sheegaya in aad tilmaamo siisid.

Tusaale waxyaabahan la xidhiidha ee dhacdooyinka taariikh ahaaneed adiga oo soo qaadanaya sharaxaad faah-faahsan inta aad ka siisid fikradaha muhiimka ah waad u dhaafi karta fikradaha.

*Hawsha la qabanayo*

*Sawirada 5.4* iyo *5.5* waxyaabaha ay ka fahmeen ha qeexaan

Qushinka oo goob walba lagu shubo, Suuliyada oo si Habboon aan loo Isticmaalin iyo Fudaydsiga.

Laga bilaabo da'da hada ay yihiin falalka dugsiyada dhibaatooyinka caafimaad u keeni kara in ayna sammaynin kana digtoonaadaan ayaa looga baahan yahay. Arrimaha dhibaatooyinka caafimaad keeni kara islamarkaana dad badan naftooda galaafan kara waxaa ka mid ah qushaashka oo aan si habboon la isaga hagaajinin.

Ayaa leh hadaba mas'uuliyada qushaashka in la iska fogeeyo? su'aasha ah ayaa la iska weydiin karaa.Jawaabtu waxay noqonaysa "muwaadiniinta dhammaantood" ayuu noqonaya. Sida daradeed in nadiifinta agagaarada iyo qushaashka oo meelo ku habboon lagu shubo gaar ahaana nadaafada guryahooda iyo fasalada wax ku bartaan mas'uuliyad weyn ayaa ka saaran. Waxaana laga sugaya in ay si wanaagsan uga soo baxaan.

*Gabagabada*

Fikradahan asaasiga ah ee soo socda in ay fahmeen si loo xaqiijiyo ardeyda aqoonta ama kartida kala duwan darajo ahaan ardeyda leh su'aal iyo jawaab in lagu hubiyo ama loo adeegsado ayaa loo baahan yahay.

- Allaabada dugsiga ee sida guud loogu adeegto oo si habboon aan loo daryeelin.
- Qashinka oo meelwalba lagu tuuro ama lagu dadaadiyo.
- Suuliyada oo aan si habboon loo isticmaalin iyo.
- Waxyeelada dareenka is-xilqaamid la'aantu dal jacayl uu u gaysto in ay fahmeen oo la xaqiijiyo.

## 5.3. DABEECADAHA IS-XILQAANIMADA (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Ilaha tix-raaca*

- Dad ku caan baxay is-xilqaanimada taariikh nolo leedkoodi oo qoraal ah.

### 5.3.1. Ficilada Waxyeelada leh oo dhammaantood laga horjeesto

*Qalabka Tix-raaca*

- Sawiiro, boostaro–iwm muujinaya qushaash guryo agagaarkood lagu shubay.

*Su'aasha*

Sheega ugu yaraan, afar ka mid ah falalka dhibaatooyinka waxyeelo badan leh keeni kara iyo sida looga hortegi karo.

*Hawsha*

"Ficilada Deegaankii Nadiifta ahaa" sheekda ku saabsan iyaga oo ku salaynaya layliska guriga ha kaga soo shaqeeyaan.

**Tallaaba kasta oo waxyeelo keeni karta oo la is-hortaago**

Si danahaaga ama waxyaabaha aad xiisaynayso u hesho ama u gaadho in marka hore dadka kale la taakuleeyo iyo in waxyaabaha dadka kale waxyeelaynayo laga digtoonaado ayaa loo baahan yahay. Sida daraadeed, dadka dunida korkeeda ku nool loogama baahna kali ah in ay danahooda gaarka ah illaashadaan waxaa uu xil ka saaran yahay in dadka kalana taageero ku habboon la siiyo. Waxkhtiyada, aqoonta, allaabada iyo nafta(nolosha) dadka kale in la dhawro ayaa aad muhiim u ah. Ficiladan wanaagsan hadi xata la fulin kari waayo waxaa lagama maar-maan ah in laga dhawrsoonaado in la sammeeyo ficilo ama dhacdooyin dadka kale waxyeelo u gaysta.

Mar-marka qaar ficilada is-xilqaanimada gaar ahaaneed lagu fuliyo waxaa weeyaan mas'uuliyadi uga saarnayn. Tusaale dadka masaakiinta ah oo la caawiyo, dadka laxaadka l'a oo la daryeelo, arrimaha caddaalad darada ah oo aan la aqbalin–iwm.

*Gabagabada*

- Su'aalo afka laga weydiiyo ardeyda si loo hubiyo in ay ujeedooyinka casharka hanteen iyo in kale. Kadib si kooban loogu sharaxo dulucda casharka iyada oo tusaale la adeegsanayo.

## 5.4. SABOOLNIMADA OO LA TIR-TIRO (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka Tix-raaca*

- Siyaasado iyo istraatiijiyado horru marineed oo xaafiisyo kala duwan lagu diyaariye.
- Wargaysyo, jaraa'iido kala duwan oo ku saabsan barnaamijyo horrumarineed oo dawladu diyaarisay.

### 5.4.1. Siyaasadaha iyo Istraatijiyadaha Barnaamijyada Horrumarintu muhiimada ay u leeyihiin tir-tirida Sabboolnimada

*Hordhaca*

*Su'aasha Hordhaca*

- Sawirba iyada oo midka kale la barbardhigayo fariinta ay gudbinayso in saxibada kale lagala wada hadlo.
  - ❖ Iyaga oo sawirada fiirinaya tallooyinkooda ha qeexaan.
  - ❖ Tallooyinka ay soo bandhigeen sii fursad ay fikradahooda uga dhiibtaan.
  - ❖ Ugu dambayn saxiitaan ku habboon sii kadibna qodobka xiga u dhaaf.

Shaqadu in ay tahay wadada sabboolnimada lagaga baxo bar. Laga soo bilaabo carruunimada qof kasta sida kali ah ee uu dhibaato, baryo iyo sabboonimada kaga baxi karo in ay tahay shaqo waain ay ardeydu fahamto. Sida daradeed, dugsiyada, qoyska, goobaha ay deganyihiin, magaalada ay ku nool yihiin–iwm hawlaha ku habboon ee fay ku fulin karaan in loo tilmaamo, iyo laga bilaabo hada in ay si hawl karnimo leh wax u bartaan si ay mustaqbalka u hantaan nolol heer sare ah in la dareensiiyo ayaa lagama maar-maan ah.

Dalkeena siyaasado kala duwan oo dawladu dajisay in ay jiraan oo la ogaysiiyo. Siyaasado iyo istraatiijiyado dhaqaale, bulsho, siyaasadeed, xidhiidhka dibada dalkeenu la leeyahay, kuwa dhaqan iyo waxbarasho, caafimaad–iwm in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay. Siyaasadahan iyo istraatiijiyadahan in lagu talagalay in barnaamijyada horrumarinta lagu dadajiyo, dalkeenana saboolnimada lagaga saaro in la ogaysiiyo ayaa muhiim ah.

*Hawsha*

- Layliskan su'aalihiisa guryaha ha kaga soo shaqeeyaan. Qodobadan soo socdana waxay u adeegsan karaan in ay isu-saxaan.
  1. Sabboolnimada siyaabo kala duwanba loo qeexi karaa (cutubka 7aad dhaqan

hawlkarnimo qodobka leh ayaa la fiirsan kara).

**Macnaha sabboolnimadu waa**

*Heerka qoyska*: Cunto cabitaan la cabo, waxbarasho la'aan, in cid kale dulsaar lagu noqdo, hooyooyinka iyo carruurta dhimashadooda bata, balwado waxyeelo badan oo la yeesho, jidhka oo laga ganacsado–iwm ayey sabboolnimadu sabab u noqota.

*Degaanka*: Dhibaatooyinka caafimaad, boob iyo tuuganimada oo ballaadhata, meelo nadiif aan ahayn oo lagu noolaado–iwm.

*Dalka*: Dib u dhacnimo, dhaqaale daro, dalalka kale oo caawimaad la weydiisto, shaqo la'aan, waxbarasho aan tayo lahayn, caafimaad daro, in la waayo biyo la cabo oo nadiif ah iyo adeegyada kale ee bulshada oo la waayo ayaa lagu garta.

2. Sabboolnimada si looga baxo waxaa loo baahan yahay in dadaalo kala duwan la sammeeyo. Hantida iyo aqoonta oo la isu-ladho hawlaha kala duwan ee horrumarintana laga qayb galo, nidaamka diimuqraadiyadeed oo la xoojiyo–iwm dhaqan shaqo oo la yeedho ayaa loo baahan yahay.

Ardeyda waxbarashadan qaadanaysa sabboolnimada in ay heer dal u fiiriyaan ayaa loo baahan yahay. Sida awgeed in dadaal loogu jiro sidi dalkeena sabboolnimada looga saari lahaa islamarkaana siyaasado iyo istraatiijiyado lagu horrumarin karo dalka in la diyaarinayowaa in la ogaysiiyo. Waxbarashada, beeraha, warshadaha, caafimaadka, xidhiidhka dibada, ka qayb galka dumarka siyaasado iyo istraatijiyado horrumarineed in la jeexo lana dhaqan galiyo ayaa ah sida dalkeena sabboolnimada looga saari karo.

## 5.4.2. Guryaha iyo Dugsiyada oo laga fuliyo adeegyo iyada oo la Is-xilqaamayo

***Su'aasha Hordhaca***

***Sawirku muxuu fariin gudbinaya?***

- Sawirka 5.7 sawirada kadul muuqda waxaa ay ka fahmeen ha qeexaan.
- Fikradaha ay ku saabsan yihiin ha ka doodaan.
- Saxitaan ku habboon inta la siiyo casharka si toos ah waa loo bilaabi karaa.

***Hawsha***

- Sheekda "Wiilashii xumaa ee xaafada" inta aad soo qaado.
- Laba kooxood oo midkiiba 5-6 ardey ka kooban yahay inta la sammeeyo.
- Koox walba hal su'aal ah oo ay ka shaqaeeyaan in la siiyo.
- Warbixin hal bogaan ka badnayn xiisadan xiisada ku xigta ha keenaan.

Si kooxaha loo siiyo tilmaamo ay ku hawlgalaan qodobada soo socda in loo qeexo ama sharaxo ayaa loo baahan yahay.

1. Shaqooyinka si is-xilqaanimo ku dheehan tahay loo fuliyey hadi ay ka qayb gallaan shucuubrta gaar ahaaneed eek u abuurmaysa iyo faa'iidada ay ka helayaan, iyada oo lagu salaynayo warbixinadooda ha isu-duba ridaan.
2. Dalkeena in ay jiraan dad kala duwan oo caan ku ah ka qayb galka hawlaha si is-xilqan ku dheehan yahay loo fuliyo in la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Tusaale marwo Ababej Goobana, Dr. Jambar, mudane (Mrs) kaarlhens–iwm ayaa la tilmaami karaa. Waxqabadka wanaagsan ee dadkan adiga oo tusaya taariikhda dadka waxyaabaha ay ka baran karaan warbixin tilmaamaysa in ay soo bandhigaan in lagu dhiiri galiyo ayaa loo baahan yahay.

Dugsiga iyo Guryaha dhaxdooda oo adeegyo Is-xilqaanku dheehan yahay laga fuliyo.

Hawlaha is-xilqaanka gaar ahaaneed lagu fuliyo oo laga qayb qaato kaalin ay horruarinta dalka iyo kobcintiisa ku leedahay oo mdhan ama bannaanba jirta. Iyada oo kaalintaan lagu duulayo muwaadiniintu in ay kobciyaan is-xilqaankooda faa'iido aad u weyn ay leedahay. Dhaqanka is-xilqaanimada nidaamka lagu xoojinayo

faa'iidada dugsiyadu leeyihiin ama ku leeyihiin waa kuwa aad u sareeya. Ardeydu dugsiyadooda iyo agagaarada goobaha ay ku nool yihiin hawlaha is-xilqaankooda gaarka ay ku fulin karaan kolba inta ay awoododu u saamaxdo in ay jiraan ayaa la ogyahay. Sida daradeed, hawlaha ardeydu si is-xilqaanimo ku dheehan tahay in ay dugsiga dhaxdiisa uga fuliyaan looga baahan yahay waxaa ka mid ah dugsiga iyo fasalada ay wax ku bartaan nadaafadooda oo ay illaaliyaan dadka kalana ku booriyaan in mas'uuliyadooda qaataan islamarkaana gutaan. Waxaa looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan oloolha dhir dugsiga dhaxdiisa lagu beerayo, saaxiibadooda laxaadka l'a oo ay caawiyaan, caawimaadaha kala duwan ee laga codsado oo ay kolba inti awoodooda ah ka qayb qaataan–iwm ayaa looga baahan yahay.

***Gabagabada***

- Si loo hubiyo in ardeydu fahamtay casharka qaybtan qodobada ugu waa weyn, su'aalo afka ah in la weydiiyo weeyaan. Kadibna si kooban loogu sharaxo dulucda qaybtan ayaa loo baahan yahay.

## 5.5. MUWAADINIMO/JINSIYAD (1-XIISAD)

***Kaabayaasha Qalabka Tix-raaca***

- Dastuurka jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadraalka Itoobiya.
- Sharciyda la xidhiidho dhalashada/ jinsiyda muwaadinimada.

### 5.5.1. Waddooyinka Muwaadinimada lagu hello

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Macnaha muwaadinimo waa maxay? hada ka hor casharadi aad soo barateen idinka oo xasuusanaya muwaadinimada waxaa aad ka taqaanin saaxiibadiin u sheega.
  - ❖ Dhawr ardey ah sii fursad ay ku sharaxaan waxaa ay ka fahmsan yihiin macnaha muwaadinimada.
  - ❖ Adiga oo ku salaynaya fikradaha ay soo jeediyaan wada hadal dhanka casharka u riixaya ha yeeshaan.

***Hawsha***

Ardeydu layliska kali-kali marka ay uga shaqeeyaan ardeyda ay is-garab fahdiyaan jawaabahooda ha is-barbar dhigaan. Dhawr qofna sii fursad ay jawaabahooda fasalka ugu soo bandhigaan. Kadibna waxyaabaha ay khaldeen u sax adiga oo tusaale adeegsanaya.

**Waddooyinka Muwaadinimada lagu hello**

Dalkeena waxaa jira labo wado oo lagu hello muwaadinimada. Waddaada hore waxaa weeyaan in lagu dhasho dalka dhaxdiisa. Waddada labbaadna waa mid sharciga dalka u yaala lagu hello. Hal qof marka la yidhaahdo waa muwaadin waa xubin ka mid ah xubnaha muwaadiniinta dalka ama kaalin muwaadinimo ay uu leeyahay wweeyaan macnuhu. Sida daradeed wuxuu yeelanaya waajibaad muwaadnimo oo looga baahan yahay in uu ka soo baxo iyo xuquuq muwaadnimo oo loo baahan yahay ama uu xaq u leeyahay in uu hello. Muwaadnimadu ma'aha oo kali ah in uu hello xuquuqda uu leeyahay oo u helo ama loo daryeelo. Waxaa kale oo muwaadinimadu ku xidhan tahay in mas'uuliyada muwaadnimo ee saaran si habboon uu uga soo baxo. Muwaadinimadu waxay aasaas u tahay Dal-jacaylka. Arrinta la xidhiidha helida muwaadinimada waxay ku xusan tahay Dastuurka Dawlada.

## 5.6. CALANKA QARANKA (1-XIISAD)

***Kaabayaasha/Tix-raaca***

- Calkanka Qaranka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadraalka Itoobiya iyo calanka dawlada-deegaanada.
- J.D.F Itoobiya calankeeda calaamada xidigta ah ee badhtamaha kaga taala.

**Macnaha Calanka qaranka iyo Astaanta xidigta Calanka Qaranka**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga dhaqaaqayo***

- Calaamada xidigta qaran ee calanka korkiisa ka muuqata maxay tahay? Maxayse fariin gudbinaysa?

- Ardeydu ha liis gareeyaan calaamadaha calanka qaranka ee J.D.F Itoobiya iyo calanada Dawlada-deegaanada dalku leeyihin iyo waliba midabyadooda. Iyada oo lagu salaynayo fikradaha la soo jeediyey casharka xiisada si toos ah u bilaw.

***Hawsha***

Fikradihi hada ka hor ay calanka ka helleen iyaga oo ku salaynaya layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Si ay faham dheeri ah u hellaana buuga ardeyga faah-faahinta ku qoran in ay akhriyaan ayaa aad muhiim ugu ah.

**Macnaha Calanka Qaranka iyo Calaamada xidigta ah ee Badhtanka kaga taala**

Itoobiya waa Dal kali ah oo ka tirsan wadanada Afrika ee gacanta guumaysigi re-galbeedka aan ku dhicin. Sido kale in bulshooyinka madaw xoriyadooda astaan u tahay islamarkaana calanada dal kasta oo ka tirsan dalalka Afrika midabyadooda calankeena midabyadiisu tusaale ahaan laga dhaqaaqayo u yahay ayaa la xasuusan yahay. Inta badan muwaadinimada waxaa ku xidhan ee xiliyo badan la soo qaado waa calanka. Calanku waa astaanta lagu kala saaro dalka iyo uwaadiniinta. Sida daradeed, qofka muwaadinka ah waxay mas'uuliyadi ka saaran tahay in uu garto calanka Dalkiisa, astaamaha qaran ee calanka, heesta qaran ee calanka. Dareenka Dal-jacayl muwaadinka dhabta ah waxaa lagu garta calanka dalkiisa, asataan qaran ee calanka iyo heesta qaran ee calanka dalka oo uu ixtiraamo. Calanka Dalkeena iyo iyo calankeenu heesta qaran maadaama ay yihiin astaamaha lagu garto cida ama waxa aynu nahay waxaa lagama-maarmaan ah in mudnaanta aad u saraysa la siiyo.

***Gabagabada***

- Si aad u hubiso in ardeydu fahamtay fikradaha Aasaasiga ah ee soo socda su'aalo weydi ardeyda.
  - Si aad u hubiso in ay fahmeen waddooyinka lagu helo muwaadinimada.
  - In ay si habboon u fahmeen macnaha calanka iyo astaanta qaranka ee calanka ku taala.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GUNNAANADKA CUTUBKA EE BUGA ARDAYDA

### I. Ku 'Run' ama 'Been' mida ku habboon ku qor

1. Run 2. Been 3. Been.

### II. Sida ay isu gu haboon yahiin isugu aadi

| | | |
|---|---|---|
| 1. X | 2. D | 3. J |
| 4. R | 5. KH | 6. T |

### III. Ka dooro jawaabta saxda h

| | | |
|---|---|---|
| 1. X | 2. J | 3. J |
| 4. J | 5. J | |

### IV. Buuxi meelaha banana

1. Xuquuda muwaadinimo.
2. Calan, astaan ama wadaninimo.

### V. Ka bixi jawaab gaaban

# CUTUBKA 6: MASUULIYADA

## (10-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan in ay muwaadiniinta waajib ku tahay in kaalinta mas'uuliyadooda kaga adan wakhtigi loogu talagalay, si aminimo iyo karti ku dheehan tahay uga soo baxaan.
- Fahmaan in qof kasta oo muwaadin ah uu mas'uulka yahay khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxan dhaqameedyada taariikhiga ah ka illaaliyo burburka iyo dabar go'a.

| Tirada | Qaybaha qodobada casharada | Ujeedooyinka qodobada casharada oo faah-faahsan | Tilmaanta qalabka lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Ballan qaadka | • Liis gareeyaan noocyada ballan qaadyada lagu sugayo in ay ka fuliyaan qoyska. | • Sawiro, dhaq-dhaqaaqyo shaqo oo mas'uulnimo ku dheehan tahay loo fuliyo. |
| 2. | Isu kalsoonaan (aragti fiican), Aminnimo iyo xaqsoornimo | • Sharaxaan muhiimada ay leedahay in mas'uuliyada si isu-kalsooni, aminnimo iyo xaq soornimo ku dheehan tahay. | • Pictures/actual activities that shows works with responsibility. |
| 3. | Khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxan dhaqameedyada taariikhiga ah. | • Liis gareeyaan khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxaanada taariikhiga ah faa'iidooyinkooda<br>• Ka illaaliyaan inti awoodooda ah khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxaanada taariikhiga ah ee deegaanadooda laga hello. | • Buugta, magaasiinada, boostarada–iwm lagu daabaco xarumaha farshaxaanada taariikhiga ah lagu kaydiyo.<br>• Farshaxanada kala duwan ee taariikhiga ah, qoraalada dadka dal xiisayaasha ah loo diyaariyo, muusiyeemyada.<br>• Goobaha dal xiis loot ego, sawiro, taswiiro, boostaro. |
| 4. | Cudurka EJ AY FII AYDHISka | • Liis gareeyaan waddooyinka la isugu gudbiyo Ej, Ay, Fii Aydhiiska.<br>• Liis gareeyaan waxyeelooyinka cudurka Ej, Ay, Fii Aydhisku qofka qaba, qoyska iyo Dalka.<br>• Iska illaaliyaan Ej, Ay, Fii Aydhiska.<br>• Daryeelaan dadka qaba cudurka kolba inta ay awoodaan. | • Boostaro, taswiiro, calaamado, lagu ddaabacay waxyaabo la xidhiidha cudurka Ej, Ay, Fii Aydhiiska |

## 6.1. BALLAAN QAADKA (BALLAANTA) (3-XIISADOOD)

*Kaabayaasha la tix-raacayo*

- Sawiro, boostaro, iwm muujinaya garsoorayaal, iyo sharciyahano ballan qaad sammaynaya ama dhaaranaya.
- Shaqaale dawladood oo la dhaarinayo.
- Madax weynaha Jamhuuriyada Dimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya oo dhaaranaya.

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

- Sawirka dushiisa dhalinyarada qalin jabisay ee ka muuqda maxay sammaynayaan? Macnaha in dad mas'uuliyiin ah la dhaariyo waa maxay?
- In la siiyo wakhti ku filan oo ay ku fahmaan su'aalahan kaga jawaabaan.
- In la siiyo fursad ay ku qeexaan waxaa ay fahmeen.
- Fikradaha la soo bandhigay iyada oo lagu salaynayo in ay wada hadal yeeshaan taas oo lagu xidhiidhinayo casharka soo socda.

*Ballaan qaadka (Ballaanta)*

Ballaan qaadka xaalado iyo meelo badanba laga sammeeya. Guurka, waaxda shaqo ee lagu takhasusay, doorashada xubnaha siyaasadeed ee ugu sareeya–iwm ayaa laga fuliyaa. Ballaan qaadku wuxuu tilmaamaya in hawl la fulinayo iyada oo ka go'anaanshaha ugu sareeya la adeegsanayo ama in la balan qaado in si hawl karnimo leh loogu hawl galayo sidii hawl ujeedadi laga lahaa looga gaadhi lahaa. Ballaan qaadku waxaa kale oo uu qeexaya in dadka ballan qaadka sammeeyey la sugo inta ay ku guulaysanayaan ujeedada mas'uuliyada wakhtigi loogu talagalay in ay ku fuliyaan. In laga soo baxo ama la fuliyo ballaanti la qaadayna waxay astaan wanaagsan u tahay anshax wanaaga iyo dacadnimada cida buuxisay ballanti ay qaaday. Mararka qaarkood naftooda ballan qaad u sammeeyaan.

Waxay noqon karta in waxyabaaha xun-xun laga foogaado. Waxaa kale oo ay noqon karta in si hawl karnimo iyo dadaal ku dheehan yahay in looga jilib dhigo dhibaatooyinka sida lama filaanka ah kuula soo gudboonaada natiijooyin waxtar lehna laga gaadho xal u helida dhibaatooyinka. Si kastaba ha u qalafsanaato dhibaatadu in loo halgamo sidi xal loogu heli lahaa kadibna ballan qaadki saaxiibada iyo muwaadiniinta in loo buuxiyo ayaa geesinimo ah. Sida daradeed, markasta oo ballan qaad la sammaynayo waxaa lagama maar-maan ah in aad loo digtoonaado. Ballan qaadka aad sammaynaysid in aad fulin karto ama ka soo bixi karto waain aad hubisid marka hore. Sababta oo ah waxaa dhici karta in naftaada iyo dadka kaleba uu ballan qaadka aad u sammayso dhibaatooyin u horseedo. Awooda iyo kortida aad uleedahay in aad ka soo baxdiid ballanta adiga oo aan hubin islamarkaana aadan darsin ballan qaad in aad sammayso waa aad ka digtoonaato.

*Gabagabada*

- Nuxurka waxbarashada qaybtan si fudud oo ay u fahmi karaan inta aad ugu soo bandhigtid ugu dambayntana hubi in ay faham iyo aqoon ku filan ka helleen.
- Waxaa kale oo muhiim ah in la hubiyo in ay liis garayn karaan guryaha dhaxdooda iyo iyaga darajo ahaan ballan qaadyada ay tahay in loo sammeeyo.

## 6.2. ARAGTIWANAAGSAN, AMINIMO, DAACADNIMO (3-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka tix-raaca*

- Xeerarka, sharciyada anshaxa shaqaalha.
- Taariikhda dad kooban oo lagu yaqaanay in ay shaqooyinka ku qabtaan aragti/rejo wanaag iyo mas'uulnimo si ay ku dheehan tahay.

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

**Aragt/rejo wanaagu waa maxay? Aminimada iyo xaqsoornimada side loo qeexa?**

- Kooxo inta la isu-qaybiyo in su'aasha hordhaca laga wada hadlo.
- Arrimo ku saabsan nuxurka inta laga wada hadlo in laga tallabixiyo dhawr qof la siiyo fursad.
- Dhawr fikradood oo lagu saxayo fikradahooda in la siiyo kadibna la dhaqan galiyo.

*Hawl*

- "Xoogsadahii aaminka aha" sheekada leh iyada oo lagu salaynayo kooxo yar – yar inta ay isu-qaybiyaan layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan.Dhawr kooxoodna shaqadooda fasalka ha u soo bandhigaan.

**Arragti/Rejo wanaagsanaan, Aminimo iyo Daacadnimo**

Qaar ka mid ah anshaxyada wanaagsan ee qofka dhalin yarada ah laga rabo in uu yeesho kuwa ugu muhiimsan waxaa kamid ah arragti/ Rejo wanaagsanaan, Aminimo iyo xaqsoornimo. Sida daradeed si ay ardeydu u kasbadaan dabeecadahan mid walba sidan hoos ku xusan ayey u sharaxi karayaan:

***Arragti/Rejo wanaagsanaan***

- Biniadamtinimo buuxda, Aminitaan adag, mas'uuliyad qaadid iyo qudasho ayey tilmaamaysa. Waxaa lagu qeexi karaa waxyaabahan soo socda: Qoyska dhaxdiisa, saaxiibada, shaqada dusheeda in la is-ixtiraamo, la is-caawiyo, la isjeclaado, la is-fahmo–iwm. Fikradahaaga iyo aqoontaada oo lagu kal soonaado, naftaada oo la maamulo, wax isweydaarinta oo laga fogaado–iwm.

***Aminimo:*** Rabitaanka iyo faa'iidada dadka, macadyada shirkadaha loo shaqeeyo, gabadha aad saaxiibka tihiin ama aad is-guursateen o la illaaliyo mas'uuliyadeedana la qaato ayuu eraygu tilmaamaya. Qoyska, barayaasha, saaxiibada, dugsiga, Dalka–iwm ah oo daacad ama aamin loo noqdo, hawsha lagu xil-saaray oo wakhtigeeda lagu fuliyo, nidaamka iyo Anshax oo la dhawro. In la qadariyo nidaamka iyo kala dambaynta la xoojiyo–iwm ayaa ka mid ah waxyaabaha Aaminimada lagu garto/qeexo.

***Xaq-soornimada*:** Warbixin si fiican loo garanayo rumnimaddeedana si wanaagsan loo xaqiijiyey oo cida ay khusayso la siiyo weeyaan. Waa iyada oo laga fogaado dareen laabla kac iyo hubsiimo la'aan, caddaalad daro iyo waliba go'aan aan si wanaagsan looga baraandegin in la gaadho oo laga fogaado. Xaq-soornimada waxaa lagu macneeya in aan been la sheegin, allaab aanad lahayn in aan la sheeganin ama adiga oo aan lagu fasaxin in aan la taaban, allaab dugsiga ka luntay in aan la damcin dugsigana loo soo celiyo, in aan wax la is-dabamarinin. Wax kastaba sida uu yahay ee xaqa ama dhabta ah in loo fuliyo, cabiro ama loo maamulo–iwm.

*Gabagabada*

- Fikradaha ama nuxurada hoos ku xusan ee Aasaasiga ah in ay fahmeen si loo hubiyo waxaa loo baahan yahay in la weydiiyo su'aalo aqoon ama kartida ardeyda lagu ogaan karo. Sida daradeed waa in a hubiyo in ardeydu:
  - ❖ Qeexi karaan macnaha rejo wanaagsanaan, Aminimo iyo xaqsoornimada waxaa ay tahay.
  - ❖ Mas'uuliyada oo si reja wanaagsan, Aminimo iyo xaqsoornimo ku dheehan tahay loo fuliyo muhiimada ama faa'iidada ay leedahay in ay fahmeen oo la hubiyo.

**Khayraadka Dabiicga iyo Raadaka Taarikhiga ah (2xiisadood)**

***Kaabayaasha/Qalabka tix-raaca***

- Sawiiro, boostaro, wargaysyo, buug–iwm kala duwan oo muujinaya goobo taariikhi ah.
- Goobaha, buuraha, wabiyada, Duur joogta taariikhiga ah islamarkaana dabiiciga ah ee deegaanka laga hello.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca ah***

- Sawirada iyaga oo ku salaynaya waxyaabaha ay ka fahmeen ha liis gareeyaan.
- Fikradaha iyo tallooyinka ay soo jeediyeen in uu la xidhiidho ama ku salaysan yahay khayraadka iyo farshaxanada taariikhiga ah ee dabeeciga in uu yahay oo la xaqiijiyo ama sidan oo kale loogu sharaxo ayaa wanaagsan.

Dayrka taariikhiga ee ku yaala magaalada Harar waxaa la dhisay qarnigii 16aad ujeedada loo dhisay waxay ahayd in bulshooyinka Harar iskaga illaaliyaan duqaymaha dibada lagaga soo qaadayey in ay tahay u sheeg ardeyda. Dayrkani goobaha Dalkeena ugu taariikhisan mid ka mid ah in uu yahay inta badana dadka dal-xiiska ah ay buuqdaan u sharax ardeyda. Sawirka labbaad qoomiyadaha koonfuureed beesha loo yaqaano koonso carada guur-guuraysa si loo joojiyo waxaa jira dayr dabiici ah oo loo joojiye. Hay'ada caalamiga ah ee magaceeda la yidhaahdo WESo ayaa dayrkan farshaxan ahaan u duwan galisay. Waxyaabahan iyo kuwa kale oo badan ayaa loo sharaxi kara ardeyda si ay u hellaan aqoon guud.

***Hawlgal***

- "Khayraadka Deegaanka Soomaalida" qoraalka ku saabsan inta ay akhriyaan layliska guryaha ha kaga soo shaqeeyaan.
- Layliska waalidiintooda inta ay kala soo sheekaystaan guryaha ha kaga soo shaqeeyaan.

**Khayraadka Dabiiciga iyo Raadadaka Taariikhiga ah**

Khayraadka dabiiciga hantida lagu magacaabo waxaa weeyaan waxyaabaha Adamuhu u lahayn awood iyo karti ama cilmi uu ku sammeeyo oo Illaahay Abuuray islamarkaana biniadamka looga baahan yahay in ay uu daryeelo ama ka illaaliyo wax kasta oo burburinaya ama sabab u noqon kara in ay baaba'aan.

Khayraadkani waxay ka kooban yihiin waxyaabo nool ama naf leh iyo kuwa aan naf lahayn oo dabeeci ah islamarkaana faa'iido u leh Adamaha loona baahan yahay in la xannaaneeyo mudnaan fiicana la siiyo. Ardeydana waxaa laga sugaya in ay u bogaan islamarkaana daryeelaan waxyaabahan dabeeciga ah. Marka guryaha ay baxaan ee ay dugsiga u sii socdaan bilicda qaabka dhulku u yaalo, wabiyada, kaymaha iwm. Hantida dabiiciga inay ka mid yihiin inta la ogaysiiyo in looga baahan yahay in ay mudnaan siiyaan waa in la baro.

Dhinaca kale farshaxanada/raadadka hadhaaga taariikhiga ah kuwa la yidhaahdana waxaa weeyaan waxyaabo horrumar, farshaxan iyo aqoon uu Adamuhu leeyahay ama hellay uu u adeegsaday mudo dheer ka hor. Hadi aynu si kale u dhigno farshaxanka taariikhiga ah waa waxyaabo biniadamku hal abbuuray isaga oo khibradiisa, aqoontiisa iyo kartidiisa adeegsanaya. Iyada oo tusaale ahaan loo soo qaadanayo farshaxanada iyo raadadka taariikhiiga ah ee deegaanada iyo Dalkaba laga hello waa in la fahamsiiyo.

***Gabagabada***

- Si aad u xaqiijiso in ay faham ku filan ka helleen casharada qaybtan waxaa lagama maar-maan ah in su'aalo kala duwan loo soo bandhigo. Kadib si kooban ugu sharax dulucda casharka soona gabagabe.

## 6.3. EJ, AY, FII AYDHIS (2 XIISADOOD)

***Kaabayaasha la tix-raacayo***

- Boostaro, caalamado, saawiro–iwm ku saabsan Ej, Ay, Fii Aydhiska.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Wadooyinka cudurka Ej, Ay, Fii Aydhiska la isugu gudbiyo waa maxay?
- Faafidada cudurka Aydhiska si loo yareeyo tallaabooyinka la qaatay waa maxay?
  - ❖ Ardeydu iyaga oo adeegsanaya tilmaamo ama illo kala duwan tallaabooyinka lagula dagaalamayo faafida cudurka ee la qaaday waxay ay yihiin ha liis gareeyaan.

**Waxyaabaha ay liis gareeyaan ha ka wada hadlaan**

***Hawlgal***

"Aydhis " tixda leh inta ay akhriyaan layliska fasalka dhaxdiisa qof-qof ha uga shaqeeyaan. Kadibna u sax adiga oo qoraalka ku salaynaya.

***Gabagabada Cutubka***

- ❖ Marka hore ardeyda sii fursady ay kaga sheekeeyaan waxyaabaha ay cutubka ka faa'iidaysteen, kadibna waxyabaaha ay ka tegaan ama ayna fahmin si kooban ugu sharax.

## JAWAABHA SU'AALAHA GUNNAANADKA CUTUBKA EE BUUGA ARDAYDA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been' mida ku habboon

1. Run. 2. Been. 3. Been.
4. Run. 5. Run.

### II. Isugu aadi sida ay isku leeyahiin

1. T 2. D 3. S
4. KH 5. J 6. X
7. B.

### III. Buuxi goobaha banaan

1. Masuuliyad.
2. Khayraadka dabiici ah,raadaka taariikhiga ah.
3. Cudurka Aydhiska

### IV. Ka dooro jawaabta saxda ah

1. X 2. X 3. J
4. B 5. J

### V. Jawaab Kooban Ka bixiya

# CUTUBKA 7: DHAQANKA SHAQADA

## (8-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan sharafta shaqadu leedahay.
- Ogaadaan faa'iidada ay leedahay in si hawlkarnimo leh loo shaqaysto wakhtigana sida ugu habboon shaqada loogu adeegsado.
- Gartaan ujeedooyinka horrumarinta barnaamijyada dhaqaale ee ku qeexaan Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka casharada oo faah-fahsan | Tilmaanta illaha xogta lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Dhaqan hawl karnimo | • Qeexaan macnaha in si hawl karnimo leh loo shaqeeyo waxaa uu yahay.<br>• Sharaxaan faa'iidada ay leedahay in wakhtiga si habboon shaqada loogu isticmaalo.<br>• Liis gareeyaan marka dhanka dhaqaalaha laga fiiriyo in laga hinaaso iyada oo aan la shaqeysanina wax la cuno waxyeelada ka dhalan karta. | • Taswiiro, boostaro–iwm muujinaya ardey casharo xafidaysa, siw ada jir ahna u wada hadlaya, askar, dad shacab ah oo shaqaynaya. |
| 2. | In wax la cuno iyada oo aan la shaqaysanin | • Qeexaan dhibaatada qoyska ka soo gaadhaysa in iyada oo aan la shaqaysan wax la cuno. | • Sawiro, taswiiro muujinaya dad shaqooyin ku jira. |
| 3. | Kartida aqoonta shaqo iyo Anshaxa aqoonta shaqo | • Qeexaan kartida aqoonta shaqo iyo Anshaxa aqoonta shaqo<br>• Sharaxaan Anshax darada aqoonta shaqo dhibaatooyinka muwaadiniinta ka soo gaadhaya | • Muwaadinin shaqooyin kala duwan ka qayb qaadanaya oo boostaro, filino taswiiro lagu muujiyey. |
| 4. | Dhaqanka hawl karnimo iyo wax soo saarka | • Liis gareeyaan ujeedooyinka wax soo saarka ee ku xusan Dastuur J.D.F Itoobiya | • Boostaro, taswiiro, qoraalo kala duwan oo muujinaya ama ka hadlaya ujeedooyinka wax saar ee dasatuurka dawlada ku xusan. |

## 7.1. MACNAHA DHAQANKA HAWLKARNIMO (2-XIISADOOD)

***Kaabayaasha la tix-raacayo***

- Filino, sawiiro, boostaro–iwm muujinaya ardey wax akhrisanaysa, wada hadal ku jirta, Askar, Dad-shacab ah shaqooyin kala duwan ku jira.

### 7.1.1. Si Hawlkarnimoku dheehantahay in loo shaqaysto

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Macnaha in si hawlkarnimo leh loo shaqeeyo waa maxay?
- Marka si hawlkarnimo leh loo shaqeeyo faa'iidada laga hello waa maxay?
  - ❖ Fikradaha ama fahamka ay ka qabaan nuxurka su'aalaha hordhaca ah warqad ha ku soo qoraan.
  - ❖ Jawaabahooda ardeyda ay is-garab fadhiyaan ha ka wada hadlaan.
  - ❖ Arragtiyadooda ay qeexaan oo lagu dhiiri galiyo.
  - ❖ Fikradaha ay soo jeediyeen ha ka wada hadlaan.

**Macnaha Dhaqanka Hawlkanimo**

Dhaqanka hawlkarnimo siyaabo kala duwanba loo qeexi karaa. In si hawlkarnimo leh loo shaqeeyo macna ahaan waxaa weeyaan shaqada lagu siiyey oo si fir-fircoon loo fuliyo. Shaqada bari, ama maalin kale qabanayaan looma baahna waxay tilmaamaysa in shaqada lagu fuliyo wakhtiga loogu talagalay ama loo qoondeeyey. Muhiimada ay leedahay dhaqan hawlkarnimo waxaa uu yahay oo la fahmo waxaa kuj filan in faa'iidada shaqada laga hello la fiiriyo. In si hawl karnimo leh loo shaqeeyo waxay kor u qaadaysa nolosha gaar ahaaneed waxayna da-dajinaysa horrumarka dalka tusaale qofka si hawlkarnimo leh u shaqaysta wuxuu awood u helaya in uu nolol heer sare ah ku noolaado kolba wixii ay naftiisu u baahatana si sahlanbu u helli karaya.

Qofka biniadamka ah nolol heer sare ah wuxuu gadhi kara kali ah marka uu si hawlkarnimo leh shaqadiisa u guto. Heer dal ahaana saboolnimada iyo dib u dhacnimada waxaa Dalka laga saari karaa kali ah marka muwaadiniintu ay yeeshaan dhaqan hawlkarnimo oo ay ku shaqeeyaan. In dhaqan hawlkarnimo ayaa lagu gaadha. Dadkuna sharaf iyo mahad naqbay ku hellaan.Shaqaalaha hawlkarka ah mas'uuliyada shaqo o dheeri ah ayaa in la saaro loo doorta.

Hawl karnimada carruurta waxaa ka mid ah marka kolba inti awoodooda ah qoyska caawiyaan, waxbarashada oo uu si habboon ula socdo shaqada fasalka iyo guriga wakhtigi loogu talagalay uu ku soo shaqeeyo. Ganacsadaha, shaqaalaha dawlada, beeralayda, xoola dhaqatada–iwm oo uu qofka ka shaqeeyo natiijooyin wanaagsan wuxuu ka keeni kara marka uu leeyahay dhaqan hawl karnimo. Dhaqanka hawlkarnimo oo la yeesho waxay ka soo bilaabanta caruurnimada marba marka ku xigana way sii xoogaysata.

### 7.1.2. Shaqada oo aan la yaraysanin

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Sawirka maxaad ka fahamsiin?
- Goobaha aad ku nooshihin dadka gala shaqooyin noocee ah ayey ka shaqeeyaan?
  - ❖ Wakhti ay sawirada ku fiirsadaan kuna fahmi karaan sii.
  - ❖ Sii fursad midba mar uu ku sharaxo waxaa ay ka fahmeen sawirada.
  - ❖ Ardeyda aan fursad helin jawaabo afka ah ha ka bixiyaan.

***Hawlgal***

- "Wiilkii Hawl karka ahaa" sheekda leh inta ay akhriyaan layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Xiisada xigtana koox-koox ha uga wada hadlaan jawaabihi ay guryaha kaga soo shaqeeyeen. Dhawr kooxood fasalka ha u soo jeediyaan jawabahooda.

### 7.1.3. Wakhtiga oo si habboon shaqada looga faa'iidaysto

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Idinku wakhtigiina siyaabaha aad u isticmaashaan saaxiibadiin u sheega.
- Macnaha wakhtiga oo sida ugu habboon shaqada loogu fuliyo waa maxay?

- ❖ Sii daqiiqado kooban oo ay su'aalahan tallooyin kaga bixiyaan.

Wakhtigu in uu yahay aalada shaqada lagu fuliyo in ay tahay oo la fahamsiiyo. Adiga oo soo koobaya u sharax faa'iidada ay leedahay in wakhtiga shaqada si habboon loo isticmaalo.

***Hawlgal***

- "Beer qodatadii Xaawo ahayad" sheekada leh layliska fasalka dhaxdiisa iyaga oo koox-koox ah ha kaga wada shaqeeyaan.

**Wakhtiga oo sida ugu Habboon Shaqada loogu fuliyo**

Wakhtiga oo si habboon shaqada loogu fuliyo macna ahaan waxaa weeyaan wakhtiga shaqada oo shaqo ama hawlo natiijo wanaagsan leh la qabto taas oo u dhiganta wakhtiga loogu talagalay. In laga digtoonaado in wakhtiga loogu talagalay. In laga digtoonaado in wakhtiga lagu lumiyo, waxyaabo aan faa'iido lahayn, ciyaar,–iwm ayaa ka mid ah siyaabaha isticmaalka wakhtiga lagu sharixi karo.

Dhanka ardeyda sida ugu habboon ee ay wakhtiga u isticmaali karaani waxaa weeyaan in ay wakhtiga u qaybiyaan saacadaha waxbarashada, saacadaha ay qoyskooda caawinayaan, sacaadaha ay nasanayaan–iwm kadibna sida ugu hawlgalaan ayaa loo baahan yahay. Wakhtiga oo sida ugu habboon shaqada loogu fuliyo nolosha shakhsiga oo ay kor u qaadayso ka sokow waxay kaalin muhiim ah ka qaadata horrumarinta Dalka. Sida daraadeed waa in ardeyda loo sharaxo lana fahamsiiyo faa'iidada uu wakhtigu leeyahay marka si habboon loo isticmaalo.

### 7.1.4. Shaqada oo aan la yaraysanin iyo Wakhtiga oo sida ugu habboon shaqada loogu qabto Faa'iidada uu Shakhsiga iyo Dalkaba u leedahay

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Wakhtigu waa dahab odhaahda tidhaahda maxay na tusaysa ama tilmaamaysa?
- Wakhtigu waa seef inta uuna ku jarin adigu jar odhaahda tidhaahda maxay inaa tusinaysa?

Wakhtiga iyo shaqadu waa labo aan la kala saari karin oo sida canteen ka labadiisa dhinac oo kale ah weeyaan. Shaqa kasta wakhtiba lagu fuliya. Si qofku noloshiisa horrumar u gaadhsiiyo waxaa looga baahan yahay in uu wakhtiga sida ugu waxtarka badan shaqada uu hayo ugu qabto. Ardeydu shaqada guriga ee loo diray wakhti ku habboon in ay qabtaan iyo in ay wakhtiga ku habboon wax akhristaan waxay aasaas u tahay nolol heer sare ah in ay mustaqbalka ku noolaadaan. Dhaqanka hawl karnimo oo la yeesho waxaa lagu qeexa wakhtiga oo sida ugu habboon loo isticmaalo.

***Gabagabada***

Adiga oo su'aalo kala duwan adeegsanaya hubi in ardeydu fikradaha aasaasiga ah sidi looga baahna in ay u fahmeen hubin in ay:

- Liis garayn karayaan arrimaha lagu garto dhaqanka hawlkarnimo.
- Fahmeen shakhsiga iyo dalka faa'iidada ay u leedahay in aan shaqada la yaraysanin islamarkaana wakhtiga sida ugu habboon shaqada loogu fuliyo.

## 7.2. IN WDAX LA CUNO IYADA OO AAN LA SHAQAYSANIN (DUL-SAARNIMO)

***Kaabayaasha/Qalabka tix-raaca***

- Sawiiro, boostaro, muujinaya dad hawlo kala duwan ku hawlan iyo dad kale oo tuugsanaya.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Tuugsiga dhibaatada uu shakhsiga u gaysto ka sokow waa maxay sababaha uu dhibaato ugu noqdo arrimaha bulshada?
- Si dadku iskaga illaaliyo tuugsiga maxaa looga baahan yaha yin ay sammeeyaan baad leedihiin?
    - ❖ Fikradahan baraarujinta buugooda ha ku qortaan.
    - ❖ Qodobada ama fikrdaha ay soo dhigaan mid mid ha u qeexaan.
    - ❖ Meelaha ay khaldeen u hagaaji kadibna casharka muhiimka ah u gudub.

Si aad dulucda casharka ugu gudubto fikradahan soo socda adeegsan karta:

- Dadka tuugsada oo dhan ma'aha dad ay baahi ama dhibaato ku kaliftay oo kali ah. Dadkan qaarkood waxay ku noqotay dabeecad ama dhaqan sababta oo ah waxaa laga yaaba in ay mudo dheer dul-saarnimo iyo iyaga oo aan shaqaysanin dad kale la soo noolaan jireen. Waxaa kale oo sabab u noqon karta in iyaga oo shaqaysan kara iska dhaadhiciyeen in ayna shaqaysan karin kadibna ay aminaan tuugsi iyo baryo in ay ku noolaadaan. Hase yeeshee, lama odhan karo dadka tuugsada dhammaantood way shaqaysan karaan dulsaarnimadana way ka bixi karaan.

Dhab ahaan waxaa jira dad badan oo aan haysan fursado kale oo ay noloshooda ku dabaraan islamarkaana aan lahayn awood ay ku shaqyastaan baahidoodana ay ku daboolan. Sida daradeedna waxaa lagama maar-maan ah in qof walba inti karaankiisa ah uu caawiyo. Si kastaba ha ahaatee, tuugsigu wuxuu culays ku keena nolol maalmeedka bulshada. Dadka aan lahayn awood ay isu-maamulaan ee deegaanada kala duwan ku kala nool wax ay tuugsiga kaga marmaan in loo sammeeyo ayaa loo baahan yahay. Bulshada inta ayna haynin dhibaatooyin caafimaad, d'a, laxaad la'aan–iwm islamarkaana leh awood iyo karti ay ku shaqaystaan waa in ay ka dhawrsoonaadaan dhaqanka tuugisgu loomana baahna in hanti, lacag ama cunto aan ku habboonayn la siiyo. Sida awgeed arragtida khaldan ee bulshadu nafteeda iyo deegaanadeeda ay ka qabto in ay ka baxdo aragti wacan, hawlkarnimo iyo isu-kalsooni in ay la timmaado ayaa looga baahan yahay.

***Hawlgal***

- "Walle Aniyo Tuugsi Kala Tagnay" sheekada leh iyada oo aasaas looga dhigayo ha akhriyaan guryahana ha kaga soo shaqeeyaan. Si saxitaan ku habboon loo siiyana fikradahan soo socda la isticmaali kara:

*Su'aasha 1aad* iyo *3aad* in qodobada loogu saxayo laga diyaariyo.

*Su'aasha 2aad* jawaabaha su'aalaha hordhaca ah laga bixiyey oo la adeegsado.

***Hawlgal***

- Iyaga oo kooxo yar-yar ah layliska in ay fasalka dhaxdiisa kaga shaqeeyaan iyada kooxba su'aal loo dhiibayo. Natiijooyinka ay wada hadalka ka soo saaraana kooxo dhawr ahi fasalka ha u soo bandhigaan. Jawabaaha ay soo jeediyeen si aad ugu saxdo qodobadan soo socd aad adeegsan karta:

1. Inti awoodooda ah si ay qoyskooda u caawiyaan waa in laga caawiyo sidi ay hawlo badan ama farsamooyin badan u baran lahaayeen Tusaale in uu qofku dharkiisa sida shiraabaadka, kalsoonka uu dhaqdo, koobaha nadiifsado, beeraha fallo, ka ganacsado xoolaha, kolba inta ay awoodiisu u saamaxdana qoyska uu caawiyo. Guryaha iyo agagaarka oo uu xaaqo islamarkaana nadiifiyo in looga baahan yahay in loo qeexo ayaa lagama maar-maan ah. Arrintanina in ay wax wanaagsan tahay islamarkaana la aminsan yahay arrimaha la xidhiidha ka qayb galinta ama in carruurta yar-yar laga qayb galiyo shaqada waxaa lagu xaqiijiyey shirki ama koonfeereensiga carruurta Afrika. Laakiin waxaa maamnuuc ah in shaqo ayna awood u lahayn islamarkaana caafimaadkooda iyo xubnahooda wax u dhimaysa in loo dhiibo. Waana in ardeyda la ogaysiiyo.
2. Si hawl-karnimo leh loo shaqaysto, dadka kalana kolba inta la awoodo la caawiyo, la iska illaaliyo in shaqada la yaraysto, dadka dhaqanka hawlkarnimo lehna khibradahooda iyo wax qabadkooda la aqbalo lana socdo, shaqada guriga iyo ta fasalka lagu siiyo ama lagu dirana wakhtigeeda lagu fuliyo–iwm ayaa ka mid ah kuwa la tilmaami karo.
3. In dadka kale ee shaqaynaya la daawado in ayna habboonayn oo la ogaysiiyo. In shaqada natiijo wanaagsan laga soo hooyo nolol heer sare ahna lagu noolaado oo kali ah ma'aha faa'iidada shaqadu. Waxaa kale oo ay qayb libaax ka qaadata

faa'iidooyinka badan oo dalka iyo dadkaba anfacaya oo ku salaysan in la istaageersado islamarkaana si is-ixtiraam iyo is-faham ku dheehan yahay loo wada shaqaysto.Iyaga oo ku salaynaya kolba awoodoodu inta ay u saamaxdo in ay shaqeeyaan dhisaan ama yeeshaan dhaqan hawl karnimo iyo Anshax wanaagsan in ay lagama maar-maan u tahay mustaqbalkooda, dalkooda iyo bulshadoodaba waa in la dareensiiyo.

*Gabagabada*

- Ujeedada casharkan waa in la ogaysiiyo in dul-saarnimada (in wax la cuno iyada oo aan la shaqaysanin) si ficil mudo dheer lagu soo dhaqmayey oo dabeecad ama dhaqan u noqday dadka isticmaala in uu yahay Arragtiyada iyo fikradaha la xidhiidha siyaabaha kala duwan ee dulsaarnimada ah ee bulshada ka dhax muuqda muwaadiniinti tir-tiri lahaa in ay noqdaan in lagu sugayo oo ardeyda flala socodsiiyo weeyaan. Qof kasta oo muwaadin ah in uu yeesho dhaqan hawlkarnimo oo uu ku shaqaysto kagana dulsaarnimada iyo arragtiyada xun-xun ee la xidhiidha ayey sharaftiisa iyo mustaqbalkiisuba in ay wanaagsanaadaan ku xidhan yahay.

Ardeydu in ay fahamtay nuxurka casharka si aad u xaqiijiso su'aalo kala duwan weydii kadibna si kooban ugu sharax qodobada ugu waa weyn ee ay soo barteen una soo gunnaanad casharkan.

## 7.3. ANSHAXA SHAQADA IYOXIRFADA (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha la tix-raacayo*

- Boostaro, sawiiro–iwm muujinaya muwaadiniin shaqooyin kala duwan ka qayb qaadanaya.
- Qoraalo, sharciyo ku saabsan xeerarka shaqada.

### 7.3.1. Macnaha Anshaxa Shaqda iyo Xirfada

*Hordhaca*

*Su'aalaha laga dhaqaaqayo*

- Qof shaqaale ah kartida aqoonta shaqo wuu leeyahay marka la leeyahay waa maxay macnuhu?
- Idinka ardey ahaan noocyada Anshaxa wanaagsan ee la idinka sugayo in aad la timmaado maxay kala yihiin?
  - ❖ Si ardeyda aad u baraarujisid ku dhiiri gali in ay qodobo kala duwan soo jeediyaan.
  - ❖ Fikradaha ay soo jeediyaan ha ka wada hadlaan.
  - ❖ Tallooyinka ay soo jeediyeen sida ay aqoonta iyo Anshaxa wanaagsan xidhiidh u leeyihiin ama midba midka kale laga maar-maan u yahay si ay u fahmaan sii tilmaamo ku saabsan u soo bandhig.

*Hawlgal*

- Su'aalaha layliska iyaga oo kooxo yar-yar ah fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan.

1. Haw lama shaqo kasta in sida ugu habboon loo fuliyo had iyo jeer waxaa lagama maar-maan u ah islamarkaana u baahan tahay in Anshaxa aqoonta shaqo lagu socdo. Urur ama shirkad wanaagsan oo la jecelyahay si loo noqdo kuma filna oo kali ah aqoonta xirfadeed ee shaqada loo leeyahay waxaa kale oo aad muhiim u ah oo aan sina looga maarmi karayn in Anshaxa wanagsan ee aqoonta shaqo leedahay lagu dhaqmo. Baraha waxaa laga sugaya in uu ardeyda u gaysanin falal ama tallooyin xubnaha iyo qalbiga/niyada ama mooraalka ardeyda dhaawac u gaysanaya oo ka mid ah nooc ka mid ah Anshaxa aqoonta shaqo ee loo baahan yahay in lagu dhaqmo.
2. Aasaasiyan aqoon shaqo noocay doontaba ha ahaatee horrumarka dalka iyo qofkaba kaalin muhii ah ayey ku leedahay ama ka qaadata. Waxaa inta ka sii badan aqoon yahanada waaxyaha kala duwan ee shaqada ku soo takhasusay ee aqoon iyo khibraha aad ka u badan leh waxay faa'iido heer sare ah u leeyihiin in Dalka horrumar wanaagsan la gaadhsiiyo.

Rasmiyan kartida aqoonta shaqo iyo Anshaxa wanaagsan ee aqoonta shaqo waa labo shaqy oo

aan la kala saari karin lana mid ah labada dhinac ee halka caantee leeyahay waa labo isa saaran oo midba midka kale la'aanti shaqayn karayn. Qofka shaqaalaha ah kartida aqooneed ee shaqada in uu leeyahay waxaa lagu miisaamo ma'aha oo kali ah aqoonta iyo xirfado dhammaystiran oo uu u yeesho shaqada uu hayo. Waxaa kale oo lagu qiimeeya kolba jacaylka uu shaqada u hayo inta uu le'egyahay iyo kolba Anshaxa aqoonta shaqo ay leedahay sida uu u illaalinayo uguna adeegsanayo sida ugu habboon bulshada natiijo wanaagsan oo wax tar leh ugu soo saarayo. Sida daradeed, ardeydu aqoon kali ah in ay barato lagama sugaye waxaa kale oo looga baahan yahay in ay noqdaan muwaadiniin anshax wanaagsan leh in uu baruhu fahamsiiyo ayaa looga baahan yahay.

### 7.3.2. Aqoonta/Cilmiga Anshax wanaagsan hadi uuna wadanin Dhibaatooyinka uu muwaadiniinta u horseedi karo

*Su'aalaha Hordhaca*

- Aqoon yahanka leh kartida shaqo ee uu ku soo takhasuusay laakiin Anshax wanaagsan aan lahayn faa'iidada uu keeni kara aadbay u yar tahay sababaha loo yidhaahdo waa maxay?
  - ❖ Tallooyinka la soo jeediyey fahamka ama arragtiyada ay ka haystaan warqad ha ku diyaariyaan saaxiib ay is-garab fadhiyaana haka wada hadlaan.
  - ❖ Fikradaha ay soo qoreen ardeyda ha u soo bandhigaan.

*Hawlgal*

- Layliska waalidiintooda ha kala soo sheekaystaan hana ka soo shaqeeyaan.

Aqoonta shaqo oo aan Anshax Wanaagsan lahayn ama ka maqan yahay Dhibaatada ay Muwaadiniinta gaadhsiin karto.

- ❖ Aqoonyahanku adeegyada oo uu bulshada siiyo waxay faa'iido yeelanayaan kali ah marka uu Anshax wanaagsan iyo dhaqan ama dabeecad firfircoon ku xoojiyo. Qofka aqoonyahanka ah cilmiga uu shaqada u leeyahay heer kasta uu rabo ha gaadhsiisnaade hadi anshaxa wanaagsan u ulahayn ama ka maqan yahay adeegyada uu bulshada siiyo marna ma noqonayaan kuwa buuxa. Kartida cilmiga shaqo iyo Anshaxa cilmiga shaqo arrimaha kaalinta ugu muhiimsan ka qaata in la yeesho dhaqan hawl karnimo kuwa ugu muhiimsan weeyaan.
- ❖ Cilmiga shaqo ama kartida cilmiga shaqo ee waaxda qofka aqoon yahanka ah ka shaqeeyo ay uga baahan tahay aqoon ahaan iyo xirfad ahaan intii loo baahna in uu leeyahay iyo in kale waxaa lagu qeexo weeyaan. Hase yeeshee aqoon iyo karti kali ah natiijo wanaagsan shaqo ama adeegyo la bixiyo in aan lagu gaadhi karayn ayaa la amisan yahay. Kartida cilmiga shaqo ee qofka leeyahay waa in ay waafaqsanaato laakiin hadi ayna is-waafaqsanayn waxaa dhici karta in dhibaad u daran, soo gaadho bulshada.

*Gabagabada*

- Waxbarashada qaybtan qodobada ugu muhiim san in ay fahmeen si aad u xaqiijiso weydii su'aalo kala duwan. Tusaale hubi in ay:
  - ❖ Qeexi karaan macnaha kartida cilmiga shaqo, Anshaxa aqoonta shaqo iyo waliba xidhiidhka u dhexeeya baladan.
  - ❖ Cilmiga shaqo marka uuna wadanin Anshax wanaagsan dhibaatooyinka uu bulshada u horseedo in ay sharaxi karayaan oo aad hubisid.

## 7.4. DHAQANKA SHAQADA IYO HORRUMARKA (2-XIISADOOD)

*Qalabka tix-raaca*

- Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya.
- Siyaasadaha iyo istraatiijiyadaha horrumarineed (horrumarinta miyiga)

### 7.4.1. Ujeedooyinka Horumarineed ee ku Xusan Dastuurka J.D.F Itoobiya

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Ujeedooyinka horrumarinta dhaqaalaha kuwa la yidhaahdo maxay yihiin?
- Si loo dhaqan galiyo ujeedooyinka horrumarinta dhaqaalaha maxaa loo baahan yahay in la sammeeyo?
  - ❖ Ardaydu iyaga oo koox-koox ah fikradaha korka ku xusan ha ka wada hadlaan. Waxyaabaha ay fahmaana in ay soo bandhigaan ku dhiiri gali.
  - ❖ Horrumarinta dhaqaalaha fikrada leh fikradaha ku saabsan si kooban marka uu ugu qeexo duluda casharka wuu dhaafi karaa. Dhab ahaan waxaa laga yaaba marka loo fiiriyo heerkooda fikradaha laga dhaqaaqayo in ay ku adkaadaan ardeyda badan kooda. Sida daradeed fikradda 'qorshe' leh in waxbarashada qaybtan iyo qorshaha imtixaanka inta lagu ladho in uu baruhu tuso ayaa loo baahan yahay.

**Siyaasadaha iyo Istraatiijiyadaha Horrumarinta**

Qaybaha kala duwan sida waxbarashada, caafimaadka, xidhiidhka dibada, dhaqaka, qiimaha hantida, Daryeelida khayraadka dabeeciga ah, arrimaha qoyska–iwm in isbedel horrumarineed iyo in horrumarka dalkeena la dadajiyo ujeedooyinka dawladu diyaariso marka si guud la isugu soo koobo ujeedooyinka horrumarinta iyo waliba siyaasadaha horrumarinta ayaa loogu yeedha. Ujeedooyinka dhaqaale ee xiliga gaaban iyo xiliga fogba leh ee sida warshadaha, ganacsiga, beeraha, dhaqid a l'oda waaxyaha ka tirsan ama barnaamijyada horrumarinta–iwm waxyaabaha la rabo in la qabto, darajo ahaan heerka la rabo in la gaadho, natiijooyinkala hiigsanayo in la gaadho barnaamijo ku saabsan ujeedooyinka dhaqaale waxay ka kooban yihiin arrimo kala duwan oo aad u faah-faahsan islamarkaana aad ubadan. Ujeedooyinka dhaqaale heerka horrumarka Dalka in kor loo qaado barnaamijyo ku saabsan weeyaan.

Waxaa kale oo ka mid ah ujeedooyinkan istraatiijiyado iyo barnaamijyada xirfada ama farsamooyinka lagu dhaqan galinayo oo aad u faah-faahsan.

Guud ahaan siyaasadahan iyo istraatijiyadahan ujeedooyinka horrumarinta dhaqaale ee la isku dhafay waxaa loogu talagalay in lagu tirtiro dib u dhacnimada iyo saboolnimada Dalkeena ka jirta horrumar la taaban karana la gaadhsiiyo. Siyaasadaha iyo istraatiijiyadaha horrumarinta dalkeena badankoodu waxay mudnaan siinayaan qaybaha dalkeena dhaqaale ahaan aasaaska u ah sida beeraha, miyiga, kor u qaadida nolosha bulshada rayadka ah iyo guud ahaan horrumarka guud ee dalka.

***Gabagabada***

Marka hore sii ardeyda fursad ay kaga sheekeeyaan waxyaabaha aasaasiga ah ee ay ka fahmeen casharadi ay soo qaateen ka hubi in ay fahmeen ujeedooyinka horrumarinta ee ku xusan Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya.

## JAWAABHA SU,AALAHA GEBOGABADA CUTUBKA

### I. Kaga jawaab Run ama Been

1. Run
2. Been
3. Run
4. Been
5. Run.

### II. Isugu aadi sida ay isugu haboon yahiin

1. T
2. X
3. B
4. D
5. KH.

### III. Ka dooro jawaabta saxda ah

1. X
2. B
3. X
4. T
5. X.

### IV. Buuxi goobaha banana

1. Dhaqan shaqo
2. Tuugsi iyo Saboolnimo
3. Anshaxa Xirfada

### V. Ka bixiya jawaab gaaban

# CUTUBKA 8: ISKU FILAANSHO

## (7-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan inay:

- Fahmaan macnaha dulsaarnimada bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaan waxaa uu yahay.
- Gartaan muhiimada ay leedahay in ay is-waafaqaan waxaa aad naftaada ka aminsan tahay ama aragtida aad iska qabtid iyo fikradaha dadka kale.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka qaybaha casharada oo faah-fahsan | Qalabka lagu xoojinayo baris/ barashada |
|---|---|---|---|
| 1. | Naftaada oo aad ku filnaato faa'iidada ay leedahay | • Sharaxaan sababta uu faa'iido u leeyahay isu-filnaanshuhu. | • Filino, boostaro–iwm muujinaya muwaadiniin shaqooyin kala duwan ku hawlan |
| 2. | Dul-saarnimo | • Qeexaan macnaha dulsaarnimada bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaan waxaa ay tahay. | • Taswiiro, filino–iwm muujinaya ka ganacsiga koontrabaadhiga |
| 3. | Isu-kalsoonaan | • Liis gareeyaan dabeecadaha lagu garto isu-kalsoonaanta.<br>• Fahmaan macnaha isu-kalsoonaanta.<br>• Ixtiraamaan aragtida dadka kale. | • Sawir muujinaya ardey waxbaranaysa ama imtixaan qaadanaysa. |

### 8.1. ISKU-FILNAANSHUHU FAA'IIDADA UU LEEYAHAY (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha la tix-raacayo*

- Sawiro, Footograaf, taariikh nololeedyo kooban ama yar-yar oo qoraal ahaan lagu diyaariyey oo ku saabsan shakhsiyaad darajo aad u saraysa gaadhay.

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

- Qeexa faa'iidada ay leedahay isu-filnaantu idinka oo ku salaynaya aqoontiina siyaabaha lama filaanka ah aad u hesheen ee ku saabsan isu-filnaanshaha.
- Dadka aad isleedihiin way isu-kasloon yihiin ee deegaanadiina ku nool magacyadooda sheega. Sababaha aad ku garateen in ay isu-kalsoonyihiin qeexa.

*Hawlgal*

- Idinka oo koox-koox ah ka wada hadla sii tilmaamo ku habboon si ay wada hadalkooda ula xidhiidhiyaan casharka. Kadibna kooxo dhawr ah sii fursad ay jawaabahooda fasalka ugu soo bandhigaan.

**Isu-Filnaanshuhu Faa'iidada uu leeyahay**

Isu-filnaanshuhu faa'iidooyin kala duwanbu leeyahay. Shaqooyinka guriga iyo imtixaanada oo aad kaliga ka shaqaysato isuna filnaanto, guriga dhaxdiisa oo aad shaqooyin kala duwan ka fulisid adiga oo aan cid kale taageero uga baahanin–iwm waxay ka mid yihiin waddooyinka isu-filnaanshaha lagu muujiyo. Arrimahan aynu soo

sheegnayna faa'iidooyin kala duwan bay leeyihiin: Tusaale ahaan.

In aad dulsaarnimo ka madax banaanaato ayaa ku suurta galaysa. Isu-filnaanshuhu wuxuu xoojiya in aad fikradahaaga ku socotid islamarkaana isu-kalsooni aad yeelatid.

Ixtiraam iyo Aminitaan in aad dadka kale ka heshoa yaa ku fududaanaysa.

Wuxuu suurta galinaya in la abbuuro muwaadin hawl kar ah oo naftiisa iyo waxaa uu yahay ku kalsoon oo dalkiisa u horseeda barwaaqo iyo horrumar la taaban karo. Wakhtiga, xooga iyo lacagta dadka kale iyada oo aan la khasaarin inaad mas'uuliyadaada ka soo baxdo ayuu awood ku siinaya.

*Gabagabada*

- Nuxurka waxbarashada qaybtan in ay fahmeen si aad u hubisid weydii su'aalo kala duwan adiga oo tilmaamo u fudaydiya heli taanka jawaabta saxda ah sii. Hubi in ay fahmeen waxyaabahan soo socda:
  - ❖ Isu-filnaanshuhu faa'iidada uu u leeyahay in dareen sinaansho la abbuuro. Dareenka xaasidnimada in la tir-tiro, dareenka isu-kalsoonidana la dhiso faa'iidada isu-filnaanshuhu u leeyahay in ay liis garayn karaan in la xaqiijiyo ayaa loo baahan yahay.

## 8.2. DUL-SAARNIMO (KU TIIRSANAAN) (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka tix-raaca*

- Hawlo horrumarineed oo meelo kala duwan laga fulinayo.
- Sawiro ka turjumayo dulsaarnimada.

### 8.2.1. Dul-saarnimadu waa maxay?

*Hordhaca*

- Ardeyga sawirka ka dul-muuqda ee ardeyga garab fadhiya jawaabaha ka eeganaya sababta uu u noqday ardey kale dulsaar ku ah maxaad u malaynaysiin in uu yaha?
- Sii ardeyda wakhti ku filan oo ay ku fiirsadaan sawirka fikradahoodana kaga bixiyaan waxaa ay ka fahamsan yihiin Dul-saarnimada.
- Tallooyinka ay soo jeedinayaan in ay sax yihiin iyo in kale si aad u xaqiijisid ardeyda kale ee aan fursad helin weydii in ay sheegaan waxaa ay la tahay.

*Hawlgal*

- "Wiilkii dulsaarka ahaa" Sheekada ku saabsan iyaga oo ku salaynaya guryaha ha kaga soo shaqeeyaan layliskan.
- Iyaga oo xubnaha qoyska kala soo sheekaysanaya ha ka soo jawaabaan.
- Dul-saarnimadu in ay dhibaatoyin badan horseedo warbixino ama xogo dhab ah ayaa lagu caddayn karaa. Dulsaarnimadu waxay qofka u diida ama ka horjoogsata in uuna aminin in uu aqoontiisa shaqadiisa iyo lacagtiisa ku noolaan karo. Maadaama ayna naftooda ku kalsoonayn marka ay dulsaarnimada ay ku sii jiraanba waxay door bidayaanin ay fikradaha dadka kale ku tiirsanaadaan. Kuma socon karaan fikradahooda gaar ahaaneed. Maadaama ay dad kale fikrad ahaan iyo dhuuni ahaanba dulsaar ku yihiin waxay si sahlan ugu dhacayaan ficilada xun-xun ee dadka kale qaarkood sammeeyaan. Maadaama ay si toos ah ugu xidhan yihiin rabitaanka dadka kale, aragtida iyo dhacdooyinka dadka kale ay bogaan a yeelan karaan mawqif u gaar ah oo ay ku socdaan. Waxyaabaha wanaagsan ee ay leeyihiin kuma fikirayaan.

*Dul-saarnimadu waa maxay?*

- Dulsaarnimadu waa dabeecad waddooyin iyo xaalada kala duwan lagu qeexi karo. Dulsaarnimadu waa adiga oo naftaada

ku filnaan kari waaya, oo dadka kale rabitaankooda iyo hantidooda nolol ku salaysan oo leh waxyeelo aad u daran ku socda. Qaar ka mid ah ardeyda oo waxbarashadooda si habboon ula socon waayey islamarkaana aan si wanaagsan u akhrisan casharadooda kadibna dhaq-dhaqaaqyo badan sammeeyey sidii uu ardeyda kale uga eegan lahaa jawaabaha ay su'aalaha imtixaanka kaga jawaabayaan si uu u helo natiijo uu ku gudbi karo ayaa tusaale u noqon kara dhaqanka dulsaarnimada. Dabeecada dulsaarnimadu waxay soo marta heerar kala duwan oo Da'du ama cimrigu marayo iyo xaalado nololeed iyo waaxyo shaqo oo kala duwan. Guud ahaan dulsaarimadu waxay qofka ka hor istaagta in arrintiisa kartidiisa, dadaalkiisa uu ku fushado waxayna ku qasabta in uu cid kale ku tiirsado si uu faa'iidadiida iyo rabitaankiisa u meel marsado. Qaarkoodna dulsaarnimada waxay u adeegsadaan farsamo ama xeelad ay dadka kale waxyeelo ugu gaystaan.

### 8.2.2. Dul-saarnimada Bulsho ahaaneed iyo ida Dhaqaala-ahaaneed

*Su'aasha Hordhaca*

- Ka ganacsiga kontrabaanka ah (sharci darada) dhibaatooyinka bulsho iyo kuwa dhaqaale ahaaneed ee uu keeno qeexa.
- Macnaha ka ganacsiga koontarabaanku waxaa uu yahay inta ay ka yaaqaaniin si ay u qeexaan dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad ay ku sharaxaan.
- Ka ganacsiga koontrabaandhigu dhibaatooyinka uu keeno sharaxaad kooban uga bixi adiga oo casharka cusub la xidhiidhinaya.

*Dulsaarnimada Bulsho iyo Dhaqaala-ahaaneed*

- Dulsaarnimadu marka heer dal laga fiiriyo waxay ka mid tahay dhacdooyinka sharci darada ah kuwa ugu waa weyn ee ka ganasiga koontrabaandhigu kaalinta koobaad kaga jiro. Ganacsiga koontrabaandhigu waa ganacsi sharci daro ah oo iyada oo cashuurta dawlada aan la bixinin  allaabo iyo qalab kala duwan dalka dibada looga bixiyo ama loo soo galiyo. Koontrabaandhigu wuxuu tilmaamaya allaabo ganacsi oo dalwada ka mamnuucday in Dalka la so ogaliyo ama laga bixiyo iyada oo waddooyin sharci daro ah islamarkaana qarsoodi ah la isugu gudbinayo. Nidaamkan ganacsi ee koontrabaandhiga ah wuxuu dhaawac aad u daran u gaysta dhaqaalaha Dalka, barnaamijyada horrumarinta, arrimaha bulsho, nabadgalyada, shaqo la'aanta–iwm sababahan ayaa ganacsiga koontrabaandhiga ka dhigay arrin xun oo dulsaarnimo nooc ka mid ah uu u noqday.

*Gabagabada*

- Su'aalo kala duwan weydii ardeyda si aad u xaqiijiso in ay fahmeen nuxurada ama qodobada soo socda macnahooda. In ay:
- U akhri sheekada ku saabsan koontiriibaanka ee buugooda ku qoran.
  - ❖ Faah-faahin karayaan macnaha dulsaarnimada.
  - ❖ Fahmeen ka ganacsiga kontrabaadhigu culayska uu ku keenay ama ku keeno dhaqaalaha dalka, nabadgalyada iyo dhaqdhaqaayada bulsho in la qiimeeyo ayaa loo baahan yahay.

### 8.3. ISU-KALSOONAAN (3-XIISADOOD)

*Kaabayaasha la  tix-raaca*

- Sawiro iyo muuqaalo muujinaya arday isku kalsoon, orad yahanada Dalkeena u dhashay sida Haile Gabrasalasie,

Qananiisa Baqale–iwm oo orad ku jira islamarkaana kaalinta koobaan ku guulaystay islamarkaana abaal guud lasiinayo.

### 8.3.1. Waddooyinka lagu garto Dhaqanka ama Dabeecada Isu-kalsoonaanta

*Su'aalaha Hordhaca*

- Qora waxyaabaha aad is-leedihiin waa lagu garta dabeecada Isu-kalsoonida.
- Qeexa ardeyda Isu-kalsoon ee dugsiga wax ka barata Dabeecadaha aad ku taqaanin waxa ay yihiin.
- Fahamki hada ka hor ay ka helleen isu-filnaanshaha si ay u qeexaan sii fursad qaar ardeyda ka mid ah.

*Hawlgal*

- "Natiijada ardeyda" qoraalka leh iyaga oo ku salaynaya layliska guriga ha kaga soo shaqeeyaan. Qodobada aad ugu saxaysidna qoraalka ha ka soo diyaariyaan. Qodobada ay ka soo diyaariyaan si aad ugu saxdiid fikradahan soo socda adeegsan karta.
- Inta ay ku gudo jiraan geedi socoka nidaamka baris-barashada in la fahamsiiyo fikrada ama aragtidaada oo aad qeexdid in ay weydiiyaan su'aalaha ay qabaan, in si firfircoon looga qayb qaato wada hadalka kooxaha–iwm in ay ka mid yihiin waxyaabaha lagu garto isu-kalsoonida. Sababo badan awgood waxaa dhici karta dadku in ay khaladyo kala duwan sammeeyaan. Si loo garto khaladka la sammeeyey loona saxo waxay u baahan tahay khaladka dhacay waxaa uu yahay in marka hore la garto. Ardeygu natiijooyinka laga khalday si loogu hagaajiyo in uu si buuxda isugu diyaariyo sidii uu barahiisa u weydiin lahaa in uu isu-kalsoonaado ayey tilmaamaysa.

*Hawlgal*

- Iyaga oo is-garag fadhiya layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan hana ka shaqeeyaan. Dhaqanka hawlkarnimo iyo sharaxaada hada ka hor laga bixiyey dul-saarnimada ayaad u adeegsan karta saxitaanka aad u saxayso layliska.
- Waddooyinka laug muujiyo ama lagu garto Dabeecada isu-kalsoonida.
- Isu-kalsoonidu xoriyada dadka, horrumarka dalka iyo wax soo saarka faa'iido aad u heer saraysa ayey u leedahay. Waxaa inta u sii dheer isu-kalsoonidu waxay kaalin muhiim ah ka qaadata in la so saaro muwaadin waxaa uu yahay ku faana kuna qanacsan islamarkaana mawqif adag leh in uu kaalin waxtar leh ka qaato horrumarinta naftiisa, qoyskiisa, dalkiisa–iwm. Waxyaabaha isu-kalsoonida lagu qeexo tusaalooyin kala duwanba lagu muujin kara. Isu-kalsoonida macnaheedu waxaa weeyaan sidan soo socota:
- Qofka oo shakhsi ahaan waxaa ama sida uu yahay garta. Arragtida saxda ah ee uu iska qabo oo uu garto.
- Qofka oo arragtida uu iska qabo qeexa isaga oo sababaha adeegsanaya ama tilmaamaya.
- Rabtiaanka iyo arragtidaada sidii dadka kale rabitaankooda iyo arragtiyadooda aad u waafaqsiin lahayd oo aad isu-daydo.
- Khalad kaaga oo aad amintid islamarkaana aqbashid.
- Rabtiaanka, doorashada (wax uu doorto), iyo aragtidooda oo aad ixtiraamtid.
- Awoodaada iyo kartidaada in aanad hoos u dhigin islamarkaana aad yasin.

- Sidii aad shakhsiyaada kor ugu sii qaadi lahayd una fahmi lahayd in aad ku dadaashid–iwm waxay ka mid yihiin dabeecadaha lagu garto isu-kalsoonida dadka.

*Gabagabada*

- Nuxurka casharada qaybtan si ay u sharaxaan waxyaabaha ay ka fahmeen sii fursado kala duwan oo ay ka mid yihiin su'aalo aad weydiiyo, iyaga oo su'aalo ku weydiiya–iwm.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA EE BUUGA ARDAYDA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been' kolba tii ku habboon

1. Been.
2. Run.
3. Been.
4. Run.
5. Been.

### II. Isu-aadi kolba sida ay isugu habboon yihiin

1. T.
2. KH.
3. X.
4. J.
5. B.

### III. Su'aalaha soo socda mid walba jawaabta ku habboon u dooro

1. T.
2. J.
3. J.
4. T.
5. J.

### IV. Buuxi meelaha bannaan

1. Koontrabaan
2. Isu-kalsooni daro/dulsarnimo
3. Gunno/Gubo

### V. Sharaxaad kooban ka bixi

# CUTUBKA 9: DHAQANKA KAYDSIGA

## (7-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Gartaan faa'iidada uu kaydsigu leeyahay.
- Fahmaan in kharashka waxyaabaha faa'iido ama muhiim aan ahayn ku baxa oo lanaaquso ama la yareeyo uu ka mid yahay waxyaabaha kaydsiga lagu garto ama lagu muujiy.
- Fahmaan in kolba sida awoodaadu tahay si u dhiganta iyo qorshe la isu-maamulo ama lagu socdo/loo noolaado sida dhaqanka kaydsiga yeelan karo.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka ka qaybaha casharada oo faah-fahsan | Qalabka lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Kaydsiga | • Qeexaan muhiimada uu kaydsigu leeyahay.<br>• Liis gareeyaan hababka kala duwan ee wax loo kaydiyo.<br>• Ku daryeelaan alaabadooda nidaamka kaydsiga.<br>• Kula taliyaan qoysaskooda in ay yeeshaan dhaqanka kaydsiga. | • Ruwaayado, filino, sawir, iyo boostaro, footogaraafyo ku saabsan kaydsiga. |
| 2. | Ficilada ama waxyaabaha dhaqanka kaydsiga ee deegaanada carqalad ku noqda | • Liis gareeyaan ficilada carqalada ku ah in dhaqanka kaydsiga laga adeegsado deegaanadooda. | • Boostaro, footooyo–iwm muujinaya khaaarinta lacagta/allaabada iyo hantida. |
| 3. | Saboolnimada | • Qeexaan dhibaatada ama halisnimada ay leedahay sabboonimadu.<br>• Sharaxaan tallaabooyinka lagama maar-maanka ah in la qaado si loola dagaalamo sabboolnimada. | • Boostaro, sawiro–iwm muujinaya sabboolnimada lex-jeclo la'aanta. |

## 9.1. KAYDINTA (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka Tix-raaca*

- Filino, sawiro iyo boostaro, xafiisiyo, footogaraafyo ku saabsan ama u qaabilsan kaydinta. dad kaydsiga dhaqaale ka sameeyay

### 9.1.1. Faa'iidada Kaydinta

*Hordhaca*

*Su'aasha hordhaca ah*

- Goobaha aad degan tihiin dad adeegsada nidaamka kaydinta sida daradeedna isu-filnaansho gaadhay ma taqaaniin? Qaab nololeedkoodi hore iyo sida ay hadda u noolyihiin faraqa iyaga oo is-barbar dhigaya saaxiibadooda ha u qeexaan.
- Fikrada lagu dhaqaqaayo iyaga oo ka duulaya fikrado kala duwan oo la xidhiidha oo ay garanayaan hadi ay jiraan ku dhiiri galin in ay qeexaan. Bare dhaqanka kaydsiga dad heer sare ku gaadhay oo aad taqaanid hadi ay jiraan tusaale ahaan ugu soo bandhig ardeyda kadibna casharka xiga ama muhiimada casharka u gudub.

*Hawlgal*

"Hinda iyo walaalaheed" sheekada cinwaanka keedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Qodobo aad su'aalaha ku saxdid hadi ay qoraalka kala soo baxaan, baruhu waxyaabahan soo socda wuu tilmaami karaa. Muddooyinki hore ee aad soo noolayd dhibaatooyin iyo dhacdooyin kala duwan maadaama ay ku soo mari karaan si aad ula halganto ugana baxdiid dhacdooyinka lama filaanka ah iyo dhibaatooyinkan in ay lacag amah anti u baahan yihiin u cadde ardeyda. Lacag lagu xaliyo dhibaatooyinkan in la kaydiyo waxaa lagama maar-maan ah in dhaqanka kaydinta la yeesho. Tirsit waalidiinteedu, hadi khibradaha kaydinta lahaan lahaayeen dhibaatooyinka dar-daran way kaga bixi lahaayeen. Hinda walaalaheedna lacagaha ay ka dhaxleen waalid9intoodi hore in ay si habboon u kaydsadaan ayaa looga baahan yahay. Noloshooda mustaqbalku si ay u noqoto mid ka hada dhaanta ama ka fiican waa in ay casharada dugsiyada loogu soo dhigo bartaan si wanaagsana u xafidaan. Waxaa kale oo looga baahan yahay in tallooyinka iyo taageerada barayaasha ay qaraabada yihiin qaataan kuna dhaqmaan.

*Hawlgal*

Layliska hadi ay qoysaskooda kala soo sheekaystaan in ay jawaab ka soo hellaanba dhici karta. Si aad ugu saxdo jawaabaha ay keenaan bare waxaad isticmaali karta qodobadan soo socda:

1. Kaydintu in ay shakhsiga, qoyska iyo heer dalba in uu faa'iidooyinka badan u leeyahay waa la tusi karaa. Kaydsigu wuxuu kuu suuro galinayaa in aad saboonimada ka baxdo nolol heer sare ahna ku noolaato. In qalab ama allaabo kala duwan la abbuurto/la yeesho iyo in ganacsiyo kala duwan iyo shaqooyin maal galineed laga shaqaysto waxay kaalin aad muhiim u ah ka qaadanaysa horrumarinta Dalka. Waxaa kale oo kaydintu suura galinaysa in aqoon heer sare ah iyo waxbarasho la hello. Dal saboolnimada ka baxay isu-filnaanshana gaadhay in uu dalkeenu noqdo islamarkaana sidi loo horrumarin lahaa ayuu kaydsigu suuragal ka dhigi karaa.
2. Ardeydu d'a kasta iyo nolol kasta oo ay ku jiraan heerkay doontaba ha gaadhsiinate waxyaabaha ay su'aashan ka faa'iidaysteen ee la xidhiidha kaydinta way dhaqan galin karaan. D'ada iyo heerka waxbarasho ee uu gaadhsiisan yahay allaabo gaara ahaaneed iyo kuwa qoyskaba in uu kaydin karo waa la tusi kara.

*Tusaale*

- Qalabka waxbarasho sida buugta, qalimaanta–iwm oo si wanaagsan u daryeelo una haysto.
- Labiskooda sida shaadhka, surwaalada, kabaha oo ay si taxadar leh u illaalshadan.
- Qalaybada guryaha lagaga adeegto, allaabada guriga in la daryeelo si wanaagsan loo isticmaalo loona illaaliyo weeyaan.

Kaydsigu waa hantida, allaabada lacagta, xooga oo sida ugu habboon uguna waxtarka badan loo isticmaalo. Kaydsigu in uu yahay wax ku duwan in khaladaad la sammeeyo ama gab-gaba lala yimmaado oo la ogaysiiyo ayaa muhii ah.

Ardeydu si ay ugu tababartaan dhaqanka kaydinta in ay lagama maar-maan tahay islamarkaana looga baahan yahay in hada kadib in ay hanti, allaab iyo lacagta ay hellaan sida ugu habboon u illaaliyaan uguna faa'iidaystaan in loo sheego yaa fiican.

### 9.1.2. Hababka kala duwan ee Kaydinta loo fuliyo ama loo Dhaqangaliyo

*Su'aasha hordhaca*

- Habka kaydintu macnah-ahaan maxaad u malaynaysiin in uu yaha?
- Nidaamyada kala duwan ee deegaanadiina laga adeegsado ee qoysaskiinu waxyaabaha kala duwan ku kaydsadaan ha qeexaan.

*Hawlgal*

- "Qorshahii Dhicisoobay" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Iyaga oo qoysaskooda kala soo sheekaysanaya ha ka soo shaqeeyaan.

**Hababka Kala Duwan ee Wax loo Kaydsado**

In kasta oo meelo kala duwan habab kala duwan oo wax lo kaydsado ay jiraan bangiyada, khasnada, ururada bulsho ee u qaabilsan dayminta iyo kaydinta waxay ka mid yihiin hababka ugu muhiimsan ee lacagta loo kaysado. Hababkan wax loo kaydiyo waa habab suura galinaya hantida iyo lacagta si taxadar leh, sida ugu habboon islamarkaana qorshaysan in loo isticmaalo xirfado ama farsamooyin ku sahlaya leh. Dhanka ardeyda marka aynuu ka fiirino caanteenada, gambooyinka, subuuniyada–iwm ee guryaha dhaxdooda ku daadan oo saxaarad ama sanduuqyo yar-yar oo lagu urursado loo sammaysto ayaa ah hab ka mid ah hababka wax loo kaydsado.

*Gabagabada*

- Adiga oo hababka kala duwan adeegsanaya hubi in ardaydu fahamtay qodobada ama fikradaha aasaasiga ah ee soo socda.
- Faa'iidada kaydsiga iyo hababka kala duwan ee wax loo kaydsado in ay fahmeen waa in aad xaqiijisid.

## 9.2. FICILADA WAXYEELADA U GAYSANH KARO DHAQANKA KAYDSIGA (2-XIISADOOD)

*Kaabayaasha La Tix-raacay*

- Sawiro, boostaro tilmaamaya hanti ama lacag la khasaarinayo ama si habboon aan loo isticmaalayn.

*Hordhaca*

*Su'aasha Laga Duulayo*

- Calaamadaha sawirka korkiisa ka muuqda sida ay u noqon karaan ficilo carqaladeeya kaydsiga sharaxaad ka bixiyaa idinka oo tusaalooyin adeegsanaya.
- Sawirka iyaga oo fiirsanaya in ay fikrado soo bandhigaan ku dhiri galin.
- Fikradaha ay soo jeediyeen in ay yihiin kuwa kaydsigu ka muuqda xaqiijin.

- Sawirku in uu muujinayo aragtiyada dib u dhacnimo ee dhaqanka kaydsiga burburiya tirada qoyska oo bata mid ka mid ah inuu yahay oo ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay. Waalidiinta qaarkood in ay carruur aan la kala korinin ay dhalaan jecelyihin islamarkaana aminsan yihiin in carruurtu tahay hanti tallaabo khaldan ahna ay tahay u sharax ardeyda. Adiga oo u soo gaabinaya fahamsiin in falkani lidi ku yahay in wax la kaydsado kadibna qodobka xiga u gudub.

*Hawlgal*

B. Deegaanadooda ciidaha ama xusaska sanada iyo sababa kala duwan iyada oo loo fiirinayo ama lagu salaynayo hanti ka badan dad ku bixiya hadi ay jiraan dhibaatada ku iman karta ha qeexan.

- Arrimahan korka ku xusan sii fursad ay ku sharaxaan waxaa ay ka garanayaan.
- Tallooyin hadi ay ka bixiyaan iyo hadi ayna jirin cid kale oo ka talabixinaysa qodobadan soo socda u sheeg.

Waxaa loo baahan yahay in loo sharaxo arrimaha ama waxyaabaha kala duwan ee dhaqanka kaydsiga carqalad ku ah in ay ka mid yihiin guurka, xafladaha qalin jabinta, xuska ama xafladaha kala duwan ee hanti ka badan inta la awoodi karo lagu kharash gareeyo. Ducooyinka ama xafladaha lagu lumiyo hanti aad uga badan inta la awoodi karo waxyeelada dhaqanka kaydsiga ay gaystaan ka sokow dhibaatoyin aan si sahlan xal loogu heli karayn inay qoyska u horseedaan in ardeyda fahamsiiyo ayaa muhiim ah.

*Hawlgal*

- Sheekada odhanayso' "Dhibaatadii isu ururtay" soo qaado
- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Si aad ugu saxdiid jawabaha ay ku siiyaan qodobadan soo socda ayaad adeegsan karta:

1. Arragtiyada dib u dhacnimo dhibaatooyin kala duwan in ay keenaan oo la fahmo ka sokow waxaa looga baahan yahay in ay qaataan mawqif ay isu-hortaagaan.
2. Dhanka bulshada rayadka ah marka laga fiiriyo ficilada waxyeelada leh ee la xidhiidha nidaamyada dib u dhacnimada ee la liis gareeyay in la saxo lana toosiyo ayaa loo baahan yahay. Maadaama laga yaabo in ayna kuwo dib u dhacnimo noqonin ama dadka qaarkood uga xummaanin in si taxadar leh loo saxo weeyaan.

*Hawlgal*

- Qoyaskooda inta ay kala soo wada hadlaan jawabaaha ay soo hellaan ardeyda fasalka ha u soo jeediyaan. Dhab ahaan arragtiyada dib u dhacnimo in ay kala duwanaadaan ayaa dhici karta.Laakiin qodobada ugu muhiimsan ee lagu miisaamayo waa in ay noqdaan caafimaadka guud iyo mid gaar ahba, nolosha bulshada rayadka ah, deganaanshaha aragtiyo dhibaatooyin ku keenaya ayey khusaysa.

*Gabagabada*

- Adiga oo habab kala duwan adeegsanaya xaqiiji in ay kala saari karayaan dhaqanada agaagaarada ka jira ee carqaladeeya nidaamka kaydisga ee wanaagsan in laga dhaqan galiyo si horrumar iyo isu filnaansho la taaban karo loo gaadho.

## 9.3. SABOOLNIMADA (3-XIISADOOD)

*Kaabayaasha la Tix-raacayo*

- Boostaro, sawiro–iwm muujinayo saboolnimo iyo macaluul dad u dhimanaya.

### 9.3.1. Halisnimada Saboolnimada

*Hodhaca*

*Su'aasha hordhaca*

- Sawirka korka ku xusan idinka oo fiirsanaya saboolnimada iyo gaajadu halista ay leeyihiin qeexa.

*Hawlgal*

- Iyaga oo koox-koox ah layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan.
- Dhibaatooyinka kala duwan ee saboolnimadu keento jawaabaha ama fikradaha ardeydu soo jeediso adiga oo xoojinaya faah-faahin dheri ah uga bixi.
- Waddada ugu muhiimsan ee saboolnimada lagag bixi karo in ay tahay in si hawl karnimo leh loo shaqaysto u qeex. Ardeyga si hawl-karnimo leh waxbarashadiisa aan ula soconin in uu natijooyin wanaagsan keeno nolol heer sare ahna ku noolaado uma suurta galayso. Dhibaatooyinka sida lama filaanka ah uga hor yimmaada si karti leh hadi uuna uga gudbin nolol wanaagsan in uu ku noolaado in uuna awoodi karaynin in ardeyda loo sheego ayaa loo baahan yahay. Sida daraadeed in loo hawlgalo sidi saboolnimada looga bixi lahaa nolol wacana loo gadhi lahaa ayaa lagama maar-maan ah.
- Macnaha saboolnimadu kolba dalka iyo bulshada horrumarkeedu heerka uu gaadhsiisan yahay ayuu ku kala duwan yahay saboolnimada marxalada ugu daran waa xaalada sabab u noqota in ay dad badani u dhintan. Waxyaabaha saboolnimada sababa ama aasaas ka u ah waxaa ka mid ah in si hawl karnimo ku dheehan tahay aan loo shaqaysanin islamarkaana lacagta la hello sida ugu habboon loogu kaydsanin looguna isticmaalin.

## 9.3.2. Hantida oo la Khasaariyo waxay la safan tahay Saboolnimada

*Su'aasha Hordhaca*

- Khasaarenimo macna ahaan maxay tahay? Saboolnimada maxay isaga mid yihiin?
- Khasaarenimada iyo dhibaatooyinka ka dhasha waxaa aad ka taqaanin ardeyda fasalka u soo jeediya.
- Tallooyin in ay ka dhiibtaan ku dhiiri gali bare hadi ay jiraan dad khasaara ah inti aad soo noolayd iyo dhibaatooyinka ay la kulmeen adiga oo soo bandhigaya wada hadal u qabo ardeyda adiga oo waliba caharka aad bilaabayso la xidhiidhinaya.

*Hawlgal*

- Layliskan iyaga oo qoysaskooda kala soo sheekaysanaya guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan. Jawaabaha layliska laga bixiyey qodobadan soo socda loo fiirin karaa.
- Lambarkeedu yahay 2. sharaxaada buuga ku xusan waxaa dheeri ku ah ama lagu biirsan karaa:
- Balwado xun-xun in loo barbaxo (sakhraan in la noqdo, buuri cuno/sigaar cabe iyo.
- Si awooda ka baxsan in loo noolaado waxyaabaha la xidhiidha weeyaan.
- Khasaarenimada iyo saboolnimada xidhiidhka tooska ah ee ay leeyihiin in la fahmo faa'iiday leedahay khasaarenimadu lacag iyo allaabo sida ugu habboon loo isticmaali kari waayo weeyaan. Sida daradeed arrimahan waxaa loo arka ficilo lidi ku ah kaydinta islamarkaana waxyeelo badan in ay yihiin.

## 9.3.3. Saboolnimada si loo tir-tiro waa in Kharashka baxaya la naaquso Kaydinta la caadaysto

*Su'aasha hordhaca*

Siyaabaha kharashka baxaya loo naaqusi karo ama loo adeegsan karo in kharashka baxaya lagu naaquso maxay yihiinbaad u malaynaysiin?

- Fikradaha ay qabaan in ay soo jeediyaan ku dhiiri galin.

- Tallooyinka ay soo jeediyaan casharada in aad la xidhiidhiso ku dadaal.

Dadku si ay noloshooda kor ugu qaadaan dakhligoodana siga ugu habboon ugu isticmaalaan in ay lagama maar-maan tahay in ay yareeyaan kharaashka waxyaabaha aan muhiimka ahayn ku baxaya inta la fahamsiiyo in casharka xiga loo dhaafyo ayaa la karaa.

*Hawlgal*

- Iyaga oo koox-koox ah layliskan fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Sharaxadihi hada ka hor la soo bandhigay in su'aalahan lagu saxo waa la karaa. Qaar ka mid ah hadi aynu soo qaadano: in qorshe lagu socdo, kharash aan loo baahnayn ama aan muhiim ah in la yareeyo, lacagta oo hawlo muhiim ah lagu fuliyo–iwm. Midka mid ah waddooyinka saboolnimada lagaga illaaliyo islamarkaana habka kaydinta ee casriga ah lagu dhaqmo ayaa lagama mar-maan ah sida daraadeed fikradaha buuga ardeyga ku qeexan iyo layliska korka ku qoran maadaam ay ku filan yihiin u tilmaam ardeyda siay u akhristaan.

*Gabagabada*

Si aad u hubisid in ay fahmeen nuxurka qaybtan weydi su'aalo kala duwan.Hubi waxyaabaha ay fahmeen in ay waafaqsan yihiin qodobadan soo socda iyo in kale:

- Halista ay saboolnimadu leedahay
- Khasaarenimada iyo saboolnimadu in ay isu-xulafo yihin
- Saboolnimada si loo tir-tiro kharashka baxaya oo la yareeyo iyo dhaqanka kaydsiga oo lagu tababarto faa'iidada ay leeyihiin.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GUNNAANADKA CUTUBKA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been'

1. Run.
2. Been.
3. Run.
4. Been.
5. Run.

### II. Isu aadi kolba sid ay isugu habboon yihiin

1. B.
2. Kh.
3. T.
4. X.

### III. Mid walba jawaabta ku habboon u dooro

1. X.
2. B.
3. X.
4. J.
5. X.

### IV. Buuxi meelaha bannaan

1. Guurka iyo Xafladaha aan haboonayn
2. Jamac/hagbad iyo bangiga

### V. Jawaab kooban ka bixiya

# CUTUBKA 10: KA QAYBGALKA FIRFIRCOON EE BULSHADA

## (6-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan faa'iidada laga hello ka qayb galka firfircoon ee bulshada.
- Gartaan arrimaha u  baahan ka qayb galka firfircoon ee bulshada ee deegaanada.
- Gartaan hawlaha ururada bulshada deegaanada ka jira ay qabtaan.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka qodobada oo faah-faahsan | Qalabka lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Muhiimada ka qayb galka firfircoon ee bulshada. | • Sharaxaan muhiimada ay leedahay in si firfircoon looga qayb qaato oloolaha shaqo ee dugsiga laga fuliyo iyo arrimaha sida wada jirka ah go'aano looga gaadhayo.<br>• Qeexaan faa'iidada ay ka hellaan ururada iyo gudiyada kala duwan ee ay ka qayb gallaan. | • Filino, sawiro, taswiiro kala duwan oo muujinaya ardeyda ka qayb qaadanaysa hawlo nadaafadeediyo kuwa si is-xilqaanimo ku dheehan tahay loo fuliyo. |
| 2. | Ururada bulshada rayadka ah/ baandhiyada qaabaysan oo laga qayb qaato faa'iidada ay leedahay. | • Sharaxaan faa'iidada ururada bulsho ee rayadka ah leeyihiin.<br>• Qeexaan waxtarka ay leedahay ururada rayadka ah oo laga qayb galo.<br>• Ka qayb gallan ururada rayadka ah ee dugsiyadooda ka jira. | • Footooyo, boostaro, filino–iwm tusinaya dhaq-dhaqaaqyada ururada rayadka ah ay sameeyaan |

## 10.1. MUHIIMADA KA QAYBGALKA FIRFIRCOON EE BULSHADA (3-XIISADOOD)

*Kaabayaasha/Qalabka la tix-raacayo*

- Filino fiidiyoo ah, footoo garafyo, sawiro–iwm tilmaamaya hawlo kala duwan sida nadiifinta, dadka taagta daran oo la caawiyo–iwm oo si is-xilqaanimo leh loo fuliyo

*Hordhaca*

*Su'aalaha hordhaca*

- Faraqa labada sawir u dhaxeeya si faah-faahsan u qeexa.
- Sababta keen tay faraqa labada sawir u dhaxeeya maxaad u malaynaysiin in ay tahay? Ka qayb galka bulsho mide tilmaamaysa?

Adiga oo adeegsanaya qodobadan soo socda u sax wixii khaladaad ah ee ay sammeeyaan sawirka 10.1 inuu tilmaamayo dad aad u tiro yar in ay shaqaynayaan halka dadka kalina taagan yihiin, sheekaysanayaan, islamarkaana ay si aad u yar/u hoosaysa uga qayb qaadanayaan u sheeg.

Sawirka 10.2 Dadka intooda badani in ay si firfircoon uga qayb qaadanayaan shaqada sida-daradeedna uu yahay sawir muujinaya ka qayb gall bulsho oo aad u heer sareeya fahamsi ardeyda.

*Hawlgal*

- "Hadalkii Maamulaheena" Sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan su'aalaha markaad u saxaysana qodobadan soo socda adeegsan karta.
- Jawaabaha su'aalaha 1-3 qoraal ka soo diyaari.

*Su'aasha 4aad* iyo *5aad* hawlo ay guryahooda kaga soo shaqayn karaan oo la xidhiidha ka qayb galka firfircoon ee bulshada sida xaadhida ama nadiifinta agagaarka, anshaxa wanaagsan oo lagu socdo, carruurta dhibaataysan oo lagu caawiyo qalab waxbarasho, iyo qaadhaan lagu taageerayo oo loo ururiyo–iwm in ay soo fuliyaan kadibna loo saxo.

*Hawlgal*

- Layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga wada hadlaan iyaga oo koox-koox ah. Qodobadan soo socdana waxaad adeegsan karta marka aad su'aalaha jawaabtoodu u saxaysid:

1. Fikrada kala duwan oo lagu qanci karo ayaa la soo qaadi kara. Tusaale bulshadu hawlo faa'iidooyin guud u leh sida biyaha la cabo, dugsi, xarun caafimaad, jid, barnaamij horrumarineed si ay u fuliso muwaadiniinta in looga baahan yahay in ay si fir-fircoon uga qyab gallaan isuna urursadaan. Maadaama dalku ka dhaxeeyo muwaadiniinta oo dhan hadi ay uwaadiniintu lacagtooda, xoogooda iyo aqoontooda u huriy waayaan wax soo saarka dalka in ayna horruar iyo wax soo sar sammayn karaynin oo loo sharaxo iyada oo caddaymo toos ah la adeegsanayo ayaa oo la kara Dawladu awooda ay leedahay marka loo fiiriyo waxyaabaha ay bulshadu u baahan tahay oo dhan in ay mudo yar gudaheed ku soo dhammaystiro way ku adag tahay. Hase yeeshee bulshadu xoogeeda, hantideeda iyo aqoonteeda in ay meel isugu gayso ku fuliso hawlo kala duwan si fir-fircoona ugu hawl gasho ayaa looga baahan yahay talo ama fikrad leh ayaa loo soo dhigi karaa islamarkaana lagu qanci karo.
2. Ka qayb galka fir-fircoon ee bulshadu faa'iidooyin kala duwan bu leeyahy. Faa'iidooyinka waxaa ka mid ah muwaadiniintu isu-soo dhaweeya. Dhibaatooyinka deegaan iyo kuwa heer

dal in ay ka wada hadlaan islamarkaana xal u raadiyaanbu kaalin muuhiim ah ka qaata. Xidhiidhka bulsho ee midba midka kale la yeelanayo ama la leeyahay ayuu xoojiya. Culayska dawlada saaran eek u aadan xal u helida dhibaatooyinka kala duwan ee bulshada ayuu ka naaqusa. Waxaa kale oo uu fudaydiya faa'iidooyinka dhaqdhaqaaqyada kala duwan laga hello sidi si caddaalad ah loogu wada isticmaali laahaa shaqo kooxeed.

Laba kooxood oo mid walba ka kooban yahay 5-6 xubnood diyaari kadibna koox walba hal su'aal ah si, warbixin aan hal bog ka badnayn oo dugsiyadooda iyo deegaanadooda ku saabsan in ay soo diyaariyaan ogaysi. Si ay warbixinadooda u soo diyaarsadaan wakhti 3 maal-mood aan ka badnayn u qoonde. In kasta oo laga yaabo in aad casharka kale, bilawday marka ay warbixinadooda soo diyaariyeey. Adiga oo haddaba tixgalin siinaya faa'iidada ay ka helleen shaqooyinka kooxda si wakhti ay warbixinta ku soo bandhigaan.

***Hawlgal***

- Iyaga oo koox-koox ah layliska fasalka dhaxdiida ha kaga shaqeeyaan. Jawaabaha su'aalaha marka aad saxaysid waxyaabaha soo socdaad fiirsan karta:

1. Ardaydu si ay su'aasha u fahmi karaan shaqaaluhu xafiiska ay ka tirsan yihiin sida looga baahan yahay in ay uga qayb qaataan waa in ay sida noqoto su'aal ah, u soo bandhig. Farsamo ka mid ah farsamooyinka nidaamka diimuqraadiga waxaa weeyaan ka qyab galka firfircoon ee bulshada in la xoojiyo. Nidaamka diimuqraadiga ah wuxuu dhigaya haba yaraate in ayna jirin wax is-hor taagi ka qayb galka bulshada. Taa macnaheedu waxaa weeyaan ka qayb galka fir-fircoon ee bulshada xaalado iyo deegaano badan ba laga dhaqan galin kara iyada oo wax xadidaad ah ama xad ah loo sammeynin. Heer xafiis marka loo fiiriyo xaqa shaqaaluhu u leeyahay in uu ka qayb qaato dhammaan arrimaha khuseeya oo dhan waa in loot ix-galiyo. Hase yeeshee marka sida la leeyahay macnuhu ma aha xafiis ahaan go'aanada la qaadanayo oo dhan bu ka qayb qaadanaya. Sharciga iyo nidaamku waxaa uu u fasaxay ee loo xilsaaray go'aanada la xidhiidha in uu si fir-fircoon uga qayb qaato waa xuquuq sharcigu u ogolyahay. In uu firkad ka dhiibto, aqoon iyo xoogba in uu si fir-fircoon ugaga qayb galo wuu kara.
2. Waxyaabaha ka qayb galka ardeyda u baahan iyo arrimaha iyaga khuseeya in ay ka qayb qaataan in ay xaq u leeyihiin fahamsi. Tusaale guddida arrimaha ardeyda u qabilsan shirarka ay yeeshaan, nadaafada iyo illaalinta bilicda agagaarka, ololaha, anshaxa ama asluubta ardeyda ee fasalka iyo dugsiga, xaalada la xidhiidha geedi socodka–iwm go'aanada ku saabsani in ay ka qayb galaan xaqbay u leeyihiin. Sida daradeed heer ahaan iyaga iyo ardeyda kale ka qayb galkooda marka ay fahmaaninay isticmaalaanba looga baahan yahay.

**Muhiimada uu leeyahay ka Qaybgalka Fir-fircoon ee Bulshadu**

Horrumarinta dalka iyo barnaamijyada wax soo saarku waxay si deg-deg ah u dhaqan galin karaan marka ka qayb galka firfircvoon ee uwaadiniintu xoojinayo. Sida daradeed dhaqanka ka qayb galka firfircoon dugsiga iyo guriga laga bilaaba. Qof in uu muwaadinin fiican yahay waxyaabaha lagu garto waxaa ka mid ah arrimaha heer deegaan iyo kuwa heer Dalba marka uu si firfircoon uga qayb gali karo weeyaan. Iyada oo arrintan laga duulayo nidaamka diimuqraadigu ka qayb galka firfirfcoon ee muwaadiniinta ayuu ku salaysan yahay islamarkaana uu dhisa. Dhaqanka qayb

galka firfircoon horrumarka dalka wax soo saarkiisa faa'iido aad u heer saraysa ayuu ku leeyahay. Maadaama dhaqanka ka qayb galku dhiso arragtida lahaanshaha wuxuu koriya dareenka muwaadinimo kobcinta nidaamka diimuqraadiyadeedna kaalin muhiim ah bu ka qaata. Iyada arrimahan laga duulayo faa'iidada iyo waddooyinka lagu garto ka qyab galka firfircoon ee bulshada in faca soo socda la ogaysiiyo dhaqanka qayb galka d'ada soo kacaysana la xoojiyo ayaa loo baahan yahay.

*Gabagabada*

Fikradahan soo socda ee aasaasiga ah in ay ardeydu fahamtay in la qiimeeyo lana xaqiijiyo ayaa loo baahan yahay. Sida daradeed, hubi in ay fahmeen:

- Muhiimada uu leeyahay ka qayb galka fir-fircoon ee bulshada iyo oloolaha shaqo ee guryahooda laga fuliyo iyo arrimaha la rabo in ay go'aan ka so saaraan ooay si buuxda uga qayb qaataan faa'iidada ay leedahay in ay liis garayn karaan oo la xaqiijiyo ayaa muhiim ah.

## 10.2. FAA'IIDADA AY LEEDAHAY IN LAGA QAYB QAATO URURADA BULSHADA RAYADKA AH (3-XIIDADOOD)

*Ilaha/kaabayaasha La Tix-raacyo*

- Sawiro, boostaro, filino, sheekooyin muujinaya dhaqdhaqaaqyada ay samm-eeyaan ururada bulshada rayadka ah.

*Hordhaca*

*Su'aasha laga duulayo*

- Sawirada korka ku xusan maxaad ka fahamteen?
- Sawirka 10.4 ee korka ku xusan ururka ka muuqda muxuu bulshada faa'iidooyinka siin kara?
  - ❖ Fikradaha la rabo in sawirada lagu qeexo oo laga wada hadlo.
  - ❖ Fikradaha la soo jeediyo oo mar kale laga wada hadlo.
  - ❖ Sawirka 10.3 wuxuu tusaya ama tilmaamaya dad dareen mas'uuliyadeed aan lahayn islamarkaana wax xil ah uuna saarnayn oo deegaanka ay ku noolyihiin qashin ka buuxinaya islamarkaana saxada goobta xummaynaya. Arrintanina in ay caddaynayso natiijada ka qayb galka liita ama ugu jilicsan waxaa lagu garto in uu yahay u qeex ardeyda.
  - ❖ Sawirka 10.4 wuxuu muujinaya dad deegaanadooda in ay xaadhaan ama nadiifiyaan si ka go'naansho leh ugu dhaq-dhaqaaqaya iyo dad kale oo soc-socda adiga oo leh ayaad u qeexi karta.

*Hawlgal*

- "Waan Mudanahay inaan Caruurnimadayda ku noolaado noolal ka dhowran Sigaarka" sheekada cinwaankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan iyaga oo kooxo yar-yar ah. Jawaabaha saxda ah ee layliskana qoraalkaad ka heli karta.

*Hawlgal*

"Xaalada Ka qaybgalka ee bulshda deegaanka Soomalida" sheekada cinwaankeedu yahay fikradaha ay ka qabaan qofba mar ha u qeexaan. Ka qayb galka ururada bulshada rayadka ah si ay u fahmaan fikrado aad ku xoojinayso u soo bandhig.

### 10.2.1. Faa'iidada ay leedahay ka qayb galka ururada bulshada rayadka ah

Ka qayb galka firfircoon ee muwaadiniinta waxyaabaha lagu garto mid ka mid ah ayaa wuxuu yahay in ururo kala duwan oo kuwa bulshada rayadka ah leedahay xubin ahaan looga mid noqdo islamarkaana hawlo mutadawacnimo loo fuliyo bulshada. Ururada bulshada rayadka ah dawlada iyo mushtamaca hawlaha kala duwan

ee ay ka taageeraan macadyada qabta weeyaan. Faa'iidada ururada rayadka ah xaaladaha shaqo ee dhabta ah ee agagaarka jira xaalad ay isugu xidhiidhaan ba loo tusi kara. Muwaadiniinta hal dal ku nool si baahihooda guud loo buuxiyo shaqooyinka ay u baahan yihiin oo dhan dawlada kaligeed in ay abuurto ma karayso. Sida daradeed dhaq-dhaqaaqyada horrumarineed ee dawladu wado dhaqdhaqaaqyada kale ee ururada aan dawliga ahayn wadaan in lagu xoojiyo ama lagu taageero ayaa looga baahan yahay.

Sida daradeed, ururada rayadka ah waxaay kaalin laxaad leh ka qaadan karaan waaxyaabaha sida beeraha iyo wax soo saarka, maal galinta deegaanka, nadiifinta, kaymaha iyo daryeelka xayawaanka duur-joogta ah, shaqada wadooyiinka, biyo nadiif a hoo la cabo, waxbarashada, dhismaha xarumaha caafimaadka.

Bulshada rayadka ay looga tir-tiro dhaqanada soo jireenka ah ee waxyeelada leh, waxyaabaha kala duwan ee la aminsan yahay iyo aragtiyada si looga saaro maadaama loo baahan yahay in fahamkooda la xoojiyo waxaa jira hawlo ururada bulshada rayadka ah qabanayso. Guud ahaan ka qayb galka bulshada oo niyad wanaag iyo rabitaankoodu ku dheehan yahay si loo kobciyo kaalin muhiim ah ayuu ku leeyahay.

***Gabagabada***

- Nuxurada ugu muhiimsan ee waxbarashada qaybtan in ay fahmeen si loo xaqiijiyo qiimayn ku sammee adiga oo hubinaya qodobadan soo socda:
- Ururada rayadka oo laga qayb galo, muwaadiniinta oo hal u jeedo sidi ay uga midho dhalin lahaa isu urursada, muwaadiniintu in ay u shaqeeyaan sida bulshada ay faa'iido ugu jirto in la kobciyo dareen shaqo jacayl oo dhamaan ah faa'iidooyinka in ay fahmeen oo la xaqiijiyo.

## JAWAABHA SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been'

1. Been.
2. Been.
3. Been.
4. Run.
5. Run.

### II. Sida ay isugu habboon yihiin isugu aadi

1. X.
2. Kh.
3. B.
4. J.
5. R.

### III. Ka dooro jawaabta saxda ah

1. J.
2. J
3. B
4. X.

### IV. Buuxi meelaha bannaan

1. Xuquuqda isu imaatinka.
2. Ka qayb gal firfircoon.

### V. Ka bixiya jawaab kooban

# CUTUBKA 11: AQOON RAADSI

## (8-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Gartaan illaha aqoonta laga hello kuwa ugu waa weyn.
- Fahmaan faa'iidada aqoonta kadib marka ay kala soocaan fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo.
- Gartaan faa'iidada khibrada akhriska iyo kaydinta warbixinta.

| Tirada | Qodobada casharada | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Allaabada lagu xoojinayo |
|---|---|---|---|
| 1. | Illaha ugu waa weyn ee aqoonta laga hello. | • Liis gareeyaan illaha aqoonta laga hello | • Footoograafyo, boostaro, dhacdooyin tilmaamaya geedi socodka nidaamka akhriska.. |
| 2. | Fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo | • Qeexaan fikradaha iyo aragtiyada dib u dhacnimo si ay carqalad ugu noqdaan korodhsiga aqoonta.<br>• Faah-faahiyaan fikradaha iyo aragtiyada dib u dhacnimo siyaabaha lagu garto. | • Sawiro lagu fahmi karo fikradaha iyo aragtiyada dib u dhacnimo |
| 3. | Xoq/warbixin | • Sharaxaan noocyada xoga/ warbixinada.<br>• Qeexaanxogaha waxbarashada sida daryeelo/xafido | • Shahaadooyin, wargayso, dhookumeentiyo kala duwan. |
| 4. | Khibrada akhriska oo la kordhiyo | • Dhaqan galiyaan hababka casriga ah ee casharada loo akhristo/ xafo | • Footooyo, boostaro, muujinaya dad meelo kala duwan wax ku akhrisanaya |

## 11.1. ILLAHA UGU WAA WEYN EE AQOONTA LAGA HELO (2-XIISADOOD)

### *Kaabayaasha la Tix-raacayo*

- Footograafyo, boostaro, laybreeri/maktabad, wargays-muujinaya nidaamka ama geedi socodka nidaamka akhriska,buugaag.

### *Hordhaca*

### *Su'aasha hordhaca*

- Sawirka 11.1. dadka ka muuqda warbixinada ama warbixinta aqoonta illaha u noqonaya xageed u malaynaysiin in ay ka heellan?
- Sawirka 11.2 iyo 11.3 korkooda hababka aqoonta lagu hello ee ka muuqda maxay isaga mid yihiin faraqa u dhexeeya muxuu yahay?
  - ❖ Faariinta sawirada aad ha ugu fiirsadaan.
  - ❖ Fariimaha ay gudbinayaan in ay qeexaan ku dhiiri galin.

### Tallooyinka ay soo jeediyaan ha ka wada hadlaan

- Aqoonta in meelo kala duwan, illo kala duwan iyo habab in lagu hello si ay u fahmaan tusaale ahaan ugu soo bandhig adiga oo sawirada adeegsanayana u sharax.

### *Hawlgal*

- Buuga ardeyga amarka ku xusan iyaga oo ku salaynaya 4 kooxood oo 5-6 xubnood ka kooban inta la sammeyo. Kooxuhu ardeyda fasalka warbixin ha u soo bandhigaan. Warbixinta marka ay diaariynayaan waxyaabaha ay isticmaaleen ama illaha ay isticmaaleen: Waalidiinta, baraha, buugta, dhakhtar cilmiga caafimaadka ku takhasusay, raadhiyooga, tilifeshinka,– iwm in ay qeexaan islamarkaana habab ay warbixinta u so urursadeen si fudud ha u soo jeediyaan. Haysashada iyo isticmaalka xogtu faa'iidada ay leedahay in la sharaxo. Fikrad xog ama caddaymo lagu xoojiyey, aqoon iyo aragti aasaasi ah iyo in ay horrumarka dadka faa'iido u leedahay in la ogaysiiyo.

### Illaha ugu waa weyn ee Aqoonta laga hello

- Arrimo waxbarasho iyo kuwa kale midkay doonnaan ha noqdaane warbixinada illaahooda saxda ah in laga helay laguna saleeyey waa in la xaqiijiyo. Sida oo kale, xiliba xiliga ku xiga ama aqoonta maalinba maalinta ku xigta aynu hellno in ay illo ama xogo sax ah ama lagu kalsoon yahay ku salaysan yihiin in aan xaqijino waa lagama maar-maan. Hadi aynu aqoonteena sii xoojinayno ama korodhsanayno iyo hadi aynu xaqiijinayno xogaha ay ku salaysan tahay ba waa in aynu illo kala duwan adeegsano. Tanina waxay naga caawinaysa in waxkasta oo xog iyo aqoon la yidhaahdaba inaga oo aan iska hubinin xog ama warbixin aan lagu kalsoonayn in aan amino. Waxaa kale oo lagama maar-maan ah in aynu garano aqoonta iyo xogaha illaha aasaaska ha ee ay ka soo aasaasmeen. Illaha warbixintu hadi ay badan yihiin xogta aynu mid ka helno ka kale in aynu ku xaqiijino waa loo baahan yahay.

### *Gabagabada*

- Ardeydu qodobadan soo socda ee aasaasiga ah in ay si wanaagsan u fahmeen si aad u xaqiijisid wada hadal su'aal iyo jawaab ku salaysan in aad u qabato kuna xaqiijiso waxaa ay ka fahmeen ayaa loo baahan yahay.
- Illaha aqoonta ee ugu waa weyn in aad faah-faahin karan kn la hubiyo ayaa loo baahan yahay.

## 11.2. FIKRADAHA IYO ARRAGTIDA DIB U DHACNIMO (2-XIISADOOD)

*Kaabayasha tix-raaca*

- Sheekooyin,Sawiro, filino, wada haddalo, qoraalo–iwm muujin kara ama tilmaami kara fikradaha iyo arragtida dib u dhacnimo.

*Hordhaca*

*Su'aasha Laga Duulayo*

- Deegaanadiina waxyaabaha aad ku fikirtaan arragtiyo dib u dhacnimo oo noocee ahba ku jira ama ka mid ah?

**Su'aasha hordhaca wakhti ku filan ooay ku xafidaan u qoodne**

- Saaxiibadooda ay is-garab fadhiyaan ha ka wada hadlaan.
- Hada ka hor cutubyada kala ah sinnaanta iyo kaydsiga ee la xidhiidha aragtida dib u dhanimo waxyaabaha ay ka garanayaan si ay u xasuustaan tilmaamo ka sii.
- Fikradaha iyo aragtiyada dib u dhacnimo ee deegaanadooda laga yaqaano (iyada oo laga fiirinayo dhanka caynta, dhaqanka shaqo, kaydsiga, siyaarooyinka–iwm) ha faah-faahiyaan.

*Hawlgal*

- "Macalimad Kaltuun" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan su'aasha lambarkeedu yahay 3aad iyo 4aad fikradaha iyo aragtiyada dib u dhacnimo sababo iyo illo kala duwan oo aasaas u ah in ay jiraan in la fahaamsiiyo ayaa loo baahan yahay. Waxaa jira fikrado iyo arragtiyo ama farsamooyin xiligi ay bilaabmeen, xaaladihi ay ku bilaabmeen aan la garan karin oo facba faca ku xiga ugu soo gudbinayeen illaa iyo hadana qaar badan oo bulshada ka tirsan ay leeyihiin ayaa jira. Arragtiyada dib u dhacnimo oo xiliyo hore xaalado dhacay ama jiray awgeed ku abuurmay oo laba qof, bulsho, beelood–iwm mid laan dheere ka dhigaya midna laan gaab oo bulshada inteeda badan in ay sax yihiin u qaadatay oo la iska soo dhaxlayba jira. Inta badan fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo in ay aasaas u yihiin waxbarashada iyo fahamka oo aad u yar ama aan ku filnayn in la ogaysiiyo ardeyda ayaa wanaagsan. Arragtiyada dib u dhacnimo waxbarashada casriga ah maadaama ayna waafaqsanayn waxay carqalad ku yihiin farsamooyin iyo fikrado casri ah oo lagu hannaan karo horrumar wanaagsan oo dhab ah in la meel mariyo ama la ballaadhiyo. Muwaadiniintu in ay caamonimada ka baxaan (waxbartaan) nolol heer sare ahna gaadhaan ayey ka hor is-taagaan.

*Hawlgal*

- Iyaga oo koox-koox ah layliska fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Bare marka aad u saxayso fikradahan so socdaad adeegsan karta.

1. Fikradaha dib u dhacnimo dhibaatooyinka ka dhasha kuwa ugu muhiimsan mid kamid ah ayaa waxaa uu yahay waxtarka adeegyada caafimaad ee casriga ah oo la yaraysto ama wax aan macno lahayn laga soo qaado. Tusaale:
    - Farsamooyinka dhaqanka ah ee hooyooyinka lagaga umuliyo iyo hooyooyin badan noloshooda gallaaftaan.
    - Gabadha yari si ay horray ugu guursato iyada oo d'adi guurka aan gaadhin maadaama ay guursatay dhibaatooyinka dhalmada la xidhiidha ee soo gaadha sida dhimasho, caafimaad daro–iwm.

Gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha loo gaysto.

- ❖ Waxyeelooyinka dadku ay kala kulmaan isticmaalo daawo dhaqameedyada oo laga fikiro.

2. Arrimahanina in ay yihiin wax ka soo aasaasmay fikrad-liidasho(xumo), arragti dib u dhacnimo iyo wax la aminsan yahay in laga wargaliyo ardeyda. Dhibaatooyin kala duwan in uu gaadhsiiyana in loo qeexo. Tusaale:
   - ❖ Wuxuu hoos u rida dhaqan hawlkarnimo ee dadka islamarkaana wuxu u hor seeda in dad kale dul-saar lagu noqdo. Hanti cid kale leedahay in si aan habboonayn loogu heelanaado ayuu horseeda. Noloshu burburiya saboolnimadana wuu faafiya.Nolosha qoyskana wuu majara hababiya.
3. Waddada koobaad ee fikradaha iyo aminaad dib u dhacnimo in ay tahay waxbarashada oo la ballaadhiyo iyn ardeyda la fahamsiiyo ayaa muhiim ah. Waxbarashada casriga ah fikradaha dib u dhacnimo iyo dhaqanada waxyeelada badan meeli ugama bannaana. Waxbarashada ku salaysan sababo iyo xogo aragti ama fikrado saynis-ahaaneed ku dheehan yahay ujeedo-ahaan maadaama loogu talagalay in dadku ku socdo waxaa u suurto galaysa in ay gaadhaan nolol ka wanaagsan.

**Fikrada iyo Arragtiyada Dib u dhaca**

Arragtida dib u dhacsan waa mid aan casriga ahayn islamarkaana waxyeelada badan leh. Ficilada dib u dhacsan badankoodu waa dhacdooyin la caadaystay oo mudo dheer lagu soo dhaqmi jiray islamarkaana d'aba dada ku xigta ugu soo gudbinaysay oo waxyeelo badan dadku u gaysta sababaha arragtiyadan dib u dhacnimo logoa hor jeestay ama loola ddagaalamayo waa maadaama ay waxyeelo iyo dhibaatooyin badan dadka u keenaan. Dhibaatooyinka dasha waxay ay yihiin in la ogaado ayaa loo baahan yahay.

- Fikradaha dib u dhacsani waxay is-hortaagaan dadaalada loogu jiro in la ballaadhiyo aqoonta, dhaqaalaha, siyaasada, iyo bulsho islamarkaana isbedel la taaban karo laga soo hooyo. Waddada ugu muhiimsan ee bulshada lagaga tir-tiri karo fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo waa bulshada oo la abaabulo laguna tababaro aqoonta iyo firkadaha casriga ah.

***Gabagabada***

- Adiga oo adeegsanaya su'aal iyo jawaab qiimayn ku same ardeyda si aad u xaqiijisid in ay helleen fahamki iyo aqoonti la filayey in la dhaxal siiyo. Gaar ahaan waa in aad hubisid in ay fahmeen:
  - ❖ Fikradaha iyo arragtiyada dib u dhaca ah in ay carqalad ku yihiin in aqoon wanaagsan la yeesho.
  - ❖ Dabeecadaha iyo waddooyinka lagu garto fikradaha iyo aragtida dib u dhacnimo.

## 11.3. XOG/WARBIXIN/MACLUUMAAD) (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raaca***

- Heshiisyo, shahaadooyin, wargayso, dhookumeentiyo,xusuus dhowr–iwm kala duwan.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Idinku xogaha/warbixinada ama qoraalada caddaymaha ah ee aad heshaan si nidaamsan inta aad isugu habaysaan si wanaagsan ma u xafida taan? Illaa iyo hada xoogaha aad si wanaagsan u illaalshateen ama u daryeelateen maxay ka kooban yihiin?

- Xogaha aad haysataan ee sida wanaagsan u xafidateen ama in aad si wanaagsan u daryeeshaan maxaa faa'iido idiinku jirta?
  - ❖ Fikradaha hordhaca ah waxa ay ka yaqaniin ha isu dayaan in ay sharaxaan.

Darajo ahaan fasalka ay dhigtaan iyo d'adooda marka loo fiiriyo xogaha ku habboon in ay rurusadaan islamarkaana laga sugayo in ay si wanaagsan u xafitaan ee soo socda u liis garee: Warqadaha imtixaanka, karaka dhalashada, sawirada (footograafyada), shahaadooyinka ay fasalba fasalka xiga ugu soo gudbeen, waxyaabaha hadiyad ahaanta loo siiyo, allaabooyinka, buugaagta–iwm. Faa'iidooyinka ay u leedahay in si wanaagsan u xafitaan xogahan kork aynu ku soo tilmaamayn oo si dhab ah loo fahamsiiyo iyada oo tusaale la adeegsanayo ayaa waxtar weyn leh.

***Hawlgal***

- "Cabdiyare Kaynaan" Sheekadacin-waankeedu yahay iyada oo lagu salaynayo layliska ardeyda ay isgarab fadhiyaan in ay sida wada jira ah u wada kahriyaan ha ka jwaabaan. Qodobada ka caawin kara sixitaanka jawaabaha waxaa ka mid ah kuwan soo socda:
- Cabdiyare in uu yahay ardey caqli badan oo fariin ah ama wanaagsan, dadaalka uu u galay xog ururinta, taariikhda uu deegaanka ku leeyahay iyo waxaa uu yahay marka la garto in loo bogo.

1. Xogaha la hellay, waxyaabaha aad ogaatay oo dadka kalena la ogaysiiyo, ardeyda kalena in ay isaga wax ka bartaan ku dhiiri gali.

***Hawlgal***

1. Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan qodobadan aad ku saxdana isu-day in diyaarsato:

- Asal ahaan xiligan aynu ku jirno waa xili warbixino/xogo ama warar/lagu socdo. Waxyaabo ama arrimaha ama dhacdooyinka oo dhan in ay sax yihiin iyo in ayna ahayn waxaa la xaqiijin kara marka xogo ama warbixino lagu kalsoon yahay la helo.In cadaalad ama xal caddaalad ah maxkamadu hesho, aqoon ama cilmi in dugsiga laga hello–iwm waxaa lagu heli karaa ee aasaaska u ah waa xogaha ama caddaymaha warbixineed. Si looga digtonaado in go'aan khaldaan la qaato dad kale hadi ay tahay iyo nafteena hadi ay tahayba dhibaato si ayna noo soo gaadhin waxaa lagama maar-maan ah in xogo ama warbixino dhab ah oo lagu kalsoon yahay la adeegsado. Aqoon ama cilmiyada dhammaantood in ay run yihiin waxaa lagu ogaan kara aqoonsina ay ku heli karaan kali ah marka lo ohayo xog, warbixin ama caddaymo sax ah oo sugnaanteeda la hubo.
- Xogta ama wararka caddaymaha an oo sida ugu habboon loo isticmaali waayo dhibaatooyin badanba ka dhasha. Aqoonta saxda ah iyo waxyaabaha cilmiga/waxbarashada la yidhahdo ayey dhawacda.Wararka la baahinayo ayey majara habaabisa. Waxaa imanaysa in lagu kasloonaan waayo ama kalsoonidi loo qabay ba meesha ka baxaysa.Sida daraadeedna nidaamki iyo degnaanshaha bulshada rayadka ah ayaa halis galaya.

Waxaa loo baahan yahay in ardeyda la fahamsiiyo in ay jiraan noocyo kala duwan xogo ama warbixino ah sida: waxyaabo qoran, erayo, allaabo ama agabyo, goobaha dabeeciga ah–iwm.Aqoontu in ay ku salaysan tahay xogaha caddaymaha ah ee lo ohayo waa in ardeyda la ogaysiiyo.

Xogaha ama warbixinada caddaynta ah ee shakhsi ahaaneed hadi ay yihiin iyo kuwa qoysaskooda mid kastaba ha ahaadaane in sida ugu habboon loo hayo loona illaaliyo ayaa lagama

maar-maan ah sababta oo ah dhibaatooyinka mustaqbalka kula soo gudboonaan kara ayey caddaymo lagu xaqiijiyo u noqonayaan

Sida daradeed in lagu tababaro dhaqanka ama siyaabaha xogaha loo isticmaalo ayaa loo baahan yahay. Xogaha oo si wanaagsan loo hayo ama illaaliyo faa'iidooyin badanbay leedahay. Dadku hadi wakhti fiican ku jiraan ahaan bay u adeegsanayaan.Tusaale xujada ama karaka caddaynaya khariidada guriga, warqadaha kala duwan ee lacagaha lagu bixiyo, caddaymaha markhatiga u ah guurka, iyo warqadaha dhalashada–iwm wixii dacwad ama dood ka yimmaada oo dhanbay caddaymo u yihiin.

***Gabagabada***

Adiga oo fasalka dhaxdiisa tijaabooyuin ku siinaya aqoonti ayrabeen in ay helleen in ay fahmeen waa in aad hubisid. Sida daradeed qodobada ama fikradaha loo baahn yahay in ay su'aaluhu mudnaanta siiyaan in ay kuwan soo socda noqdaanba wanaagsansan.

- Noocyada xogaha iyo xaaladaha haysashada ama illaalinta xogaha la xidhiidha.

Dhaqanka ama dabeecada illaalinta iyo isticmaalka xogaha ku saabsan.

## 11.4. KHIBARADA AKHRISKA (1-XIISAD)

***Kaabayaasha /Qalabka Tix-raaca***

- Sawiro, boostaro, goobaha wax lagu akhristo–iwm muujinaya dad meelo kala duwan wax ku akhrisanaya.

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Xiliyada habbeenka wax miyaad akhrisataan? Hadi aad wax akhridiin maalin walba xili ama imisa saacadoodbad khibrad u leedihiin in aad wax akhrisataan. Hadi aad akhrisataan maxaad u akhristaan?
- Qoraalo noocee ah ama waxyaabo noocee ah ayaad akhristaan? Maxaad ku jeclaateen in aad waxyaabo noocan oo kale akhrisataan?
- Goobaha maalinti aad wax ku akhrisataan waa halke? Meelaha noocan oo kala ah waa maxay sababaha aad ku doorateen?
  - ❖ Sawirada iyaga oo u fiirinaya geedi-socodka waxyaabaha la akhrinayo tallooyin ha ka bixiyaan.
  - ❖ Xirfadaha akhriska ee ay inta badan isticmaalaan sawirka lagu qeexi karo midka uu yahay weydii.
  - ❖ Farsamadan sababaha ay u doorteen in ay sharaxaan ku dhiiri gali.
  - ❖ Adiga oo urursanaya fikradaha ay soo jeediyaan u hagaaji wixii khalad ah ee ay sammeeyaan.

***Hawlgal***

- "Kee baa hagaagsan" qoraalka cinwaankiisu yahay in ay akhriyaan layliskana guryahooda kaga soo shaqeeyaan ku wargali. Qoraalku waxaa uu yahay macno ahaan, faa'iidada iyo geedi socodkiisa, gidhay, samsam iyo dankir dhaxdooda dooda ka dhacday marka ay fahmaan jawaabaha ay ka bixiyaan adiga oo u xoojinaya sharaxaad kooban u soo bandhig.

***Hawlgal***

- Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan qodobada.

***Khibrad Akhriska***

Akhrisku wuxuu faa'iido heer sare ah u leeyahay in aad aqoontaada gaar ahaaneed dhisto nolol aad uwanaagsan aad ku noolaatid. Kolba inta la awoodi karo in meel akhriska ku habboon la doorto si degana wax loo akhristo faa'iido wanaagsan bay leedahay. Hase yeeshee wakhti

kasta in la hello goobo wanaagsan oo wax lagu akhristo waa la heli karaa in la yidhaahdo way adagtahay. Goobta iyo xiliga la helo in waxyabo kala duwan lagu akhristo khibrada akhriskana la xoojiyo ama la dhiso ayaa loo baahan yahay.

Sidanina aad bay u wanaasan tahay. Goobaha miyiga ahna ardeydu iyaga oo guryaha iyo hadhka geedaha hoostooda fadhiya islamarkaana xoolaha illaalinaya ayey wax akhrisanayaan. Dadka ku nool dalalka horrumaray marka ay fadhiyaan meelaha basaska, diyaaradaha, tareenada–iwm laga raaco wakhtiga kooban ee gaadiidka ay raacayaan ku sugayaan madaarada iyo goobaha lagu nasto xiliga yar ee dheeriga ah ee ay haystaan iyaga oo wax akhrisanaya ayaad arkaysa. Inta ay gaadiidka saaran yihiina wax way akhristaan, khibrada akhrisku waa isha ugu saraysa ee aqoon lagu hanto.

## 11.5. HABKA CASHARADA WAXBARASHO LOO XAFIDO/AKHRISTO (1-XIISAD)

***Kaabayaasha la Tix-raacayo***

- Qoraalo, buugaag ka sheekaynaysa habka casharada loo darso/akhristo xafido.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Akhriska casharada inta aanad bilaabin ka hor diyaar garow noocee ah ayaad sammaysiin?
- Akhriska casharadiina inta aad ku gudo jirtiin xirfado/xeelad noocee ah ayaad ku socotiin?markaad dhammaysiinse?

Akhriska ka hor diyaargarawga ay sammeeyaan si ah u faah-faahiyaan dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad.

Ardeyda kalana xirfadaha ama xeeladaha ay casharada u xafidaan (Akhristaan) ha faah-faahiyaan.

Adiga oo fikradahooda xoojinaya si kooban ugu sharax.

***Hawlgal***

- "Khadar iyo Hodan" sheekada cinwaankeedu yahay iyaga oo ku salaynaya kooxo yar-yar inta ay isu-qaybiyaan fasalka dhaxdiisa ha kaga shaqeeyaan. Fikradaha sheekada iyo sharaxaada buuga ardeyga ku xusan iyada oo lagu salaynayo qodobo aan ku saxdo u diyaari.

***Hawlgal***

Layliska guryahooda ha kaga soo shaqeeyaan.

Marka aad u saxaysid waxaad adegsan karta qodobada buuga ardeyga ku qeexan iyo kuwan hoos ku xusan:

*Su'aasha 1aad.* Buugooda fikrada ku xusan u sharax.

*Su'aasha 2aad*. Qodobada buugooda lagu sharaxay iyaga oo adeegsanaya waxaa u dheer waxyaabaha laga yaabo in ay fahmi waayaan barayaashooda, qoysaskooda, saaxiibadooda–iwm ayey weydiin karaan.

***Waxyaabo kale***

Buugaag la xidhiidha mawduuca in ay akhriyaan caddayn (markhaati) ahaana u isticmaalaana waa fursad kale oo xal u noqon karta.

*Su'aasha 3aad*. Geedi-socodka farsamada ama habka xafidaada/akhriska/casharada ee ka tirsan kuwa aynu siinay farsamo ay hababka ay wax u akhristaan ee u gaar ka si ay u barbar dhigi karaan in loo fahamsiiyo islamarkaana jawaabaha ay soo jeediyeen wixii ka khaldan in loo hagaajiyo ayaa loo baahan yahay. In waxbarashada lagu wanaagsanaado ama in la adeegsado hab-farsameed wax loo akhristo oo natiijo wanaagsan lagu gaadho ama xeelado aasaasi u ah wax akhriska oo la adeegsado in natiijo wanaagsan lagu hannaan karo oo ardeyda la ogaysiiyo ayaa loo baahan yahay.

In kasta oo ay jiraan habab kala duwan oo wax loo akhristo iyo waaliba waddooyinka fiican

in haddana ay jiraan xeelado wax loo akhristo oo aasaasi ah islamarkaana natiijo wanaagsan lagu gaadhi karo in ardeyda loo sheego ayaa loo baahan yahay. Sida daradeed xeeladaha wax loo akhristo kuwa midka la doorbido si loo dhaqan galiyo waxyaabaha fudaydiya kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah diyaar garawga loo baahan yahay in la sammeeyo ka hore inta aan akhriska la bilaabin. Marka diyaar garaw buuxa la sammeeyo ka hor inta akhriska aan la bilaabin wuxuu muujiya ama dar-dar galiya xiisaha iyo niyada lo ohayo wax akhriska, ka go'naansho iyo ku adkaysi in la muujiyo:

Aqoon guud si loo helo in wax loo akhristo iyo casharada waxbarashada in la xafido in ay kala duwan yihiin waa in la fahamsiiyo ardeyda. Marka la akhrisanayo casharada waxbarasho ee maaddooyinka kala duwan waxaa aad looga baahan yahay in diyaargaraw buuxa la sammeeyo, foojignaan iyo dul-qaad ama samir in lala yimmaado.

Waxaa kale oo wanaagsan in la sammaysto jadwal casharada lagu xafido/akhristo.

Inta waxaa dheer islamarkaana lagama maarmaan ah marka fasalka dhaxdiisa lagu jiro ee baruhu wax dhigayo si degan oo dhigtoon loola socdo, waxyaabahaan la fahmin oo baraha la weydiiyo–iwm.

***Gabagabada***

- Labada cutub ee korka ku xusan qaybahooda waxbarasho maadaama ay aad isugu dhawr yihiin adiga oo qodobada ugu waa weyn soo xulanaya faham iyo aqoon ku filan in ay helleen xaqiiji. Nuxurada soo socda sidii laga sugayey in ay u fahmaan xaqiiji.

Macnaha hababka casriga ah ee wax loo akhristo.

Xeeladaha wax loo akhristo in ay fahmeena in la xaqiijiyo ayaa loo baahan yahay.

## JAWAABAHA SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA

### I. Ku qor 'Run' ama 'Been' midka ku habboon

1. Been.
2. Run.
3. Run.

### II. Isu-aadi kolba sida ay isugu habboon yihiin

1. T.
2. J.
3. B.

### III. Jawaabta saxda u dooro su'aasha ay ku haboon tahay

1. X.
2. X.
3. X.

### IV. Ka bixi jawaab kooban